**DEKREETO SHARCIYEEDA L. 1 ee 1da Juun 1963, Ansixidda Nuqulka Xeerka Habraaca Ciqaabta[1]**

**Qod. 1**

Lifaaqaan la socodo Xeerka Habraaca Ciqaabta waa la ansaxiyay, wuxuuna dhaqan galayaa seddex bilood kadib marka lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ee Dowladda.

**Qod. 2**

Hal nuqul ee Xeerkaan Habraaca Ciqaabta oo lagu shaaciyay Faafinta Rasmiga ah, waxaa loo diri doonaa Guddoomiya Goboleed kasta, Saldhigyada Booliska ee Degmooyinka, Dowladaha Hoose si loogu soo bandhigo xafiisyadaas muddo 30 beri oo xiriir ah si qofkasta u ogaan karo.

---

[1] Waxaa lagu faafiyay faafinta rasmiga ah ee cadadkii 9aad ilaa 12 aad, ee 31 kii Diisember 1964 oo ku soo baxay afka talyaaniga iyo faafinta rasmiga ah ee cadaka 2aad ilaa 11 ee 6dii Nofember 1965, kaas oo ku soo baxay afka Ingiriisiga, iyadoo xeer Lr. 1 ee 17kii febarwery 1968 qodobkiisa 8aad lagu caddeeyay in haddii nuqulka Xeerka Habka Ciqaabta ee ku qoran afka talyaaniga iyo nuqulka ku qoran afka Ingiriisiga ay is khilaafaan loo noqonayo ama la raacayo kan ku qoran afka Ingiriisiga.

# XEERKA HABRAACA CIQAABTA

**BUUGGA KOOWAAD**
Xeerar Guud

**CINWAANKA 1AAD**
Xeerar hordhac ah

**Cutubka 1aad**
Maxkamadaha iyo Qaybaha

**Qaybta 1aad**
Maxkamadaha

**Qod. 1**
**Sharciga Ciqaabta**

1. Sharciga ciqaabta waxa loo fulinayaa si waafaqsan Dastuurka iyo Xeerka Nidaamka Garsoorka, waxana fulinaya:
   a) Maxkamadaha Degmada;
   b) Maxkamadaha Gobolka;
   c) Maxkamadaha Rafcaanka;
   d) Maxkamadda Sare.

2. Sida waafaqsan sharciga Lr.3 ee 10/01/1970 oo ka soo baxay Golaha Sare ee Kacaanka, xukunka ku aadan dunuubta ku qeexan sharciga kor ku xusan, waxaa maamulaya:
   a) Maxkamada Badbaadada Qaranka oo saldhiggeedu yahay Muqdisho;
   b) Qaybaha maxkamadaas oo lagu aasaasay isla sharcigaas, qodobkkiisa 1 (Lifaaq 6).

**Qod. 2**
**Awoodda iyo dhismaha maxkamadaha**

1. Haddii aan si kale loogu sheegin Xeerkan, ikhtisaas qaanuunka ciqaabta iyo qaabdhismeedka Maxkamaddaha labadaba marka loo eego mawduuca dacwada iyo xuduudaha dhuleed waxa loo go'aaminayaa si waafaqsan Xeerka Nidaamka Garsoorka iyo sharciga lr. 3 ee soo baxay 10 Jennaio 1970 sida uu qabo Qod. 1.

2. Iyadoo aan laga hor imanayn nuxurka faqrada 4 aad ee Qod. 2aad ee Xeerka Nidaamka garsoorka, haddii aanu si kale u sheegin sharci gaar ahi, Waaxda Ciqaabta ee Maxkamadda Degmadu waxay ikhtisaas u leedahay danbiyadda ciqaabtooda ugu badani tahay sadex sano oo xadhig ah ama ganaax ilaa iyo Sh.So. 3,000, ama labadaba.

**Qod. 3**
**Qeexitaanno**

Ujeedada Xeerkan haddaan mawduuca si ka duwan loogu sheegin:

a) "Xeerka Nidaamka Garsoorka" waxa loola jeedaa Xeerka Nidaamka Garsoorka ee lagu ansixinayay Xeerka Tirsigiisu yahay No. 3 ee 12 Juun 1962;
b) "Maxkamad" waxa loola jeedaa mid ka mid ah xubnaha garsoor ee ku taxan Qod. 1aad ee Xeerkan ama waax kasta oo qaybahaa ah;
c) "Maxkamad Sare" waxa loola jeedaa:
   i) Maxkamadda Sare marka loo eego Maxkamaddaha Rafcaanka;
   ii) Maxkamadda Rafcaanka marka loo eego Maxkamaddaha Gobolada iyo kuwa Degmooyinka kuwaasoo hoos yimaada ikhtisaas Maxkamadda Rafcaanka oo keliya.
d) "Maxkamad Hoose" waxa loola jeedaa:
   i) Maxkamaddaha Rafcaanka marka loo eego Maxkamadda Sare;
   ii) Maxkamaddaha Gobolka ama kuwa degmooyinka marka loo eego Maxkamadda Rafcaanka ee xuduuda awoodeeda Garsoor ay ku yaalaan;
e) "Maxakamada Awood u leh" waxa loola jeedaa Maxkamadda ikhtisaaska garsoor u leh ga ama dhegaysiga dacwada;
f) "Gudoomiyaha Maxkamadda" waxa loola jeedaa Garsooraha hogaamiya maamulka Maxkamadda ama qayb ka tirsan Maxkamadda;
g) "Garsoore" waxa loola jeedaa qof ka tirsan Maxkamada oo u xilsaaran xilka garsoorida ee Maxkamad.
h) "Garsoore Awood u Leh" waxa loola jeedaa Garsoore gudanaya shaqadiisa garsoorenimo ee Maxkamad awood leh dhexdeeda.

**Qod. 4**
**Go'aaminta awoodda dacwaqaadista xagga mawduuca**

1. Si loo cayimo in Maxkamaddu leedahay ikhisaaska maadadeed, waxaa loo eegayaa ciqaabta ugu saraysa ee sharcigu qodobka denbi ee eeddu ku dhisan tahay u dejiyay, iyadoo lagu xisaabtamayo wixii duruufo denbiga cusleeya ah, balse layskaga tegayo saamaynta caadaystanimada.

2. Mar kasta oo Maxkamaddi aqoonsato in aanay ikhtisaas maadadeed u lahayn denbi hor yaal, sidaa ayay qaraarinaysaa ka dib codsiga xeer-ilaaliyaha ama difaaca ama iskeedba.

3. Dhawrid la'aanta qodobada ikhtisaaska maadadeed waxay dhegaysiga dacwada ka dhigaysaa baaba'a, ay Maxkamaddu iskeed ugu dhawaaqi karto marxalad kasta oo dhegaysiga dacwadaasi marayso ilaa dib u eegis.

**Qod. 5**
**Go'aaminta awoodda dacwaqaadista xagga degaanka**

1. Goobta dembiga lagu galay waxa lagu xaddidayaa ikhtisaaska dhuleed:
   Xaaladaha ah:
   a) "dembi xidhiidhsan", ama
   b) "dembi joogto ah".

Goobta uu ka dhacay falkii fal la'aantii ugu dambaysay ka dhacday ee denbiga xidhiidhsan ama joogtada ah uu ka dhacay ayaa lagu xadidayaa Maxkamadda gaas ikhtisaaska u yeelanaysa.

2. Marka:
   a) ay suurtogal noqon waydo in la xadido Maxkamadda ikhtisaaska leh si waafaqsan faqrada hore ee qodobkan ama
   b) dembiga lagu galay meel dibedda ka ah dhulka Jamhuuriyadda Soomaaliya.

Maxkamadda Sare ayaa cayimaysa Maxkamadda qaadaysa dacwadaas.

3. Is hortaaga ikhtisaaska la'aanta dhuleed waxay dhinacyadu (xeer-ilaalinta iyo difaacu) Maxkamada ka hor oogi karaan markasta oo ay ogaadaan ikhtisaas la'aantaas dhuleed ama Maxkamadaaba iskeed ugu dhawaaqi karta ikhtisaas la'aanteeda.

4. Dhawrid la'aanta qodobada saabsan ikhtisaaska dhuleed waxay keliya oo dacwada ka dhigaysaa baaba'a haddii waqtigeeda lagu sameeyo is hortaaga ikhtisaas la'aanta si waafaqsan faqrada hore ee qodobkan, isla markaana sababta ikhtisaas la'aantaas lagu xadgudbay xuquuqdii ee/sanaha.

### Qod. 6
### Wadajirka eedaysanayaasha iyo danbiyada

1. Waxaa wadajir ah marka:
   a) Hal qof wax ka badan lagu eedeeyo inay wada galeen hal ama;
   b) Hal qof lagu eedeeyo inuu galay in ka badan hal.

2. Maxkamadda ikhtisaaska u leh sida macnaha Qod. 7 iyo 8aad yahay, way amri karaan in wadajir eedaysanayaal ama denbiyo loo kala dhegaysto si kala gaara marka ay dalbadaan sidaa xeerilaalinta ama iskeedba sababo ku haboon darteed.

### Qod. 7
### Saamaynta wadajirka ee ikhtisaaska maaddadeed

1. Marka ay jiraan wadajirka ujeedo Qod. 6aad oo:
   a) Denbiyada qaarkood hoos imanayaa ikhtisaaska qaybta tashiga ee Maxkamada Gobolka, halka ay denbiyada qaarkoodna ka hoos imanayaan ikhtisaaska qaybta ciqaabta caadiga ah ee Maxkamada Gobolka ama qaybta ciqaabta Maxkamada Degmada, dhammaan denbiyadaas waxaa lagu dhegaysanayaa qaybta tashiga ee Maxkamada Gobolka.
   b) Denbiyada qaarkood hoos imanayaan ikhtisaaska qaybta ciqaabta caadiga ah ee Maxkamada Gobolka halka kuwo kalena ay hoos imanayaan ikhtisaaska qaybta ciqaabta ee Maxkamada degmada, waxaa dhammaan denbiyadaas lagu dhegaysanayaan qaybta ciqaabta caadiga ah ee Maxkamada Gobolka.
   c) Denbiyada qaarkood hoos imanayaa ikhtisaaska qaybta milateriga ee Maxkamada Gobolka, halka ay denbiyada qaarkoodna ka hoos imanayaan ikhtisaaska qaybaha ciqaabta ee kale ee Maxkamada Gobolka ama qaybta ciqaabta Maxkamada Degmada, dhammaan denbiyadaas waxaa lagu dhegaysanayaa qaybta milateriga

ee Maxkamada Gobolka marka denbiga ay galeen xubno ciidan ahi xataa haddii xubnahaasi ay ka tageen ciidanka gelitaanka denbiga ka dib, dadka aan ahayn xubno ciidan waxaa lagu dabaqayaa xubnaha (a) iyo (b) ee faqradan.

2. Dhawrid la'aanta qodobada hore ee ku saabsan saamaynta wadajirka ee ikhtisaaska maadadeed, wuxuu dhegaysiga dacwada ka dhigayaa baaba'a ay Maxkamadu iskeed u tlimaami karto marxaladkasta oo dacwadu marayso.

**Qod. 8**
**Saamaynta wadajirka ee ikhtisaaska dhuleed**

1. Marka ay jiraan wadajirka ujeeda Qod. 6aad oo laba Maxkamadood iyo wax ka badani ay leeyihiin ikhtisaas dhuleed, denbiyadaa waxaa lagu dhegaysanayaa:
   a) Maxkamadda ikhtisaaska u leh goobta denbiga ugu culus lagu galay ama;
   b) Marka tiro yo ah oo isku culays ah la galay Maxkamada ikhtisaaska u leh goobta tirade denbi ee ugu badan lagu galay.

2. Marka aanay suurtogal ahayn in la xadido Maxkamadda ikhtisaaska leh sida ay jidaynayso farqada hore ee qodobkan, Maxkamadda Rafcaanka ayaa tilmaamaysa Maxkamadda ay tahay in ay dacwadda dhegaysato; ama Maxkamadda Sare ayaa tilmaamaysa Maxkamadda ay tahay in dhegaysato dacwadda marka Maxkamadduhu ay ku yaalaan deegaano hoos yimaada Maxkamaddo Rafcaan oo kala duwan.

3. Marka lagu guuldaraysto in la dhawro saamaynta wadajirka ee ikhtisaaska dhuleed, waxay dacwadu baaba'a noqonaysaa oo keliya marka waqtigeedii is hortaaga lagu sameeyo si waafaqsan faqrada 3 aad ee Qod. 5, oo sababtaas darted xuquuqduu ee/sanaha lagu xadgudbo.

**Qod. 9**
**Isku khilaafka ikhtisaaska garsoor**

1. Wuxuu jiraa isku khilaaf ikhtisaas garsoor marka laba Maxkamadood ama ka badan ay:
   a) Isu aqoonsadaan ikhtisaaska dacwad;
   b) Diidaan isu aqoonsiga ikhtisaaska dacwad.

2. Xaaladaha isku khilaafku jiro, Maxkamadda Rafcaanka ayaa tilmaamaysa Maxkamadda dhegaysanaysa, dacwadda, hadiise Maxkamaddaha is khilaafsani ay ku yaalaan xuduud dhul ee ikhtisaas garsoor Maxkamaddaha Rafcaanka oo kala duwan, markaas Maxkamadda Sare ayaa tilmaamaysa Maxkamadda dhegaysanaysa dacwada.

**Qod. 10**
**Durida Garsooraha**

1. Garsooruhu awoodiisa Garsoore ahaan kagama qayb galin karo dhegaysi dacwad ciqaabeed haddii:
   a) uu ka qayb galay dhegaysiga isla dacwadaas Garsoorenimo Maxkamad kale;
   b) uu Dacwadaas ka noqday;

i) Xeer Ilaaliye;
ii) Qareen difaac;
iii) wakiilka dhinac;
iv) marag;
v) khabiir ama la taliye farsamo;

c) uu isagu ahaa dhinicii sameeyay war gelinta, ashkatada ama codsaday in dacwada la oogo;
d) uu ka leeyahay isagu wax dan shakhsi ah dhegaysiga dacwada;
e) uu guursaday isagu, ((cid uu dhalay)) ama ((la dhalatay)), walaalka ama walaasha, guursaday, ((cid uu dhalay)) ama ((la dhalatay)) ama uu guursaday walaalka ama walaasha ruux wal oo qayb ka qaadanaya dacwada isagoo ku leh maqaamyada soo socda midkood:
   i) Garsoore,
   ii) Ooge,
   iii) Qareenka difaaca,
   iv) Wakiilka dhinac,
   v) ama qof kasta oo ka leh wax dan shakhsi ah dacwadan.
f) uu isagu talo ka gaystay ama ku cabiray fikradiisa arrinka dacwada oo ka baxsan gudashada shaqadiisa Garsoore ahaan.

2. Garsooraha sida ugu dhaqsaha badan ayuu uga joogsanayaa dhegaysiga dacwada, isla marka uu ogaado jiritaanka waxyaabaha ku taxan faqrada hore ee qodobkan, wuxuuna u gudbinayaa arrinka Gudoomiyaha Maxkamada ama Maxakamada ka saraysa taasoo qaadanaysa talaabooyinka lama huraanka ah ee ku xusan faqrada 3 aad ee Qod. 11.

3. Tilmaamaha farqada 1 ee qodobkan sidoo kale waxa lagu dabaqayaa Garsoorayaasha dadwaynaha. Garsooraha dadwayne isla marka uu ogaado jiritaanka xaaladaha lagu taxay faqrada hore ee qodobkan wuxuu ka joogsanayaa dacwada, wuxuuna arrinka u gudbinayaa Gudoomiyaha Maxkamadda, oo isaguna diyaarinaya bedelka garsooraha dadwayne isagoo raacaya liiska garsoorayaasha dadwaynaha.

4. Gef kasta oo loo gaysto tilmaamaha qodobkan wuxuu dacwada ka dhigayaa baaba’a, ay xataa Maxkamadu iskeed ugu dhawaaqi karto marxaladkasta oo dacwadu marayso.

**Qod. 11**
**Wareejinta dacwada**

1. Marka lama huraan loo arko dan cadaaladeed ama nabadgalyada guud awgeed:
   a) Maxkamadda Sare waxay dacwada u kala wareejin kartaa marka uu codsado xeer-ilaaliyaha ama eedaysanuhu;
      i) Maxkamad derejo kowaad iyo Maxkamad kale oo derejo kowaad oo ay isku ikhtisaas ka yihiin dhinaca ikhtisaaska maadadeed.
      ii) Maxkamad Racfaan iyo Maxkamad kale oo Racfaan.

   b) Maxkamadda Rafcaanku waxay dacwada u kala wareejin kartaa qaybta ciqaabta ee Maxkamada Degmada iyo qaybta ciqaabta caadiga ah ee Maxkamada Gobolka

ee hoos yimaada xuduuda ikhtisaaskeeda ka dib marka uu codsado xafiiska xeer-ilaalinta ama ee/sanuhu.

2. Marka uu Garsooraha Maxkamadda awoodda u lehi:
   a) uu isaga laftiisu yahay difaac ama;
   b) dhinaca dhibbanaha,

Maxkamadda ka saraysaa, marka ay codsi ka hesho Xeer Ilaaliyaha Guud ama eedaysanaha ama iskeedba, waxa ay u wareejinaysaa dacwada Maxkamad kale oo hoose oo ay ikhtisaaska maadadeed siman yihiin.

3. Marka Garsooraha Maxkamadda awoodda u leh lagu duro sababaha ku xusan faqrada 2aad ee Qod. 10, Maxkamada ka saraysaa waxay:
   a) amri kartaa in dacwada lagu dhegaysto isla Maxkamadaa awooda u leh iyadoo aanu ka qayb qaadanayn Garsooraha la duray, ama;
   b) Dacwada u wareejinaysaa Maxkamad kale oo hoose oo ay ka siman yihiin dhinaca ikhtisaaska maadadeed.

**Qaybta 2aad**

Dhinacyada Dacwadda

**Qod. 12**

**Xafiiska Xeerilaaliyaha Guud**

1. Xafiiska Xeerilaaliyaha wuxuu qabtaa hawlaha ku qayaxan qodobka 8aad ee Nidaamka Garsoorka iyo shaqo kastoo u idmaya sharciga (10, 11 X.H.C.) marki laga reebo kiisaska oo awoodda u leeyahay Xeer Ilaaliyah Maxkamadda Badbaadada Qaranka.
   Sharcigan kor ku xusan iyo sharci kastoo kale, waxaa ka baxsan in Xeer Ilaaliyaha Maxkamadda Badbaadada Qaranka uu leeyahay awood inuu xiri karo, baari karo, la wareegi karo shakhsiyaad ama shey kuwaasoo xataa haddii awoodda shaqo ay hoos imaneyso maxkamad kale, garsoore kale ama Xeer Ilaaliyaha Qaranaka (lif.6).

2. Dhegaysiga dacwad kasta oo ciqaab ah Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud waxa matelaya:
   a) Xeer Ilaaliyaha Guud ama mid ka mid ah ku xigeenadiisa Maxkamadda Sare horteeda ama
   b) Xeer Ilaaliyaha Guud ama mid ka mid ah Ku Xigeenadiisu ama Sarkaal Boolis ah oo uu magacaabay Xeer Ilaaliyaha Guud oo derejadiisu ka sarayso Isbatoore, Maxkamada Racfaanka horteeda.
   c) Xeer Ilaaliyaha Guud ama mid ka mid ah Ku Xigeenadiisu ama Sarkaal Boolis ah oo uu magacaabay Xeer Ilaaliyaha Guud oo derejadiisu ka sarayso Isbatoore, Maxkamada Gobolka horteeda. Xaaladaha deg-dega ah Taliyaha Qaybta Booliska ayaa hawshaa sarkaalka booliska ah u magacaabi kara.
   d) Xeer Ilaaliyaha Guud ama mid ka mid ah Ku Xigeenadiisu ama Taliyaha saldgiga ama sarkaal uu magacaabay Maxkamada Degmada horteeda.

3. Ujeedooyinka Xeerkan, haddii aan macnaha guud u tilmaamin si kale, weedha "Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud" waxa loola jeedaa:
   a) Xeer-Ilaaliyaha guud ama mid ka mid ah ku xigeenadiisa.
   b) Sarkaalkasta oo boolis ah oo ka wakiila Xeer-Ilaaliyaha guud.

4. Baadhitaanka iyo xakamaynta yada waxa fulinaya booliska, iyaga oo raacaya awaamiirta Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud.

5. Marka sidaa lama huraan loo arko, Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud wuxuu marxalad kasta amri karaa in xafiiskiisu la wareego baadhitaanka dacwada iyo oogisteedaba.

**Qod. 13**
**Eedaysanaha**

1. Eedaysane waa qofka, xataa aan lugu soo qaban amarka qabasho oo ay soo saartay hay'ad garsoor, lagu hayo xaalad xadhig ah oo ka soo fulay hay'ad garsoor, amase loo soo saaray yeedhitaan in uu Maxkamada hor yimaado.
   Qofkaas waxa loo qaadanayaa eedaysane mudadaas dacwada marxaladkasta ilaa xukun ciqaab ah ama siidayn ahi ka noqonayo kama danbays ama ilaa laga go'aaminayo in aan dacwada la sii oogin, go'aankaas oo u dhigma siidayn ama ilaa laga ansixinayo go'aanka dacwada lagu oodayo.

2. Eedaysanaha waxa loo qaadanaya in aanu lahayn ilaa iyo uu xukun kama dambayn ahi ka soo baxayo.

3. Eedaysanaha, kadib marka ugu dambayntii ciqaab lagu xukumo ama la siidaayo ama marka go'aan in aan dacwada la sii wadin si sharci ah loo siiyo, markale isla dhacdadii laguma eedayn karo, xataa haddii dhacdaasi marka loo eego ay dhisayso denbi kii hore ka duwan, marka laga reebo tilmaamaha faqrada soo socota iyo tilmaamaha faqrada 2aad eeQod. 77.

4. Haddii eedaysanaha lagu helo ilenimo fal cawaaqibkiisa uu ka dhalanayo ka duwan oo aad iyo aad uga culus, markaasi eedaysanaha waxa lagu eedaynayaa mar kale haddii cawaaqibkaasi aanu muuqan ama aanay ogayn Maxkamaddu wakhtigii ay xukumaysay.

5. Dacwadaha oggolaansho qoraal ahi yahay lagama maarmaan, waa in codsigaa la waydiistaa Xeer-Ilaaliyaha guud, ka hor intaan la soo saarin wax amar qabasho ah oo lid ku ah eedaysanaha. Haddii eedaysanaha la qabtay isagoo fal denbiyeed faraha kula jira waa in ogolaanshahaa isla markiiba la helaa.

**Qod. 14**
**Dhinaca dhibbanaha**

1. Ujeedada Xeerkan haddaan mawduuc si kale loogu sheegin weedha "dhinaca dhibanaha" waxa loola jeedaa qofka dhibtu ka soo gaadhay denbiga ama wakiilkiisa sharciga ah.

2. Dhinaca dhibanaha ahi wuxuu ka codsan karaa Maxkamadda in eedaysanuhu ka magdhabo khasaarihii masuuliyada madani ee isaga denbiga ka soo gaadha.

3. Codsiga ku xusan farqada 2 ee Qodobkani waxa loo gudbin karaa Maxkamadda, qoraal ahaan ama hadal ahaan, ka hor intaanay bilaabmin gebagebaynta xeer-ilaalinta ee dacwada eek u xusan Qod. 119.

**Qod. 15**
**Difaace**

1. Eedaysanaha waxa difaaci kara Qareen kali ah ama dhowr Qareen difaac.

2. Xaaladaha ku cad xarafka b) ee farqada 2 eeQod. 14 Xeerka Nidaamka Garsoorka, Maxkamaddu waxay u magacaabaysaa qareen difaac xafiis, markasta oo aanu iskii qareen difaac u qabsan Karin.

3. Magacaabista Qareenka difaaca xafiiska looma diidi karo iyadoo aanay jirin cudur-daar macquul ah.

4. Marka aanu jirin khilaaf xaga danta ahi, eedaysanayaal dhawr ahi waxay wada igman karaan qareen keliya oo difaac.

5. Eedeysanaha xiran wuxuu si xur ah ula kulmi karaa, ula showri karaa qareenkiisa daafacaha ah gebi ahaan inti ay dacwada socoto.
   Markii lagu jiro kiisaska gebi ahaan awoodda u leedahay Maxkamadda Badbaadada Qaranka, sida waafaqsan qodobka 6aad ee sharciga Lr. 3 10 gennaio 1970:
   a) Eedeysanaha waxaa xuquuqdiisa loo oggolaanaya marki uu baaritaanka dhammaado;
   b) Marki eedeysanuhu la kulmayo Qareenkiisa, Xeer Ilaaliyaha ama wakiilkiisa ayaa goob jog ka noqonayo kulanka.

6. Dhinaca dhibanaha ahi wuxuu wakiilan karaa Qareen keliya.

7. Qareenka difaacu waxa uu u taagan yahay qofka wakiishay, dhammaan hawlaha Maxkamada, marka laga reebo waxyaabaha dhinaca qof ahaantii looga rabo.

**Qod. 16**
**Waajibaadyada qareeenka difaaca dhinaca eedaysanaha**

1. Qareenka difaacu sabab macquul ah la'aanteed ma dayici karo hawsha difaac ee eedaysanaha, kamana maqnaan karo fadhiyada dhegaysiga dacwada si aan eedaysanuhu u waayin xuquuqdiisa difaac.

2. Haddii Qareenka difaac uu ku xadgudbo timaamaha farqada 1 ee Qodobkan, Maxkamaddu waxay amri kartaa in isagu:

a) Bixiyo wadar lacag ah, oon ka badnayn Sh.So. 5000/- uuna siiyo eedaysanaha magdhaw ahaan, iyo
b) Bixiyo wadar lacag ah, oon ka badnayn Sh.So. 2000/-, kuna shubo khasnada Qaranka; ama
c) Waxa laga mamnuucayaa ku shaqaysiga xirfadiisa mudo aan ka badnayn hal sano.

3. Ka baaqashada qareenka dhibbanaha ee xilkiisu marnaba ma joojinayso in dacwadu socoto.

**Cutubka 2aad**

Ka warhelidda dambiga. Baaritaanka Booliiska. Wada shaqaynta ku aadan caburinta dunuubta

**Qaybta 1aad**

Xogta danbiga

**Qod. 17**

**Madaxda khasab tahay in lagu wargeliyo warka dembiga**

Warbixinta, dhibaansheegta, dacwadda iyo codsiga waa in loo gudbiyaa garsooraha, xeerilaaliyaha ama sarkaal booliis.

**Qod. 18**

**Warbixinta qaybo yo gaar ah**

Sarkaalka guud ama qofka u xilsaaran hawl guud ee ogaada dhicitaanka denbi ka mida kuwa qaran ahaan loo oogo waa in uu si dhaqso ah ugu wargeeyaa.

**Qod. 19**

**Ka Warbixinaha denbiyada ee xirfadlayaasha caafimaad**

Xirfadlaha caafimaad ee isagoo adeeg caafimaad u qabanaya qof ay u muuqato in qofkaasi ku lug leeyahay denbi ka mid ah kuwa qaran ahaan loo oogo, waa in uu sida ugu dhaqsaha badan uga warbixiyaa arrinka. Tilmaantan la dabiqi maayo marka warbixintu soo saarayso in qofkaa lagu qaado dacwad ciqaaba.

**Qod. 20**

**Soo sheegida denbiga ee Dadweynaha**

1. Muwaadin kasta oo ogaada dhicitaanka lid ku ah karaamada iyo jiritaanka Qaranka kaasi oo sharcigu u dhigayo ciqaab ah dil ama xabsi daa’in isla markiiba waa in uu sheegaa denbigaas.

2. Qof kasta, xataa haddaanu ahayn dhinaca dhibbanaha ah, oo ogaada dhicitaanka ka mida kuwa uu Qaranku oogayo wuu ka warbixin karaa.

**Qod. 21**
**Ashkato**

1. Qofkasta oo ku dhibban aan ahayn kuwa qaranku oogo waxa uu u gudbin karaa ashkato hay'adaha ay khusayso, si loo bilaabo oogitaanka denbigaa si waafaqsan Qod. 84 Xeerka Ciqaabta.

2. Xaqa ashkatada lama adeegsan karo marka:
   a. si cad ama qarsoon qofku uga tanaasulo xaqiisa;
   b. u furto dacwad madani ah oo dib u soo celinta ama magdhawga khasaaraha ah;
   c. laga gaadhay heshiis khasaarihii ka soo baxay.

**Qod. 22**
**Qaabka warbixinta, dhibaasheegta iyo ashkatooyinka**

1. Warbixinta, dhibaansheegta, ashkatada iyo codsiga waa in la soo gudbiyaa iyagoo qoraal ama tiraab ah:
   a. Haddii ay qaab qoraal tahay, waxa saxeexaya qofka ay khusayso.
   b. Haddii ay tiraab ama hadal tahay maaamulka ay gaadhay waa in uu:
      i. diiwaangeliyaa
      ii. u akhriyi qofka ay khusayso
      iii. ka saxeexaa qofkaasi.

2. Tilmaamaha farqada hore waxa ilaalinayaa hadba siday ugu dabaqmi karaan ka noqoshada ashkatada ama diidmada ashkato ka noqoshada.

**Qaybta 2aad**
Baaritaannada booliska

**Qod. 23**
**Qeexitaanno**

1. Ujeeddada Xeerkan, haddii aan si kale loogu sheegan mawduuca, ereyga "Boolis" waxa ku jira:
   a. Askarta Booliska
   b. Cashuur ilaaliyayaasha
   c. Milateri kasta oo kale ama kaaliye shaqo milateri qof kale oo kasta oo rayid ah, kana mid ah waaxaha qaranka, kaas oo sharcigu siiyay in soo ururiyo ama baadho noocyo denbiyo ah iyo in uu keeno caddaymaha lama huraanka u ah dabaqaada xeerka ciqaabta.

2. Ujeeddada xeerkan, haddii aan macnahan guud si kale u tilmaamin:
   a. Weedha "saldhig Boolis" waxa ku jira deegaanka ama cutub gaar ah oo ka mid ah xooggaga ama shaqaalaha ku xusan farqada 1aad ee Qodobkan;
   b. Weedha "Sarkaal Boolis" waxa loola jeedaa ciidamada iyo shaqaalaha ku xusan farqada 1aad ee Qodobkan.

**Qod. 24**
**Baaritaannada**

1. Sarkaal Boolis ah ee ka taliya Saldhig Boolis oo ay soo gaadhaan xaaladaha ku xusan waaxdii hore ama hab kasta oo kaleba, war la xidhiidha dhicitaan, isla markiiba wuxuu:
   a. Ogaysiinayaa Xafiiska Xeerilaaliyaha Guud iyo Maxkamadda awoodda u leh;
   b. Wuxuu isku dubarridayaa oo habaynayaa, shaqsi ahaan ama isagoo kaashanaya hawl-wadeennadiisa, baadhitaanka la galay, isagoo u tixgalinaya siday lagama maarmaan u arko.

2. Sarkaalka Booliska ah ee fulinaya baadhitaanka waxa uu;
   a. Waraysanayaa qof kasta oo uu rumaysan yahay inuu ka warhayo duruufo kasta oo dacwadu leedahay iyo,
   b. Diiwaan gelinayaa, si waafaqsan qaybaha xarafka b) ee Qod. 22 warbixin kasta oo uu yidhi qof kasta oo uu baadhay.

3. Hadal cad oo la diiwaan geliyay markii uu socday baadhitaanku looma adeegsan doono caddayn ku lid ah eedaysanaha garqaadista dhexdeeda, haddii aanay waafaqsanayn macnaha qiraal ee xeerkan ku xusan.

4. Marka lagu jiro wakhtiga baadhitaanka ee loo arko inay lagama maarmaan tahay amar xidhitaan ama mid fatashaadeed ama mid xayiraadeed, sarkaalka booliiska ee fulinaya baadhitaankaasi waxa uu ka codsanayaa Maxkamadda awoodda u leh amarka noocaas ah, waxaanu isla markaasi ogaysiinayaa Xeerilaaliyaha Guud.

5. Xaaladda degdegga markay lama huraan tahay, Sarkaalka Booliska ah ee fulinaya baadhitaanku, waxa uu isagoon wadan amar Maxkamadeed:
   a. Xidhi karaa qofka uu uga shakiyo inuu dembi galayo, si waafaqsan Qod. 38;
   b. Fulin karaa fatashaad ama xayiraad si waafaqsan Qod. 58.

**Qod. 25**
**Xusuusqorka baaritaannada**

1. Sarkaalka Booliska ah ee fulinaya baadhitaan waxa uu maalin kasta ku diiwaan galinayaa faahfaahinta baadhitaanka, xusuus qor ku haboon isagoo gaar ahaana ku xusaya:
   a. Taariikhda uu baadhitaanku bilaabmay iyo ta uu dhamaaday;
   b. Tallaabooyinka la qaaday xilligii baadhitaanka;
   c. Duruufaha ka soo baxay baadhitaanka;
   d. Cadaymaha la helay.

2. Waaran iyo amaro walba oo uu ka helay mas'uul sare, Maxkamad ama Xeerilaaliyaha Guud, waa in uu sidoo kale u diiwaangeliyaa.

**Qod. 26**
**Gebagebaynta baaritaannada**

1. Baadhitaanka Boolisku sameeyaa waxa lugu dhamaystirayaa dib u dhac la'aan aan sababtiisu cadayn.

2. Sarkaalka Booliska ah ee ka taliya Saldhig Boolis marka ugu horaysa ee baadhitaanka la soo gebogebeeyo, waxa uu diyaarinayaa warbixin dhamaystiran oo xaqiiq ah kana kooban:
   a. Xaqiiqooyinkii dacwada, iyo duruufihii ku xeeran ee saamaynta ku yeelan karaya garnaqa dacwada ciqaabeed la qaadayo;
   b. Cadaymaha la helay faahfaahimahooda;
   c. Faahfaahinta astaamaha guud ama war kasta oo kale oo lagu aqoonsanayo:
      i. Eedaysanaha;
      ii. Dhinaca dhibbanaha;
      iii. Ruux kasta oo haya war la xidhiidha aqoonsiga.

3. Warbixinta lagu xusay farqada hore waxa loo diri doonaa Xafiiska Xeerilaaliyaha, iyadoo ay la socoto:
   a. Xusuus qorka baadhitaanka;
   b. Diiwaannada la xidhiidha baadhitaanka;
   c. Qalabkii ama marag-muujintii la qabtay wakhtigii baadhista.

**Qaybta 3aad**
Caawimaadda xagga daboolidda dembiyada

**Qod. 27**
**Kaalmaysiga dadweynaha**

Qof kasta, marka si sharci ah oo sababaysan looga codsado, xaalad baahi degdeg ah jirto, wuxuu caawimo siinayaa Garsooraha, Xafiiska Xeerilaaliyaha Guud, Sarkaalka Booliska ah, si:
   a. Loogu geeyo xabsiga ama looga hortago fakasho qof kasta oo maamulka aynu soo sheegnay amray xidhitaankiisa;
   b. Looga hortago daboolida ama baabi'in.

**CINWAANKA 2AAD**
Hababka loo xaqiijiyo in eedsanuhu maxakamada hor yimaado

**Cutubka 1aad**
Xarigga

**Qaybta 1aad**
Guud ahaan xarigga

**Qod. 28**
**Xarig**

Xidhitaanku, Amar Maxkamadeed haddii uu leeyahay iyo haddii kaleba, waxa kaliya oo lagu samayn karaa xaaladaha iyo qaabka uu u jideeyo sharcigu.

**Qod. 29**
**Fulinta Xarigga**

1. Qofka ay tahay in la xidho waa in loo sheegaa in la xidhayo, iyo sababta loo xidhayaba.

2. Haddii qofka la xidhayaa:
   a. Xoog kala hor yimaado xidhistiisa;
   b. Isku dayo in uu baxsado (fakado),

qofka fulinaya xidhitaanku wuxuu isticmaali karaa dhamaan qaababka sharciga ah ee lagama maarmaanka u ah si uu u meel mariyo xidhitaanka.

3. Qofka la xidhay lama saari karo cadaadis badan oo aan ahayn tii lagama maarmaanka u ahayd si looga hortago in uu baxsasho (fakado).

4. Haddii si dhamaystiran loo hubo in xadhigaasi ahaa mid gaf loo sameeyay, qofka la xidhay si degdeg ah ayaa loo sii daynayaa.

**Qod. 30**
**Galitaanka gudaha guryaha gaarka ah ujeeddo xiritaan awgeed**

1. Midkasta oo xeerka u oggolaanayo in uu xidho qof isagoo ku helay sababo ah:
   a. Iyadoo qofkaas loo xidhayo fal uu faraha kula jira, ama
   b. Qoraal Maxkamadi ku amartay xadhig;

   isagoo aan wadan amar Maxkamadeed waxa uu gali karaa goob kasta oo ay ku jiraan guryaha la deggan yahay, iyo halkii uu qofka la xidhayaa iska qarin karo marka ay:
   i. Jirto baahi degdeg ah in sidaasi la falo, iyo
   ii. Marka ay jiraan fikrado aasaasi ah oo sheegaya in haddii la raadsado amar Maxkamadeed aan la heli karayn iyadoo laga gaashaamanayo fursad uu qofka

la xidhayaa ku baxsan karo iyo fursad uu ku burburin karo ama ku faragalin karo walxaha cadaymaha ah.

2. Haddii qofka mas'uulka ka ah goobtu uu diido oggolaanshaha galitaanka noocan ah, xoog ayaa lagu isticmaali karaa si loo suurtogaliyo galitaanka.

3. Marka goobta la doonayo in lagu galo, sida uu dhigayo Qodobkani, ay joogto haweenay oo dhaqankeedu aanu oggolayn in ay dibadda u soo baxdo, ruuxa xadhiga fulinayaa wuxuu iyada u soo jeedinaya, inta aanu goobta galin, in uu u oggol yahay fursad kasta oo macquul ah oo ay ku gasho meesha munaasibka u ah ama goob ku filan oo ay isku asturto.

**Qod. 31**
**Baadhitaanka qofka xiran**

1. Qofka wax xidhayaa isaga oo aan u haysan amar Maxkamadeed wuxuu baadhitaan ku samayn karaa:
   a. Qof la xidhay;
   b. Goobta lagu xidhay;
   c. Goob kasta oo uu qofka la xidhay galay markii uu isku dayay in uu ka baxsado xadhigga.

2. Qofka samaynaya baadhitaanku wuxuu qabanayaa qalab kasta oo uu ka helo qofka la xidhayo, amase goobta la baadhayo, kaasoo loogu isticmaali karo cadayn ahaan dacwadda.

**Qod. 32**
**Kuxadgudubka habraaca xeerka xidhitaanka qofka**

1. Garsooraha la horgaynayo qofka xidhan, si waafaqsan Qodobada 39 iyo 45, waxa uu ogaan doonaa in:
   a. Qaybaha Qaybaha 2aad iyo 3aad ee Cutubkan si adag loo raacay markii la samaynayay xidhitaanka, iyo
   b. In markii qofka xidhan la horkeenayay (Garsooraha) uu jiray wax dib u dhicitaan (habsan) ah oo aan caqli gal ahayn.

2. Haddii Garsooruhu helo wax xadgudub ah oo lagu sameeyay qaybahaasi aynu soo sheeganay ama qofka xidhan oo habsan aan sabab lahayni ku yimi xilligii Maxkamadda la horgayn kenayay, waxa uu:
   a. Amrayaa in lagu oogo dacwad ciqaab ah qofka ka masuulka ah, haddii xadgudubyadan ama habsankan uu ka dhashay.
   b. Amrayaa in ay qaaddo tallaabo anshax marin ah Maxkamadda awooda u lihi oo lid ku ah ruuxii ka masuulka ahaa, haddii xadgudubku ama habsanku aanu samaynaynin.

**Qod. 33**
**Wargelinta xiritaanka**

Sarkaal kasta oo maamula Saldhig Boolis waa in uu markiiba ku wargeliyo Xafiiska Xeerilaaliyaha Guud ama Maxkamadda awood u leh.

a. Xadhigga qof kasta, iyo
b. Sii deynta qof kasta oo xidhnaa,

taasi oo ka dhacda gudaha xuduudaha deegaanka ikhtisaaskooda, isagoo cadaynaya sababaha.

**Qaybta 2aad**
Xidhitaanka aan loo haysan awood maxkamadeed

**Qod. 34**
**Qofka lagu xiri karo amar maxkamadeed la'aantii**

1. Garsooraha, Xeerilaaliyaha Guud iyo ku/xigeennadiisa iyo Sarkaal Boolis ahi waxa ay samayn karaan xidhitaan amar garsoore la'aantiis si waafaqsan tilmaamaha qodobbada Qaybtan.

2. Qof rayidka ahi wuxuu wax xidhi karaa amar garsoore la'aantiis xaaladaha ku cad Qod. 35. Qofka rayidka ah ee xadhigan sameeyaa waa in uu isla markiiba qofka u gudbiyaa sarkaal Boolis ah.

**Qod. 35**
**Xarigga waajibka ah ee dadka lagu qabto iyaga oo faraha kula jira**

Qofka waxa lagu xidhi karaa iyada oo aan loo wadan amar Maxkamadeed haddii lagu qabto isagoo faraha kula jira denbi:

a. Kasta, ama isku day denbi kasta oo lid ku ah shaqsiyada qaanuuneed ee Qaranka, kaas oo ciqaabtiisu tahay xadhig ama ciqaab oo culus;
b. Kasta geliddiisa ama isku daygiisa oo ah:
   i. ka fakasho xabsi sharci ah;
   ii. burburin iyo tuugo;
   iii. gumaad;
   iv. Kas u sababid baahinta cuduro khatar ah, sumayn biyaha iyo cuntada;
   v. Kufsi, salaaxid (hamad kacin), galmo aan dabiici ahayn oo xoog lagu galo. U Qabsasho ujeedo salaax.
   vi. Soo tuuris ilmaha uurka ku jira oggolaansho la'aan
   vii. Dil, dilid ilme (canug), oggolaansho ku dilid ay la socoto duruuf denbiga cuslaysa, haawac culus ama aad u culus, dil kas dhaafa, safayn wata duruufaha denbiga cusleeya
   viii. Ceebayn wadata duruufaha denbiga cusleeya markay tahay in dalabka xeerilaalinta lagu oogo.
   ix. Xoog ku adoonsi, suuq gaynta iyo ka ganacsiga adoonta, xoog ku haysashada adamiga;

x. Xayirasho qof;
xi. Tuugo ay tahay in xafiis ahaan loo oogo, budhcadnimo, baadis, dil ama dhaawac loo gaysto xayawaanka cid kale leedahay kaasi oo xafiis ahaan loo oogayo;

c. Iyo kasta oo kale, oo xeerku waajibinayo in ay waajib tahay qabashadoodu marka faraha lagula jiro.

**Qod. 36**
**Qabashada ikhtiyaariga ah ee dadka dembiga faraha kula jira**

1. Qof waxa la xidhi karaa amar Maxkamadeed la'aantii, marka lagu qabto isaga oo *faraha kula jira ay*:
   a. Ciqaabtiisa xadhig ee ugu wayni ay ka badan yahay hal sano amase ciqaabeed oo ka culus;
   b. Ciqaab uu xadhig ku jiro marka uu la xidhiidho:
      i. Sikhraamid;
      ii. Dab, rasaas, ama qarax;
      iii. Ciyaarta khamaarka;
      iv. Haysasho aan caqli gal ahayn oo waxyaabaha qiimaha leh, xoolaha, qalab wax lagu furo ama qufulada lagu saaro;
      v. Walxo khatar ah ama maanka dooriya;
   c. Ciqaab uu xadhig ku jiro marka qofka galay uu yahay:
      i. qof lagu sii daayey dammaanad;
      ii. caadaysi sida ku cad Qod. 61aad ee Xeerka Ciqaabta;

2. Xaaladaha lagu sheegay faqradaha hore, xidhida denbi faraha kula jirid waxaa la samayn karaa marka denbigu uu yahay mid lagu oogo dalabka dhibbnaha, marka uu dhibanuhu ku wargeliyay denbiga Garsooraha, xafiiska xeer-ilaalinta ama bilayska, isagoo qasdigiisu yahay in uu sameeyo ashkatadaas.

**Qod. 37**
**Qeexidda "Denbi faraha kula jirid"**

1. Ujeedada xeerkan ciqaabta, haddii aan mawduuca si ka duwan loogu sheegin, macnaha "qabasho denbi faraha kula jirid" waxa loola jeedaa in qofka:
   a. lagu qabto fal denbiyeed uu samayntiisa faraha ku hayo;
   b. isla markii uu dhacay dembiga raacdceeya:
      i. Sarkaal Boolis ahi, ama
      ii. dhinaca dhibtu soo gaadhay, ama
      iii. qof kasta oo kale;
   c. Lagu qabto, isla marka uu dhaco dembiga, qalabkii denbiga lagu galay, ama raad cad oo kale oo muujinaya gelitaanka denbiga.

2. Yaadan waxa loo qaadanayaa in loo galay, denbi faraha kula jirid:
   a. Gal kasta oo joogto ah ilaa iyo xilliga uu joogtanimadiisu ay dhamaanayso;
   b. Ka baxsasho xabsi sharci ah, ilamaa xilliga fakashadaasi laga soo xidhayo ama la qabanayo.

**Qod. 38**
**Xarigga dadka looga shakiyo in ay galeen denbi**

Sarkaalka Booliska ahi waxa uu xidhi karaa ruux amar Maxkamadeed la'aantii:

a. Haddii xaalad lagama maarmaan ah oo degdeg ahi jirto, marka ay jiraan caddaymo la rumaysan karo in:
   i. qofka la xidhayaa uu galay ciqaabtiisa ugu badani tahay xadhig ka badan 2 sano ama ciqaab ka culus;
   ii. xilligaasna aan la heli karin amar Maxkamadeed oo xidhitaan ah;
   iii. sidoo kale marka ruuxa ay tahay in la xidho aan la heli doonin haddii aan si degdeg ah loo xidhin;
b. Xaaladaha hoos yimaada tilmaamaha faqrada 2aad ee Qod. 50.

**Qod. 39**
**Qofka la xidhay amar maxkamad la'aantii waa in la horgeeyaa garsoore**

1. Qofka la xidhay amar Maxkamadeed la'aantii waa in isla markaaba, waqti aan ka badnayn 48 saacadood, marka laga soo bilaabo wakhtigii xidhitaankiisa, la horgeeyaa Maxkamad awood u leh, amase Maxkamadda ugu dhow goobta lagu xidhay; iyadoo waqtigaa la sheegay ee 48 saacadood ah aanu ku jirayn waqtiga loo kala socanayo goobta xadhigu ka dhacay iyo goobta Maxkamaddu ku taal.

2. Sarkaalka Booliska ah ee qofka xidhan horgeeyey Garsooraha, isla markaana waa in uu, u habeeyaa una gudbiyaa Garsooraha war kooban oo iftiiminaya:
   a. Xaqiiqada dhacdada iyo sababaha xadhiga;
   b. Caddaymaha la helay oo faahfaahsan;
   c. Marka ay suurtogal tahay faahfaahin astaamaha guud ee:
      i) Qofka la xidhay;
      ii) Dhinaca dhibbanaha;
      iii) Ruux kasta oo haya war la xidhiidha dembiga.

3. Marka uu ka bogto warkaasi kooban Garsooruhu:
   a. Haddii dacwadu waafaqsan tahay tilmaamaha farqada 2 ee Qod. 70, waxa uu amrayaa in aan lagu oogi karin dacwad qofka xidhan, si waafaqsan Qod. 77, wuxuuna amrayaa in isla markaaba la siidaayo.
   b. Haddii:
      i) dembiga la galay uu yahay mid amar xidhitaan Maxkamadeed aan loo helaynin si waafaqsan sida ay dhigayaan qaybaha Qodobbada 42 iyo 43; ama
      ii) aan lagu fulinin xidhitaanka si waafaqsan tilmaamaha Qodobbada 35, 36, 38 iyo 50;

      Garsooruhu wuxuu amrayaa in isla markaaba la sii daayo qofka xidhan.
   c. Xaaladah kale wuxuu ansixinayaa xadhigga qofka xidhana wuxuu u dirayaa xabsi ku hayn ku meel gaadh ah, si waafaqsan tilmaamaha Qod. 46, marka aanu dammiin ku siidayn qofka xidhan si waafaqsan Qod. 59 & 60.

4. Haddii garsooruhu xadhigga aanu ku ansixin 8 maalmood gudahood, laga bilaabo maalintii uu dhacday, waxaa xadhiga loo aqoonsanayaa mid laga noqday, qofka la xirayna waa in la sii daayaa.

5. Xaaladaha lagu tilmaamay xubinta (c) ee faqrada 3 aad ee qodobkan, Garsooruhu waa in uu:
   a. u sharxaa qofka xidhan nuxurka eedda loo haysto.
   b. ku wargeliyaa qofka xidhan in marxaladan dacwaddu marayso aan looga baahnayn in uu bixiyo wax war ah, balse war kasta oo uu bixiyo loo adeegsan doono cadaymo isaga lid ku ah.
   c. qoraa war kasta oo qofka xidhani bixiyay.

6. Garsoore wax ma waydiin karo qofka xidhan haddii:
   a. aanu qofka xidhani doonin in uu war bixiyo; iyo
   b. in su'aalahaa garsooraha aan looga dan lahayn in lagu bayaamiyo warka uu sidaa ku bixiyay qofka xidhani.

7. Tallaabo kasta oo uu qaado garsooruhu si waafaqsan tilmaamaha qodobkan, waa in isla markiiba sarkaalkii qofka xidhan garsooraha hor-keenay uu ogaysiiyaa:
   a. Xafiiska Xeerilaaliyaha Guud iyo
   b. Maxkamadda ikhtisaaska u leh, haddii qofka xidhan aan la hor-gayn garsoore ka tirsan Maxkamadda ikhtisaaska u leh.

**Qaybta 3aad**

Xiritaanka amar maxkamadeed ah

**Qod. 40**

**Shuruudaha amarka qabasho iyo cidda awoodda u leh soo saaridda amarkan**

1. Amarka qabasho waxa la soo saari karaa marka ay jiraan sababo la rumaysan karo oo ah:
   a. In denbi dhacay
   b. In eedaysanuhu yahay kan dembiga galay.

2. Waxa keliya oo amar qabasho soo saari kara:
   a. Garsoore awood u leh laga billaabo xiliga dacwaddu ka bilaabanto Maxkamad derejada koowaad;
   b. Gudoomiyaha Maxkamadda awoodda u leh marxalad kasta oo dhegaysiga dacwaddu marayso.

**Qod. 41**

**Qaabka amar qabasho**

1. Qoraal kasta oo ah amar qabasho, waa in la soo saaraa isagoo laba nuqul ah oo ku xusan:
   a. Magaca Maxkamadda soo saartay amarka;
   b. Taariikhda amarka qabashada la soo saaray;

c. Astaamaha eedaysanaha oo faahfaahsan ama haddii aan la garanaynin, tilmaamo si caqli-gal ah u cayimaya;
d. Tiirarka lagama maarmaanka ah ee uu ku dhisan yahay dambigu, amarka qabashada loo amrayo;
e. Saxeexa Garsooraha iyo shaabadda Maxkamadda soo saartay amarka qabashada.

2. Qofna laguma siidayn karo amarka qabashada lagu xidhay oo qaab ahaan ceeb leh oo keliya.

**Qod. 42**
**Xaaladaha uu amarka xariggu yahay khasab**

1. Amarka qabasho (xadhiga) waxa la soo saarayaa marka uu lid ku yahay qof lagu eedeeyey:
   a. Mid ka mid ah bambiyada ku xusan Qod. 35;
   b. dembiga ciqaabtiisa ugu weyni tahay xadhig aan ka yarayn 10 sano ama ciqaab ka culus;
   c. dembi kasta oo kale oo soo saarista amarka qabasho sharcigu qasab ka dhigay.

2. Amarka qabashada waxa kale oo la soo saarayaa xaaladaha:
   a. Waafaqsan timaamaha farqadda 4 ee Qod. 47;
   b. Waafaqsan timaamaha farqada 1 ee Qod. 63.

**Qod. 43**
**Xaaladdaha soo saarista amar qabasho ikhtiyariga tahay**

1. Amarka qabashadu wuxuu imaan karaa markii eedeysanuhu:
   a. Ku eedeysan yahay dembiga ciqaabtiisa ugu yari tahay xadhig aan ka yarayn 6 bilood;
   b. Ama dembi kasta oo kale oo soo saarista amarka xadhigiisa uu oggolaaday sharcigu;
   c. qofka helay amarka in uu Maxkamadda horyimaado (yeedhmo):
      i) haddii ay jiraan arrimo la rumaysan karo in qofkaasi ka tegayo, ama laga yaabo in uu ka tago dhulka ama uu isku dayayo in aanu Maxkamadda hor-tegin, ama
      ii) haddii qofkaasi cudurdaar la'aan uu ku hortagi waayay Maxkamadda xiligii iyo goortii amarka yeedhmada ku cadayd iyo amar kasta oo kale oo la xidhiidhay.

**Qod. 44**
**Fulinta amarka qabashada**

1. Sarkaal kasta oo Boolis waa in uu u fuliyaa amarka qabashada sida ugu dhakhsaha badan.

2. Haddii eedaysanuhu yahay:
   a. haweenay uur leh ama haweenay xannaanaysa ilmo;

b. ruux ku sugan xaalad aad iyo aad khatar u ah oo caafimaad daro;

Maxkamadda soo saartay amarka xadhigu, waxa ay amri kartaa in la joojiyo fulinta amarka qabashada ilaa iyo inta ay meesha ka baxayso duruufta loo hakiyey fulinta amarka qabashadu.

3. Haddii aanay jirin baahi degdeg ah, amarka xidhitaanka laguma fulin doono guryaha degaanka ah, saacadaha u dhexeeya 6 da fiidnimo ilaa 7da subaxnimo.

4. Sarkaalka Booliska ah ee fulinaya amarka qabashada waxa uu:
    a. ku wargeliyaa qofka la xidhayo nuxurka amarka qabashada
    b. in uu u xidho ama u qabto qofka la qabanayo sida ugu dhakhsaha badan.

**Qod. 45**
**Horgaynta Garsoore ee qofka lagu soo qabtay amar qabasho**

1. Haddii aan lagu sii dayn dammaanad waafaqsan farqada 2 ee Qodobka 62, qofka lagu qabto amar qabasho, waa in, dib u dhac aan loo baahnayn la’aantii, lagu horgeeyaa:
    a. Garsoore awood u leh;
    b. Garsooraha Maxkamadda ugu dhow goobta lagu xidhay, haddii Garsooraha awoodda u lihi uu joogo meel u jirta 50km goobtaas.

2. Ilaa inta la dabiqi karo tilmaamaha xarafka (c)ee faqrada 3aad iyo farqadaha 5, 6 iyo 7 ee Qodobka 39aad, ayaa la dabaqayaa, iyadoo la siiyay, haddii dammaanadda ay bixisay Maxkamad aan ahayn Maxkamaddii awoodda u lahayd, go’aankaasi waxa cusboonaysiin kara ama tirtiri kara Maxkamadda awoodda u leh.

**Qaybta 4aad**
Xabsi ku haynta ku meelgaadhka ah

**Qod. 46**
**Xabsiga Ku haynta ku meel-gaadhka ah**

Amarka qofka lagu amrayo in xabsiga lagu sii hayo ee ay soo saarayo Garsooraha ikhtisaaska u leh ama Maxkamadda ikhtisaaska u leh, eedaysanaha:
a. Waxaa lagu xidhayaa xabsiga ama meel kale
b. Waxaa la horkeenayaa Maxkamadda, si waafaqsan shuruudaha amarka.

**Qod. 47**
**Muddada xabsi ku haynta dhegaysiga dacwada horteed**

1. Haddii aanay Maxkamaddu amrin dhegaysiga dacwada si waafaqsan Qodobka 75 faqrada b) xubintiisa (i), eedaysanaha waa la sii daynayaa marka wakhtiga xidhigiisa ay kor u dhaafto:
    a. 90 maalmood, haddii gu noqdo ikhtisaaska garsoor ee qaybta Tashiga ee Maxkamadda Gobolka, kaasoo ciqaabta sharcigu u dhigayaa tahay dil ama xabsi daa’in;

b. 60 maalmood, yada kale ee hoos yimaada ikhtisaaska qaybta Tashiga ee Maxkamadda Gobolka;
c. 45 maalmood, ga hoos yimaada ikhtisaaska garsoor ee qaybta Caadiga ah ee Maxkamadda Gobolka;
d. 15 maalmood, marka gu hoos yimaado ikhtisaaska garsoor ee qaybta Ciqaabta ee Maxkamadda Degmada;

Maxkamadda Rafcaanku ka dib marka uu codsi uga yimaado Xeer Ilaaliyaha Guud ama mid ka mid ah Ku-xigeenadiisa, waxay ogolaan kartaa muddada garsuganimada in la kordhiyo wakhti aan ka badnaan karin mudada ugu badan ee xabsi ku haynta ku cad nooc kasta oo yada kor ku xusan ka mid ah.

2. Muddada xabsigu ujeedo kasta oo ay leedahay waxa ay noqon doontaa mid ka bilaabanta maalinta qofka eedaysanaha ah la soo xidhay.

3. Ilamaa taariikhda la muddeeyey dhegaysiga, eedaysanaha xabsiga ku xidhan waxa la horgayn doonaa Garsooraha todobadii maalmood ee walba hal mar, si kastaba ha u dhacdee marka lagu xadgudbo qaybtan Garsooruhu waxa uu si waafaqsan Qodobka 32 talaabo ku lid ah ka qaadayaa qofka ka masuulka ah.

4. Marka la sii daayo qofka eedaysanaha ah si waafaqsan farqada 1 ee Qodobkan Garsooruhu waxa uu eedaysanaha ku waajibinayaa qaab walba oo uu u arko in ay ku haboon tahay si uu ku hubiyo in eedaysanuhu hor yimaado Maxkamadda awood u leh.
   Haddii:
   a. eedaysanuhu jabiyo shuruudaha lagu waajibiyay, ama
   b. haddii ay jiraan sababo la rumaysan karo oo sheegaya in uu ka tagay ama se laga yaabo in uu ka tago dhulka dalka,

Amarka qabashadiisa ayaa la soo saarayaa, ka dibna wakhtiga loo xadiday garsuganimadiisa ayaa dib ka bilaabanaysa.

## Cutubka 2aad
Yeedhitaanka hor imaanshaha maxkamadda

### Qod. 48
### Shuruudaha lagu soo saarayo yeedhmooyinka iyo hay'adaha awoodda u leh soo saariddooda

1. Yeedhmo lagu hortagayo Maxkamad waxa la soo saarayaa marka ay jiraan sababo cadcad oo lagu rumaysto:
   a. in la galay fal dembiyeed;
   b. in eedaysanuhu yahay kan galay.

2. Yeedhitanadda lagu hor tagayo Maxkamadda waxa kaliya u soo saari kara Garsoore awood u leh, si waafaqsan Qodobka 75 farqadiisa 2 xarafka b), Yeedhitaanada sidan oo kale ah waxay ka koobnaanayaan codsi toos loogu farayo eedaysane aan ku jirin

xabsi, in uu u hor tago Maxkamadda awoodda u leh, wakhtiga iyo goobta ku cad, si uu uga jawaabo eed gaar ah.

**Qod. 49**
**Qaabka Yeedhitaanka**

Yeedhitaan kasta oo lagu hortegayo Maxkamad waxa uu ka koobnaanayaa laba nuqul oo qoraal ahaan isku mid ah, qoraalkaas oo ka kooban:

a. magaca iyo xilka cidda soo saartay;
b. taariikhda yeedhitaanka la soo saaray;
c. astaamaha guud ee eedaysanaha, ama tilmaamo kale oo lagu aqoonsan karo oo si macquul ah loo hubo;
d. dhacdooyinka aasaasiga ah ee ku dhisan yahay denbiga yeedhmada loo soo saaray;
e. magaca Maxkamadda la rabo in eedaysanuhu hortago oo ay weheliso goorta iyo goobta hortegitaanku dhacayo;
f. saxeexa mas'uulka soo saaray yeedhmada iyo shaanbada Maxkamadda

**Qod. 50**
**Waajibaadka bixinta macluumaadka shakhsi**

1. Qofka loo diray Yeedhmada Maxkamadda waa in uu u sheegaa marka uu u baahdo Sarkaalka Booliska ah ee u sida yeedhitaanku aqoonsigiisa shakhsi oo uu ku jiro ciwaankiisu.

2. Sarkaalka Booliska ahi wuxuu fulin karaa isgoo aan wadan amar xidhitaan qof kasta oo si sharci ah looga codsaday in uu sheego macluumaadkiisa shakhsi oo faahfaahsan sida ku cad farqada hore, kaasoo:
   a. diida in uu sheego faahfaahinta dhamaystiran oo macluumaadkiisa shakhsi ah oo uu ku jiro cinwaankiisu (506 x.c.);
   b. sheega macluumaad Sarkaalka Booliska ah ee ka codsaday si la rumaysan karo ugu arko in ay been yihiin.

3. Qofka loo xidhay si waafaqsan farqada hore ee qodobkan waxa ka sii dayn doona xabsiga, qofkii soo xidhay isaga ama ci d kale oo awood u leh, marka ugu horaysa ee la suggo macluumaadkiisa shakhsi iyo cinwaankiisa oo sax ah. Haddii sabab kasta oo kale qofkaa la siidayn waayo, waxaa lagu horgaynayaa Garsooraha si waafqsan tilmaamaha Qodobka 39.

**Qod. 51**
**Hawlaha dalabka yeedhitaanka maxkamadeed**

1. Yeedhitaan Maxkamadeed waxa qaadi kara:
   a. Sarkaal Boolis ah;
   b. Sarkaal Maxkamadeed;
   c. qof kasta oo kale oo ay Maxkamaddu u dirto.

2. Yeedhmada Maxkamadeed waxa loo fulinayaa in nuqulka yeedhmada gacanta looga dhiibo eedaysanaha, kaasoo haddii sidaa laga dalbado ka saxeexaya dhabarka nuqulka kale, in uu helay. Haddii eedaysanuhu diido in uu aqbalo Yeedhitaanada ama in uu saxeexo in ay soo gaadheen yeedhitaanadu, Sarkaalka siday yeedhmadu waxa uu ku qorayaa siday wax u dhaceen oo run ah yeedhmooyinka dushooda, taasaana loo tixgalinayaa in hawshaasi la dhamaystiray.

3. Haddii, xataa hawlo ay sabab u tahay feejigo daro, eedaysanaha lagu soo heli waayo, yeedhitaanka waxa labadiisa nuqul midkood loo dhiibayaa si ay ugu gudbiyaan eedaysanaha:
   a. qof xubin ka ah qoyska eedaysanaha;
   b. shaqaale ku nool guriga eedaysanaha;
   c. shaqaale u shaqeeya eedaysana.

Qofkasta oo ka qabta yeedhmada Maxkamadda, Sarkaalka sida, waxa uu magaciisa ku saxeexyaa nuqulka kale dhabarkiisa. Duruufo kasta oo jira sinnaba looguma dhiibi karo yeedhitaan qofka:

i) ay da’diisu ka yar tahay 14 sanadood;
ii) ay cadahay in maskaxdiisu aanay dhamayn;
iii) ay cadahay in uu sakhraansan yahay;
iv) ah dhinaca dhibanaha dacwadda.

4. Haddii, xataa iyadoo la adeegsanayo feejigadaas, ay suuragal noqon waydo in yeedhmada loo gudbiyo si waafaqsan farqadaha 2 iyo 3 ee Qodobkan, yeedhmada waxaa lagu dhejinayaa meelaha muuqda ee guriga ama goobta eedaysanahu caadi ahaan u dagan yahay.

5. Haddii eedaysanuhu yahay xubin firfircoon oo ka mida dawladda ama hay’adaha kale ee bulshada, yeedhitaanka waxa loo dirayaa madaxa Xafiiska uu eedaysanuhu ka shaqeeyo, madaxa xafiisku waxa uu yeedhmada u fulinayaa si waafaqsan farqadaha 2 ee Qodobkan, isagoo nuqulka kale ee yeedhmada u celinaya maamulkii soo saaray.

6. Marka eedaysanuhu aanu ku sugnayan gudaha xuduudaha awooda garsoor ee Maxkamadda awoodda u leh, yeedhitaanada waxa loo diryaa Maxkamadda ku taal goobta eedaysanuhu joogo, si ay ugu fuliso gaadhsiinta yeedhmada si waafaqsan tilmaamaha Qodobkan.

**Cutubka 3aad**
Habab gurracan

**Qaybta 1aad**
Fatashaad iyo xayiraad

**Qod. 52**
**Baadhid iyo Xayiraad**

Fatashaad iyo xayiraad, amar Maxkamadeed ama amar Maxkamadeed la'aantiis, waxaa la fulinayaa xaalaha iyo hababka xeerka waafaqsan.

**Qod. 53**
**Soo saarida amaradda fatashaada iyo xayiraadda**

Amar fatashaad ama xayiraad ah waxa kali ah oo soo saari kara:
a. Garsoore awood u leh ilaa iyo xiliga dhegaysiga dacwadu bilaabmayso Maxkamadda derejada koowad;
b. Gudoomiyaha Maxkamadda awoodda u leh marxalad kasta oo kale oo dacwadu marayso.

**Qod. 54**
**Qaabka amarka fatashaada ama xayiraadda**

Markasta wuxuu amarka fatashaada ama xayiraadu ku soo bixi karaa laba nuqul oo ka koobma:
a. Magaca maamulka soo saaray;
b. Taariikhda uu soo baxay amarku;
c. Sababta loo soo saaray amarka;
d. Faahfaahinta astaamaha gaarka ah ee qofka la baadhayo ama ka la xayirayo, haddii aan la garanyn naanays kasta ama tilimaamo lagu garan karo.
e. Nooca shayga la xayirayo iyo meesha uu ku suggan yahay shaygaasi;
f. Faahfaahinta shayga la xayirayo iyo qofka gacanta ku haya ama maamula sheygaas;
g. Sexeexa mas'uulka soo saaray iyo shaambada Maxkamadda.

**Qod. 55**
**Xaaladaha la soo saari karo amarrada fatashaadda ama xayiraadda**

1. Amar baadhitan ama xayiraada waxa lagu soo saari karaa:
   a. Marka ay jiraan sababo lagu ramaysan karo in:
      i) Shayga ku lug leeyahay oo ay suurtagasho in laga helo ruux cayiman ama meelo ama shay cayiman;
      ii) Baadhitaanka meel cayiman, laga yaabo in gudaheeda laga soo helo ruuxa la xidhayo;
      iii) Baadhista meel cayiman, in gudaheeda laga helo qof si sharci darada lagu soo xidhay.

b. Marka ay lama-huraan tahay baadhida qof cayiman, goob ama shay, looga jeedo helitaanka qalab cadaymeed oo muujin kara denbiga.

2. Amarka xayiraada Maxkamadda waxa la soo saari karaa marka ay jiraan sababo aasaasi ah oo la rumaysan karo in shay denbiga lagu galay la heli karo lana soo qaban karo.

3. Shay kasta oo denbiga dhicitaankiisa qayb ka ah oo la helo xiliga baadhitaanka, waxa toos loogu qabanayaa amarka baadhitanka. Marka qofka gacanta ku haya ama maamulaa shay la qabanayo uu diido in uu bixiyo. Amarka xayiraada waxa wehelinaya awood u lahaanshaha baadhista ilaa xadka ay tahay in la fuliyo amarka baadhista.

## Qod. 56
## Fulinta amarka baadhista iyo xayiraada

1. Amarka baadhitaanka iyo ka xayiraada laguma fulin karo guryaha gaarka loo degan yahay saacadaha u dhexeeya 6 p. m. ilaa 7 a. m. haddii aan:
   a. aanay jirin baahi lama huraan ah oo loo fuliyaa, ama;
   b. maamulka soo saaray aanu amrin in saacad kasta la fuliyo.

2. Labada nuqul ee amarka waxa mid la siinaa qofka la baadhayo ama qofka masuulka ka ah goobta ama shayga la baadhayo ama la xayirayo.

## Qod. 57
## Xeerar kale ee la dhawrayo Fatashaada iyo Xayiraada

1. Qofka fulinaya baadhitaanka ama xayiraad waxa uu:
   a. isticmaali karaa xoogga caqligalka ah si uu u fuliyo baadhitaanka ama xayiraada haddii caabbis ama diidmo lagala horyimaado fulinta baadhitaanka ama xayiraada;
   b. waxa la baadhayaa qof kasta oo xaadir ku ah meesha la baadhayo, haddii ay jiraan asbaabo lagu rumaysan karo in uu ruuxaasi qarinayo shaygii lagu galay ga.

2. Qofkasta oo la baadhayo ama qofkasta oo masuul ka ah goobta la baadhayo qalabka baadhitaanku ku socdo ama la xayirayo waa in uu bixiyo tas-hiilaadka maangalka ah ee fulinta baadhista iyo xayiraada.

3. Marka la baadhayo (fatashayo) qof:
   a. waa in anshax-dhaqmeedka si buuxda loo dhawraa;
   b. baadhitaanka ruux dumar ah, kaliya waxa samayn karta ruux dumar ah.

4. Haddii haweenay ay masuul ka tahay goobta ama shayga la baadhayo ama la xayirayo, oo haweenaydanina aanay, marka loo eego dhaqanka, u soo baxayn dibadda, haweenayda caynkaasi ah waxa la siin doonaa fursad kasta oo macquul ah oo ay isugu asturto goob ku haboon oo ay isku qarin karto.

5. Lama qaban karo wax qoraal ah ama dhukumanti ah oo yaala gudaha goobta Qareenka ama la taliyaha farsamo kuwaasi oo la xidhiidha gudashada mihnadooda, haddii aanay waraaqahaasi ama dhukumentigaasi aanay ahayn, qalabkii ama midhihii ga.

**Qod. 58**
**Baadhitaan iyo xayiraad amar maxkamadeed la'aantii – Ansixinta Garsooraha**

1. Sarkaalka Booliska ee ka masuulka ah baadhitaanka si waafaqsan Qodobka 24 waxa uu samayn karaa baadhitaan ama xayiraad, isaga oo aan wadanin amar Maxkamadeed, haddii ay jirto baahi degdeg ah, ama marka ay jiraan sababo la rumaysan karo in waqtiga lagu heli karo amarka Maxkadeed ee baadhitaanka ama xayiraadda:
    a) Qalabka marag muujinta ah ay suurtowdo in la baabi'iyo ama la tirtiro;
    b) qofka la baadi goobayaa uu ku fakanayo.

2. Sarkaal Booliska ee fulinaya baadhitaanka ama xayiraada ee aan wadanin amar Maxkamadeed waxa uu sida ugu dhaqsaha badan ugu wargalinayaa Garsooraha awooda u leh ama Garsooraha Maxkamadda ugu dhaw meesha uu baadhitaanku ama xayiraadu ka dhacayay, iyo sidoo kale Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud, isagoo u cadaynaya:

    a. Sababaha ay lagama maarmaanka u noqotay, iyo
    b. Natiiijada ka soo baxday baadhitaanka ama xayiraada caynkaasi ah.

3. Haddii baadhitaaanka ama xayiraada caynkaasi ahi ee aan wadanin amar Maxkamadeed aan lala socdsiinin Garsoore mudo 8 maalmood gudahood ah, baadhitaankaasi ama xayiraadaasi wax loo qaadanayaa mid lagu fuliyay sharci daro oo noqanaysa mid qiime sharci aan lahayn.

4. Ilaa iyo xadka lagu dhaqmi karo, qaybaha Qodobka 32 iyo farqada 7 ee Qodobka 39 ayaa la dhawrayaa, marka la samaynayo baadhitaan (fatashaad) ama xayiraad aan loo haysan amar Maxkamadeed.

**Qaybta 2aad**
Ku siidaynta damiinka

**Qod. 59**
**Damiin**

1. Ku siidaynta damiinku waa:
    a) Ka joojinta qofka xidhan ama eedaysanaha Amar Qabasho Maxkamadeed iyadoo loo tixraacay farqada 2 (a) ee Qodobka 60;
    b) Siidaynta qofka sifo sharci ah loo xidhay

2. Siidaynta damaanadeed waxa lagu waajibin karaa:
    a) Fulinta hanti dabar looga dhigay

i) ruuxa eedaysanaha ah, ama
ii) dad kale, ama
iii) labadaba, qofka eedaysanaha ah iyo dad ka kale wadajir ahaan, muhiimad gaar ah awgeed si loo hubiyo in eedaysanuhu hor imanayo Maxkamadda awooda u leh.

b) Shuruud kasta oo kale oo Maxkamad u aragto in ay ku filan tahay.

3. Kadib markii laga reebo qodobbada ka duwan kuwa ku xeeran Xeerkan, xorriyadda ku meelgaarka looma oggolaan karo haddii ay qasab tahay in amarka soo qabashada ama *kiisaaska ay Maxkamadda Badbaadada Qaranka (Lifaaq 6) hoos yimaada kadib markii laga reebo dambiyada yaryar, lana helo ogoolanshaha Xeer Ilaaliyaha Maxkamadda Badbaadada Qaranka iyo Garsoorka Maxkamaddas.*

## Qod. 60
## Hey'adaha oggolan kara xorriyadda kumeelgaar ah iyo muddada la oggolaado

1. Haddii aanu xeerkani si kale u jidayn, damiinka waxa bixin kara oo keli ah:
   a) Garsooraha la hor keenay ruuxa xidhan, ama Garsoore awood u leh xiliga dhegaysiga dacwadu ka bilaabanto, Maxkamadda derejada kowaad.
   b) Gudoomiyaha Maxkamadda awood u leh dhegaysiga dacwada marxalad kasta oo kale.
2. Xaaladaha damiinka la ogolaaday, damiinka waxa lagu dabri kara:
   a) Dhawrista amarka lagu ogolaanayo damiinka oo uu weheliyo amarka qabashadu, ama
   b) Marxalad kasta oo hadhay dhegaysiga dacwada si waafaqsan tilmaamaha farqada 2 ee Qodobka 59.

## Qod. 61
## Nooca iyo xaddiga damaanada

1. Damaanadu waxa ay ka koobnaanaysaa qadar lacageed oo damiintahu, si waafaqsan tilmaamaha/shuruudaha Maxkamaddu ku bixisay damiinka:
   a) Uu dhigayo Maxkamadda, ama
   b) Dammaanad qaadayo in uu bixiyo marka la jebiyo shuruud ka mid ah kuwa dammaanadda.

2. Waajibinta damiinka Maxkamaddu waxay tixgelinaysaa;
   a) tirada iyo awooda dhaqaale ee damiintayaasha;
   b) Qadarka damaanadda;
   c) Haddiiba qadarka dammaanadda:
      i) La dhigayo Maxkamadda, ama
      ii) La bixinayo marka la jebiyo shuruudaha dammaanadda.

Qadarka dabarka damaanada waxa lagu sargoynayaa duruufaha ku xeeran ee ku haboon xaaladda dhinacyada ay khusayso, mana noqon karto mid xad dhaaf ah.

**Qod. 62**
**Fulinta oggolaashaha xorriyadda kumeelgaarka ah**

1. Qofka waxa lagu sii dayn karaa oo kali ah damiin marka uu ka soo baxay shuruudaha la saaray ee la xidhiidha oofinta damaanadda
2. Marka uu amarka qabashadu xambaarsan yahay ogolaanshaha damiinka, qofka fulinaya amarka Maxkamadu wuxuu ka joogsanayaa xidhista eedaysanaha ama wuu sii daynayaa, isaga oo aan horgayn Maxkamadda si waafaqsan Qodobka 45, marka shuruudaha dabarka damaanada lagu oofiyo wakhtigii loo xadiday.
3. *Cid alle iyo ciddi lagu sii daayey xorriyadda ku meel gaarka ah waa in uu Hey'adda Garsoorka siiyaa tilmaamaha degaankiisa oo loogu soo diri wixii wargelin ah. Wax allaaliyo wixii macluumad iyo wargelin oo la geeyo deegaankaasi waxay u dhigantahay in uu eedeysanuhu si rasmi u helay.*

**Qod. 63**
**Ka Noqoshada Damiinka**

1. Maxkamadda awooda u leh bixinta damiinka, si waafqsan tilmaamaha faqrada 1 ee Qodobka 60, way ka noqon kartaa dammiinka, waxayna soo saari kartaa amarka qabashada eedaysanaha haddii:
   a) eedaysanuhu jebiyo mid ka mid ah shuruudihii la saaray;
   b) ay jiraan arrimo aasaasi ah oo la rumaysan karo inuu eedaysanuhu ka tagay ama uu ka tegi rabo gayiga Qaranka.
   c) qadarka dabarku (dammaanadu):
      i) aanu ku filayn sabab khiyaamo, khalad ama sabab la nooc ah
      ii) ka dib uu noqday mid aan ku filayn sabab kale awgeed
   d) Mid ka mid ah dammiintayaashu:
      i) sabab maangal ah darted dalbado in laga xoreeyo dammiinka
      ii) dhinto
      iii) uu dalka ka tegay, ama ay jirto sabab la rumaysan karo in uu dalka ka tegayo.

2. Haddii dammaanada laga noqdo sababo kasta oo ka mid ah kuwa ku cad xarfaha c) iyo d) ee farqada hore, damaanadda kale waa la siin karaa mar kale eedaysanaha.

3. Damiintaha codsaday in laga xoreeyo dammiinka, waxa kaliya oo uu xoroobi karaa kadib marka eedaysanaha la xidho si waafaqsan farqada 1 aad ee Qodobkan.

**Qod. 64**
**Bixinta Lacagta dammaanadda**

1. Haddii wax ka mid ah shuruudihii damaanadda la jebiyo, Maxkamadda dammaanadda bixisay si waafaqsan farqada 1 aad ee Qodobka 60, waxa ay amri kartaa in la bixiyo qadarka curaar ahaan loo dhigay Maxkamadda ama la balanqaaday dhammaanteed ama qayb ka mida.

2. Haddii damiintuhu ku guuldaraysto sabab la'aan bixinta, qadarka lacageed ee Maxkamaddu amartay waqtiga la siiyay gudahiisa si waafaqsan farqada 1 ee Qodobkan, waxaa lagu oogi karaa dammiintaha dacwad in uu lacagtaa magdhabo oo lagu dabaqayo hab-raaca fulunta xukumadda madaniga ah.

## Qaybta 3aad

Habka ilaalinta xoriyadda shaqsiga

### Qod. 65
### Baadhitaanka dadka sharci darro looga qaaday xoriyadooda shakhsiga ah

Garsooraha awoodda u lihi, marka uu hayo waxyaabo la rumaysan karo in qof xoriyadiisa shaqsiga ah laga qaaday, ka qaadistaa oo dhalinaysa denbi, wuxuu soo saarayaa amar baadhiseed si waafaqsan tilmaamaha farqada 1 ee Qodobka 55, si loo helo qofkaas. Haddii qofkaa la helo, masuulka fulinaya baadhitaanka wuxuu markiiba qofkaa horgaynayaa Garsooraha, kaasoo isaguna ka qaadan kara talaabooyinka lagagama maarmaanka ah, isagoo maanka ku haynaya duruufaha ku xeeran arrinka.

### Qod. 66
### Siidaynta qofka sharci darro ku xidhan

Maxkamadda Sare, ama Maxkamadda Rafcaanku inta ku eg ikhtisaaskeeda waxay qaraar ku soo saari karaan in qofkii lagu xidho go'aan xidhitaan oo aan sharci ahayn ama xaaladaha kale ee aan ahayn kuwa uu sheegay sharcigu in markiiba xoriyaddisii loo celiyo.

### Qod. 67
### Amarka soo xaadirinta qofka la xiray

Maxkamadda Gobolka ama, Maxkamadda Degmada ayaa amri karta, marka ay tixgeliso baahida jirta, in qof kasta oo lagu helo xuduudaha awoodooda garsoor la horkeeno Maxkamadda horteeda si loola macaamilo si hab qaanuunka waafaqsan.

## Qaybta 4aad

Habka qorista qiraallada

### Qod. 68
### Nidaamka uu ilaalinayo Garsooruhu marka uu dhegaysanayo Qiraal

1. Garsooruha wuu diiwaangelin kara qiraal laga hor samaynayo isaga xili kasta.

2. Garsooruhu ma dhegaysan karo qiraalo haddii aanu ku qancin, baadhitaan ka dib in qiraalka loo samaynayo si ikhtiyaari ah.

3. Qiraalku waa in:
   a) Garsooruhu si dhamaystiran oo qoraal ah ayuu u diiwaan geliyaa;

b) waa inuu Garsooruhu u akhriyaa qofka samaynaya qiraalka;
c) uu saxeexo:
    i) qofkii bixiyay qiraalka,
    ii) Garsooraha;
d) Garsooruhu, intaan saxeexin waa in uu suggo, in si dhamaystiran loo dhawray tilmaamaha qodobkan.

4. Qiraalka loo sameeyo si aan waafaqsanayn tilmaamaha qodobkan waa waxba kama jiraan (baaba'a), xataa Maxkamaddu ay iskeed ama dalabka dhinacyada ugu dhawaaqi karto marxalad kasta oo dacwadu marayso.

**CINWAANKA 3AAD**
Habraaca ka horeeya dhegaysiga

**Cutubka 1aad**
Mas'uuliyadda Xeer Ilaaliyaha Guud

**Qod. 69**
**Waajibaadka Xeer Ilaaliyaha Guud**

Haddii aanu sharcigu si kale u sheegin, Xeer Ilaaliyaha Guud wuxuu bilaabi karaa dacwad ciqaaba oo lid ku ah qof eedaysan.

**Qod. 70**
**Hawlaha Xeer Ilaaliyaha Guud ka hor bilowga dhegaysiga**

1. Markuu helo warbixinta baadhitaanada Booliska hab waafaqsan farqadiisa 3 ee Qodobka 26 Xeer Ilaaliyaha Guud:
    a) Haddii uu ku qanaco in cadaymaha *warka hore ee dacwadda* ay sheegayaan in la galay oo uu galay eedaysanahu, waxa uu markaasi:
        i) qaabaynayaa xaashida eeda si waafaqsan qaybaha Qodobka 71;
        ii) hor dhigayaa eedaasi maxakamad awood u leh
        iii) ka codsanayaa Maxkamadda inay cayinto taariikhda dhegaysiga dacwada iyo in ay qaado talaabooyinka lama-huraanka u ah dhegaysiga dacwada, marka laga reebo xaaladaha ku dhigan faqradaha soo socda;
    b) Haddii uu ku qanco in cadaymaha la helay warka hore ee dacwadda aanay sheegaynin in la galay iyo in gaasi uu yahay eedaysanaha ka galay, wuxuu:
        i) amari karaa in baadhitaan dheeraad ah la sameeyo, hadduu filayo in baadhitaanadaasi ay keeni doonaan cadaymo hor leh oo iftiiminaya, ama
        ii) haddii kale waxa uu oodayaa dacwada si waafaqsan tilmaamaha Qodobka 72.

2. Marka ay cadahay in:
    a) aan la gelin;
    b) ga aanu gelin eedaysanuhu;

c) qofka falay gu aanu ahayn masuul denbi:
    i) sabab waafaqsan tilmaamaha Qodobka 50 ee Xeerka Ciqaabta, uu qofkaasi sabab xanuun maskaxeed ay maqan tahay kartidiisa garashada iyo xadgudubka;
    ii) sabab waafaqsan Qodobka 59 ee Xeerka Ciqaabta, qofku aanu ahayn, xilliga uu galay ga, mid da'diisu gaadhay 14 sanadood.
d) ga uu baaba'ay:
    i) eedaysanaha oo geeriyooday si waafaqsan Qodobka 143 ee Xeerka Ciqaabta;
    ii) la cafiyay, si waafaqsan Qodobka 144 Xeerka ciqaabta;
    iii) si waafaqsan Qodobka 145 ee Xeerka Ciqaabta, xaalada yada lagu oogo dalabka dhibanaha, laga noqday ashkatadii iyo in aan ka noqoshada ashkatada laga hor iman si waafaqsan Qodobka 87 xeerka Ciqaabta, ama in dhibanihii dhintay;
    iv) khilaafaad la dhameeyay si waafaqsan Qodobka 146 ee Xeerka Ciqaabta;
e) Dacwad aan lagu oogi karin eedaysanaha:
    i) sababtoo ah, si waafaqsan qaybaha Qodobka 81 ee Xeerka Ciqaabta, ga taagani uu yahay mid lagu oogi karo dalabka dhibana (ashkatada), oo aan ashkato la samaynin;
    ii) sababtoo ah, si waafqsan farqada 3 ee Qodobka 13 ee Xeerkan, isla dhacdan si kama danbayn loogu xukumay ama loogu waayay ama si sharci ah loogu ooday;
    iii) sababtoo ah, sid ay dhigayso farqada 5 ee Qodobka 13 ee Xeerkan, ogolaanshihii lagama maarmaanka u ahayd oogitaanka dacwada, ayaan la bixin ama la diiday;
    iv) sababtoo ah, si waafqsan qaybaha Qodobka 73 ee Xeerkan, tallaabo ciqaabeed lama bilaabi karaynin sababtoo ah muddadii dhaqaajinta dacwada ee qodobkaas ku dhignayd oo dhacday.

Ka dib Xeer Ilaaliyaha Guud, isagoo sababaynaya soona bandhigaya cadaymaha arrinta ku haboon, wuxuu ka codsanayaa Maxkamadda ikhtisaaska u leh in ay baabi'iso dacwada kana qaadato talaabooyinka kale ee ku haboon.

**Qod. 71**
**Qaabka Xaashida eedda**

1. Xaashida waxay noqonaysaa laba nuqul oo isku mid ah oo ay ku qoran yihiin:
    a) magaca hay'ada samaysay xaashida eeda;
    b) taariikhda la soo saaray;
    c) astaamaha guud ee eedaysanaha ah, haddii aan la garanayn, tilmaamo kale oo caqligal ah oo si suggan loogu aqoonsan karo;
    d) denbiga lagu eedeeya oo uu weheliyo hadal qeexan oo muujinaya falka dhismaha denbigu ku qotomo oo ay ku jirto waqtiga dhacay iyo goobta denbigu ka dhacay iyo qofka ama shayga denbiga laga galay;
    e) Sharciga, iyo Qodobada xeerka ah ee lagu xadgudbay;

f) Xusida duruufaha cuslaynta, marka laga reebo caadaystanimada ga, iyo duruufaha keeni kara in talaabooyin ammaan laga qaado iyo qodobada ay kuwaasi la xidhiidhaan;
g) Astaamaha guud ee qofka dhibanaha ka ah denbiga iyo qofka duruufaha denbigu muujiyeen in uu noqday bilaa dembi;
h) Tilmaamida haddiiba eedaysanaha lagu hayay xadhig ah xabsi;
i) saxeexa masuulka sameeyay eeda iyo shaambada xafiiska.

2. Marka:
   a) eedaysanaha lagu eedeeyay in ka badan hal dembi:
      i) eedu waa in ay si isku xigta loo lambariyaa;
      ii) qaybaha xarfaha d), e), f), iyo g) ee farqada hore, ayaa lagu dabaqayaa eeda denbi kasta;
   b) laba ama in ka badan oo dad ah wada jir loo wada eedeeyay:
      i) xaashida eedu waa in ay muujisaa qofkasta denbiga/denbiyada lagu eedeeyay;
      ii) tilmaamaha xarfaha c), d), e), f), g), iyo h) ee farqada hore ayaa lagu dabaqayaa xaalada eedaysane kasta.

**Qod. 72**
**Kaydinta Dacwadda**

1. Mar kasta oo go'aan la xidhiidha oodista dacwada sida uu dhigayo xarafka b) - ii) ee farqada 1 ee Qodobka 70 aanu qaadan Xeer Ilaaliyaha Guud laftiisa, go'aankaa oodista waxaa ansixinaya Xeer Ilaaliyaha Guud. Xafiiska go'aanka ujeedadaas leh qaadanayaa, wuxuu nuqul go'aankiisa ah wuxuu u dirayaa Xeer Ilaaliyaha Guud oo dalban kara in loo keeno dhamaan galka khuseeya dacwadda.

2. Xeer Ilaaliyaha Guud markii uu u arko in aanu haboonayn ansixinta go'aankaas oodista dacwadu, wuu baabi'inayaa, wuxuuna amryaa:
   a) In dacwada lagu oogo eedaysahana sida waafaqsan tilmaamaha xarafka a) farqada 1 Qodobka 70, ama;
   b) In baadhis dheeraad ah lagu sameeyo dacwada sida waafaqsan xarafka b) i) farqada 1 ee Qodobka 70.

3. Marka uu ansixiyo Xeer Ilaaliyaha Guud oodista dacwadda, xaaladaha oodista loo baahan yahay, go'aanka oodistu waa in:
   a) loo diraa Maxkamadda awoodda u leh taasi oo qaadaysa talaabooyinka loo baahan yahay ee ku dhigan Qodobka 76;
   b) waxaa la ogaysiinayaa eedaysanaha.

4. Marka laga reebo xaaladaha ku xusan faqrada 2 aad ee Qodobkan ee aanay muuqan dhamaanshaha dacwadu, xeer-ilaaliaya guud wuxuu tirtirayaa go'aanka oodista dacwada marka la helo cadaymo cusub, kuwaas oo keligood ama markay is-kaashadaan kuwii hore bayaaminya in denbiga la galay, eedaysanuhuna yahay ka galay.

**Qod. 73**
**Xaddidaadda mudada dacwad ciqaab ah lagu bilaabi karo**

1. Sida uu qabo Xeerkani, haddii aan mawduuca loogu cadayn si kale, dacwadyada waxa loo qaadanayaa in lagu oogay qofka ay lidka ku tahay marka ugu horaysa ee ruuxaasi noqdo eedaysane sida uu ku sheegan faraqada 1 ee Qodobka 13.

2. Dacwad ciqaab ahi:
   a) Way bilaabmi karaan wakhti kasta, marka ay jiraan xaaladaha soo saarista amarka qabashadu khasabka yahay, si waafaqsan tilmaamaha farqada 1 ee Qodobka 42.
   b) xaalda kasta oo kale lama biaabi karo dacwad ciqaaba sida ay waajibiyeen, tilmaamaha faqradahan soo socda, kadib marka ay dhammaato waqtiga loo xadiday oo ka bilaabanaya waqtigii denbigu dhacay oo ah kuwan soo socda:
      i) 6 sanadood, xaalada yada ay ciqaabtooda ugu weyn ay ka badan tahay 5 sanadood;
      ii) 4 sanadood, xaalada yada ciqaabtooda ugu wayni ay ka bdan tahay 3 sanadood;
      iii) 2 sanadood, xaalada dambyada ay ciqabtoodu ugu wayn aanay ka badnayn 3 sanadood
      iv) 6 bilood, marka ay jirto xaalada yada ay ciqaabtoodu tahay ganaax kaliya.
3. Xaddidaadda wakhtiyada ku xusan xarafka b) ee farqada hore waxay ku bilaabmi doona:
   a) maalinta uu dhacay gu, marka ay jirto xaalada yada ku xusan Qodobka 16 ee Xeerka Ciqaabta "yada la galay".
   b) maalinta ah ta falka ama fal la'aanta isku daygu ay dhacday, xaaladaha isku dayga denbiyada;
   c) maalinta denbiiluhu dhameeyay gelidii denbiga xaaladaha denbiyada joogtada ah ama kuwa xidhiidhsan

Iyadoo denbiyada ay galaan saraakiisha dawladdu iyagoo xilkooda gudanaya uu xadidaada waqtigaasi ka bilaabmayo maalinta shaqadaa looga joojiyay.

4. Xadidaada waqtiga lagu qeexay faqrada 2, xarafka (b) ee qodobkan, lama xisaabinayo waqtiga eedaysanuhu ka maqnaa dalka ama waqtiga isagoo dalka ku sugan uu dhuumanayay ama uu si badheedh ah uga hortegayay qabashada, sidoo kale lama xisaabinayo denbiyada ay galaan saraakiisha dawladdu mudadii ay xilka hayeen, iyadoo waqtigu uga bilaabanayo marka shaqada laga joojiyo arrinkaa dartii.

**Qod. 74**
**Oggolaanshaha ku oogidda**

Ma jirayso oogid la samayn karo iyadoo aan marka hore laga haysan ogolaansho rasmi ah oo qoraal ah Wasiirka Awqaafta iyo Cadaaladda oo lid ku ah;

a) i) Xubin kasta oo garsoorka ka mid ah, oo ay kujiraan garsoorayaasha dadwayne;
   ii) Hanti-dhawrayaasha (Magistrate Of Accounts);
   iii) Gudoomiyayaasha Gobollada;

vi) Gudoomiyayaasha Degmooyinka
v) Gudoomiyaha golayaasha degaanka.

yada ay ku galaan iyagoo ku guda jira gudashada xilalkooda;

b) Sarkaal kasta oo Boolis ahi yada uu ku galay shaqadiisa oo la xidhiidha isticmaalka hubka ama hababka kale ee khasabka jidheed ah. Tilmaamahan waxaa lagu dabaqayaa:
   i) ruuxii galay falka;
   ii) ruuxii amray falka;
   iii) ruux kasta oo marka si sharci ah looga codsaday gacan ku siiyay si waafaqsan tilmaamaha Qodobka 27.

## Cutubka 2aad
Howlaha garsooraha

### Qod. 75
### Muddaynta taariikhda dhegaysiga dacwadda iyo tallaabooyin kale ee la xidhiidha

Garsooraha awoodda u leh marka ugu horaysa ee ay soo gaadho xaashida eedu lagana codsado in uu mudeeyo dhagaysiga dacwadda si waafaqsan xarfka a) farqada 1 ee Qodobka 70 waxa uu:

a) mudaynayaa dhagaysiga dacwada;
b) soo saaraya:
   i) Amarka in eedaysanaha la hor keeno Maxkamadda, si waafaqasan tilmaamaha Qodobka79, haddii eedaysanuhu ku jiro xabsi;
   ii) Dalabada iyo yeedhitaanada lagu hor imanayo Maxkamadda , si waafaqasan qaybaha Qodobada 48 iyo 49, haddii aanu eedaysanuhu ku jirin xabsi;
c) Wuxuu amarka lagu hor keenayo eedaysanaha Maxkamadda ama yeedhitaanka Maxkamadda horteeda:
   i) Ogaysiinayaa eedaysanaha, si waafaqasan qaybaha Qodobadda 79 iyo 51 isagoo ugu lifaaqaya nuqul eeda ah;
   ii) Waxa lala socodsiinayaa Xeer Ilaaliyaha Guud isagoo nuqulka siinaya;
d) Wuxuu u magacaabayaa Qareen Difaaca eedaysana, xaaladaha hoos yimaada tilmaamaha xarafka b) farqada 2 Qodobka 14 ee Xeerka Nidaamka Garsoorka, marka eedaysanahu aanu qabsan Qareen Difaaca, isagoo si toos u ogaysiinaya magacaabistaa eedaysanaha iyo Qareenka difaaca.
e) Wuxuu u soo saarayaa yeedhmooyinka ku xusan Qodobka 80:
   i) dhinaca dhibbanaha;
   ii) maragyadda ay dhinacyadu sheegtaan.

### Qod. 76
### Hababka la xidhiidha ooditaanka dacwadda marka ay dalbadaan dhinacyadu

Garsooraha awoodda u lihi, marka ay soo goodho ogaysiinta go’aanka oodista dacwadda, si waafaqsan qaybaha farqada 3 ee Qodobka 72 waxa uu:

a) Haddii eedaysanuhu xabsi ku jiro, wxuu amarayaa in si degdeg ah loo sii daayo

b) Haddii eedaysanuha ay saarayd talaabooyin nabadgelyo oo waafaqasan tilmaamaha Qodobka 78, isla markiiba wuxuu amrayaa tirtiridda talaabooyinkaas;
c) Haddii eedaysanuhu uu ku jiro, damaanad:
    i) Wuxuu amrayaa baabi'inta (tirtiridda) culayska dammaanadeed ee lagu waajibiyay si waafaqsan tilmaamaha farqada 2 ee Qodobka 59;
    ii) Waxaa laga xoraynayaa dammiintaha dammaanadii waxaana loo celinayaa curaartii ka taalay Maxkamadda, si waafaqsan tilmaamaha xarafka a) farqada 1 ee Qodobka 61;
d) Haddii eedaysanaha lagu siidaayay sabab la xidhiidha mudo dhaaf ah xiligii uu xabsiga ku jiray, waxa uu amarayaa tirtirida shuruudihii la saaray si waafaqsan faqrada 4 ee Qodobka 47.

## Qod. 77
## Amarka joojinta dacwada iyo talaabooyinka la xidhiidha

1. Xaaladaha ku xusan farqada 2 ee Qodobka 70, Garsooraha awoodda u lihi, ka dib marka uu ka codsado xeer Ilaaliyaha ama eedaysanuhu ama xafiis ahaan u go'aansado, wuxuu:
    a) Amaryaa in dacwadii la oodo, isagoo sheegaya sababaha;
    b) Wuxuu qaadayaa talaabooyinka ku xusan Qodobka 76, waxanu amri xaaladaha uu dhigayo Xeerka Ciqaabta guud dhaqangalinta talaabooyin ammaan;
    c) U gudbinayaa amaradaa iyo talaabooyinka la xidhiidha:
        i) Eedaysanaha, iyo
        ii) Xeer ilaaliayaha guud oo uu nuqul ka siinayo.

2. Xaaladaha ku cad farqada 2 ee Qodobka 70, amarka oodista dacwaddu wuxuu u dhigmaa xukun, sida ay tahay ujeedada farqada 3 ee Qodobka 13, taasoo xataa haddii uu noqday mid aan laga noqon karin, amarka in la xidho dacwadda sabab ah eedaysanaha oo geeriyooday, ama iyada oo aanay jirin ashkatadii, ama ogolaanshihii oogitaanka oo aan loo haysan, ma jirayso wax xanibi kara in la dhaqaajiyo dacwad ciqaab ah oo salka ku haysa xaqiiqo la mid ah amase lid ku ah isla qofkii, haddii la ogaado geerida la soo weriyay ay khalad ahayd amase haddii ashkato ama ogolaanshihii oogida islamarkiiba dib laga helay.

## Qod. 78
## Tilmaamaha dabaqaada talaabooyin ammaan

Xaalahada lagu sheegay Qodobka 166 ee Xeerka Ciqaabta guud, dabaqaada ku meel gaadh ah ee talaabooyinka ammaan iyo ka noqoshadeeda waxa amri kara:
a) Garsoore awood u leh, ilamaa xiliga la bilaabayo dhegaysiga dacwada Maxkamadda marxaladda koowaad;
b) Maxkamadda awoodda u leh ee marxalad kasta oo kale dhegaysiga dacwadu marayso.

**Qod. 79**
**Amarka in eedaysanaha la hor keeno maxkamadda**

1. Amarka ah in eedaysanaha la hor keeno Maxkamadda waxa uu ka koobnaanayaa amar, ku socda maamulka eedaysanaha ku haya xabsiga, oo ah in eedaysaha la keeno Maxkamadda awood u leh horteeda wakhtiga iyo goobta la cadeeyay si uu markaasi eedaysanuhu uga jawaabo eedyno khaas ah.
   Ilaa iyo xadka lagu dhaqmi karo, tilmaamaha uu jideeyay Qodobka 49 ayaa lagu dabaqi doonaa qaabka amarka caynkan ah.

2. Amarka ah in eedaysanaha la keeno Maxkamad horteeda waxa loo dirayaa Masuuliyiinta ku haya eedaysanaha xabsiga. Masuuliyiintaasi, kadib marka ay ku diiwaan-gashadaan amarkaasi diiwaan ku haboon, waxa ay ku wargalinayaan eedaysanaha habka ku sheegan farqada 2 ee Qodobka 51, waxayna ku soo celinayaan nuqulka amarkaasi loo geeyay masuuliyiintii u soo diray amarka.

**Qod. 80**
**Hawsha Yeedhitaanka Dhibanaha iyo Maragayada**

1. Yeedhitaanada waxa loo soo saarayaa qaab amar ku socda:
   a) dhinaca dhibanaha ah;
   b) maragayada:
      i) wax ka og duruufaha dacwada;
      ii) kuwa looga baahan yahay arragti ku saabsan su'aalo u baahan aqoon gaar ah oo saynis ah ama aqoon cilmiga aan sayniska ahayn ah oo helitaankoodu yahay lagama maarmaan ama fursad;
      iii) uu leeyahay mulkiga shay kasta kaasi oo loogu yeedhay in uu shaygaasi u keeno marag muujun ahaan.
      iv) oo la faro iyagu in ay yimaadan Maxkamad awood u leh horteeda wakhtiga iyo goobta ku cad yeedhmada.

2. Yeedhitaanada waxa lagu soo saarayaa:
   a) codsi uu sameeyo mid ka mid ah dhinacyada dacwada, ama
   b) Maxkamadda lafteeda marka imaanshaha maragyada ku xusan farqada hore ay u aragto inuu yahay lagama maarmaan ama faa'iido u leeyahay Maxkamadda.

3. Yeedhmooyinka waxa soo saaraya:
   a) Garsoore awood u leh, ilaa iyo xilliga bilowga dhegaysiga dacwada ee Maxkamad marxalada koowaad ah.
   b) Gudoomiyaha Maxkamadda awooda u leh, marxalad kasta oo dhegaysiga dacwadu marayso.

4. Yeedhmooyinka waxa lagu soo saarayaa laba nuqul oo ay ku qoran yihiin:
   a) magaca maamulka soo saaray;
   b) taariikhda la sameeyay;
   c) astaamaha guud ee qofka loo yeedhay inuu yimaado, ama, haddii aan la garanayn, tilmaamaha kale ee si cad loogu garan karo.

d) astaamaha guud ee eedaysanaha;
e) sababaha amarka imaanshaha loo amray;
f) magaca Maxkamadda qofku imanayo, oo ay ku jirto wakhtiga iyo goobta loo cayimay;
g) saxeexa Garsooraha soo saaray yeedhmada iyo shaanbada Maxkamadda.

5. Waxaa yeedhmadda loo soo saarayaa sida ku tilmaaman tilmaamaha Qodobka 51 ama haddii qofka loo yeedhayaa xidhan yahay tilmaamaha ku tilmaaman faqrada 2 ee Qodobka 79 ayaa la dabaqayaa.

6. Xaaladaha degdega ah qofka lagu xusay farqada 1 ee Qodobkan waxa loogu yeedhi karaa inuu ku yimaado si kasta oo kale, oo ay ku jirto in uu sarkaal booliska ahi uu afka ka faro imaanshaha.

7. Haddii qofku ku iman waayo Maxkamadda horteeda wakhtiga iyo goobta loogu qoondeeyay warqada yeedhmada ama si kale, Maxkamadu waxay amraysaa in boolisku keeno qofka caynkaas ah Maxkamadda horteeda.

## CINWAANKA 4AAD
Hab-raaca dhegaysiga iyo xukumo ciqaabeed

### Cutubka 1aad
Hab-raaca dhegaysiga

### Qaybta 1aad
Xukumo guud

#### Qod. 81
#### Saxeexa diiwaannada iyo dukumentiyada

1. Markasta oo diiwanada ama qoraalada looga baahan yahay waa in la saxeexaa, ujeedadaas waxaa ku filan markaan xeerku si ka duwan dalban in qoraal gacmeed lagaga saxeexo badhtanka diiwaanka ama qoraalka;
   a) Magaciisa, magaca aabihii iyo magaca awowgii, ama
   b) Magaciisa koowaad iyo magaca qoyskiisa.

2. Haddii qofka looga baahan yahay inuu saxeexo uu yahay mid aan waxna orin waxna akhriyin, markaas maamulka hortiisa lagu saxeexayo Dokumentiga ama qiraalka afka ah loo sheegayaa waa inuu hubiyaa aqoonsiga qofka saxeexaya, iyadoo suulka lagaga qaadayo khad aan tirtirmaynin halkii saxeexa qalinka ah.

3. Haddii ruuxa looga baahan yahay saxeexu aanu kari karayn saxeexa suulka ah, abab ah carqalad jidh qofka ah, in uu sameeyo mid ama ta kale, xaqiiqada aynkaasi ah waa in lagu qoraa diiwaanka, dhokumentiga ama qoraalka waxana ku qoraya qofka hadalka qoraya ama diiwaan galinaya qoraalka.

**Qod. 82**
**Taariikhda Diiwaanka iyo Dokumentiga**

Markasta oo sharcigu sidaa dalbado diiwaankasta ama qoraalkastaa waa in uu taariikhaysnaadaa, iyadoo ay ka muuqanayso:

a) maalinta,
b) bisha,
c) sanadka, iyo
d) goobta,

diiwaan gelintaas iyo dokumentigaasi la sameeyay.
Caddaynta saacadu maaha daruuri, haddii aan si aad ah loogu baahnayn.

**Qod. 83**
**Soo Bandhigida Hadaladda iyo Codsiyada**

Marxalad kasta oo dhegaysiga gartu marayso dhinac kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu u soo bandhigo:

a) Maxkamadda,
b) Garsooraha
c) Xeer Ilaaliyaha Guud,

Hadalo iyo codsiyo, isagoo dhigaya xafiisyadooda, taasoo ay tahayn in ay u gudbiyaan dhinaca kale, haddii aan sharicu si kale u nidaamin.

**Qaybta 2aad**
Falalka iyo talaabooyinka dabeecad garsoor leh

**Qod. 84**
**Qaabka tallaabbooyinka**

1. Haddii aanay ahayn qoraal, kuwa hoos ku xusani waxay noqonayaan waxba kama jiraan;
   a) Go'aanada;
   b) Fal kasta oo kale oo ka dhigaya dhegaysiga garta dhammaad, ama laga racfaan qaadan karo;
   c) Talaabo kasta oo khusaysa xoriyada shakhsiga, iyo amar qabasho Maxkamadeed nooc kasta oo uu yahay.

2. Falalka ku xusan farqada hore waxay kaloo yeelanayaan:
   a) Taariikhda iyo
   b) Saxeexa maamulka soo saaray, waxay ku sheegayaan sababaha ay sidaa u tahay.

Haddii aan shuruudahaas loo hogaansamin, falakaasi waxay noqonayaan kuwa aan sharci ahaan la isticmaali karin.

**Qod. 85**
**Sixitaanka qaladaadka**

Markii talaabo la qaado ay ku jirto wax maqan ama qaladaad kaasi oo:

a) Ka dhigayn talaabada baaba'a, iyo
b) Haddii sixitaanku, aanu bedelayn nuxurka talaabadda, sixitaan waxaa iskeed u samayn kara maamulkii soo saaray, balse marka ay suurtawdo waa in arrinkaa laga siiyaa dhinacyada danaynaya ogaysiin hore.

**Qod. 86**
**Hab-raaca go'aan qaadashada**

1. Haddii aanu sharcigu si kale u sheegin:
   a) Maxkamaddu go'aanka waxay ku gaadhaysaa qolka tashiga, iyadoo dhinacyadu aanay faragelin.
   b) Marka Maxkamadu ka kooban tahay in ka badan hal qof;
      i) falanqayntu waxay noqonaysaa qarsoodi; go'aamadana waxa lagu gaadhayaa cod aqlabiyad ah.
      ii) xubin Maxkamadda ka tirsani kama aamusi karto codaynta;
      iii) codadka waxa qaadi doona gudoomiyaha, oo isaga codkiisu ugu dambaynayo, codaynta waxa bilaabaya Garsooraha ugu darajada hooseeya, ama Garsooraha ugu waayo aragnimada yar, marka in ka badan laba Garsoore ay isku derejo tahay. Maxkamaddaha Tashiga, Garsoorayaasha dadwayne ayaa codaynta ugu horaynaya, waxa ugu hor bilaabaya ka ugu yar
      iv) laguma xusayo go'aanka soo baxa dariiqii uu ruux kastaa codayntiisu u dhacday, haddii xus noocaas ah la sameeyo, go'aankii wuxuu ka dhigayaa baaba'a.
      v) haddii Qaybta tashiga ee Maxkamadda rafcaanku, uu ka soo baxo feker kala duwan ee arrinka gaarka u ah garsoorayaasha si waafaqsan Qodobka12 ee xeerka nidaamka garsoorka, Gudoomiyuhu wuxuu yeelanayaa codka lagu kala baxayo.

2. Haddii aanu xeerku u sheegin si kale, marka aan go'aanka loo gaar yeelin qayb gaar oo Maxkamadda ah, qaybahan soo socda ayaa awoodda leh;
   a) Qaybta Ciqaabta ee Maxkamadda Degmada;
   b) Qaybta denbiyada caadiga ah Maxkamadda Gobolka ama Maxkamadda rafcaanka.

**Qod. 87**
**Awoodda xoog adeegsiga**

Maxkamadda, Garsooraha iyo Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud waxa ay:

a) Dalban karaa farogelin boolis,
b) Amrayaan in la qaado talaabo kasta oo lama huraana si loo xaqiijiyo habsami u socodka iyo ammaanka dhegaysiga dacwadda.

**Qaybta 3aad**
Xadidaada wakhtiga

**Qod. 88**
**Qodobo Guud**

1. Xadidaada wakhtiyada (mudaynta) dhegaysiga dacwadda waxay si qeexan u sheegi doonaan:
   a) saacadaha;
   b) maalmaha;
   c) bilaha, ama
   d) sanadaha,

2. Mudayn kasta oo aan loo qaririn saacadaha, oo ku dhacda fasaxyada guud, waxay u rarmaysaa si iskeed maalinta shaqo ee ku xigta.

3. Xisaabinta cayimaadda waqtiga, saacada ama maalinta mudayntu bilaabmayso kuma jirayso; saacada ama maalinta ugu dambaysa ayaa ku jiraysa mudaynta, haddii aanu sharcigu u jidayn si kale.

4. Mudaynta loo xadido in la bixiyo war-bixin, la gudbiyo dhukumentiyo, ama lagu qabanto hawl kale oo Maxkamadeed, waxaana loo aqoonsanayaa inay dhacday (dhammaatay), waqtiga si waafaqsan xeerarka, xafiisyadda dadwaynaha la xidho.

5. Halka dhammaadka waqtigaasi keenayo xuquuq ganaax, waqtigaa lama kordhin karo, marka laga reebo xaaladaha iyo hababka sharcigu bixiyay.

**Qod.89**
**Xilliga hortagida maxkamadda**

Haddii aanu sharcigu si kale u tilmaamin, marka qofka looga baahan yahay in uu hortago Maxkamadda si uu uga jawaabo yeedhitaano ama amaro kale, qofkaa waxaa la ogaysiinayaa:
   a) ugu yaraan saddex cisho ka hor wakhtiga laga rabo inuu hortago Maxkamadda;
   b) xaalad kasta waqti wanaagsan waan maskaxda lagu haynayo duruufaha, qofkaasi uu ku soo gaadhi karo Maxkamadda xiligii loo qabtay inuu hortago.

Marka tilmaamaha hore aan la oofin, ee ay noqoto in qofkii hortegi waayo Maxkamaddii, yeedhmo cusub ama amar cusub ayaa la soo saarayaa.

**Qaybta 4aad**
Talaabooyinka waxba kama jiraanka ah

**Qod. 90**
**Qodobbo Guud**

Talaabo sharci looguma dhawaaqi karo in ay tahay waxba kama jiraan (baaba'a), marka aan ku dhawaaqistaasi si qeexan sharciga ugu cadayn.

**Qod. 91**
**Baaba'a guud ee rab-raaca dhegaysiga dacwadda**

U hogaansanaanta tilmaamaha la xidhiidha a), b) iyo c) ee hoos ku qoran waa khasab haddii loo hogaansami waayana waxay ka dhigaysaa dhegaysiga waxba kama jiraan (baaba'a). Baabi'intaas oo Maxkamaddu xataa iskeed ugu dhawaaqi karto marxalad kasta oo dhegaysiga dacwadu marayso:

a) Dhamaystirka iyo dhismaha Maxkamadda;
b) Ka qayb qaadashada Xeer Ilaaliyaha Guud ee dhegaysiga dacwada;
c) Qareen lahaanta eedaysanaha xaalaaha ay khasab tahay in eedaysanuhu qareen yeesho.

**Qod. 92**
**Xaalado aanu baaba'u wax ku ool ahayn**

1. Talaabo loogu dhawaaqi karo waxba kama jiraan marka dhinacyada danaynayaa codsadaan oo keliya, way ansaxaysaa marka dalabkaa loola iman waayo waqtigii sharcigu u xadiday iyo qaabkii sharcigu u xadiday.

2. Talaabo Maxkamaddu iskeed xafiis ahaan ugu dhawaaqi lahayd waxba kama jiraan (baaba'a), way ansaxaysaa marka Maxkamaddu marxaladna ugu dhawaaqi waydo iskeed ama dalabka dhinaca danaynaya.

3. Intaas waxaa dheer talaabo loogu dhawaaqi lahaa waxba kama jiraan, ayaa ansaxaysa:
   a) haddii, inkastoo aanay caadi ahayn haddana natiijada talaabadaas ka dhalatay dhinacyada danaynaya si isku mid ah u saameeyay.
   b) haddii dhinaca danaynayaa uu hadal la'aan ogolaado saamaynta talaabada.

**Qod. 93**
**Saamaynta ku dhawaaqida baaba'a**

1. Marka talaabo lagu dhawaaqo baaba'eeda dhammaan talaabooyinka la xidhiidha ee ku xigaa waxay noqonayaan waxba kama jiraan.

2. Maxkamadda ku dhawaaqday waxba-kama jiraanimadda talaabadaasi, waxay amari kartaa in talaabooyinka baaba'a noqday markale la soo sameeyo ama way saxaysaa markay suurtogal tahay.

**Qaybta 5aad**
Diiwaan galinta garmaqalada

**Qod. 94**
**Hadal-qoraalka dhegaysiga dacwada**

1. Sarkaalka masuuliyaas lehi, wuxuu hadal qoraal ku samaynayaa dhammaan talaabooyinka dhegaysiga garta la qaaday.

2. Haddii aanu sharcigu si kale u sheegin, diiwaan-gelintu waxay ka koobnaanaysaa:
   a) In ay muujiso goobta, sanadka, bisha, maalinta iyo, haddii ay lagama maarmaan tahay, saacada uu falku bilaabmay iyo ta uu dhamaaday;
   b) Magacyada dadka goob-jooga ah;
   c) Sharaxaada talaabooyinka la qaaday iyo natiijooyinkii ka soo baxay.
   d) Hadal-qoraalada laga qaaday dadkii goobjooga ahaa;
   e) Arrimo kasta oo kale oo uu masuulka dacwadu u arko inay ku haboon tahay in lagu daro;
   f) Saxeexa masuulka dhegaysiga garta.

**Qaybta 6aad**
Ganaaxyo

**Qod. 95**
**Marka loo hogaansami waayo amarada garsoorka**

1. Ruux kasta oo u hogaansami waaya amar ka soo baxay Maxkamad, Gudoomiyaha Maxkamadda ama garsoore, si waafaqsan tilmaamaha Xeerkan, waxa lagu ciqaabi doonaa, haddii aanu ahayn falku mid uu ka dhalanayo ka culus, xadhig khilaafaad oo gaadhaya ilaa 3 bilood, ama ganaax khilaafaad oo gaadhaya ilaa Sh. So 3,000/-.
2. Amar xidhitaan oo lid ku ah qofkaa waa la soo saari karaa.

**BUUGGA LABAAD**
Dhegaysiga dacwada derejada kowaad

**Qaybta 1aad**
Dhegaysiga

**Qod. 96**
**Dhegaysiga dacwaduhu waa in ay Dadwaynaha u Furaadaan: Marka laga reebo**

Fadhiga dhegaysiga dacwadda Maxkamddu waa in ay u furan tahay dadweynaha, balse Maxkamaddu, iyadoo eegaysa danta:
   a) Anshaxa bulshada;
   b) caafimaadka dadweynaha;
   c) Ammaanka guud;

Waxay amraysaa in dhegaysiga dacwaddu ay ka xidhnaato dadweynaha.

**Qod. 97**
**Nidaamka joogitaanka dadwaynaha ee dhegaysiga dacwada**

1. Soo galida, ama fadhiga gudaha, qolka dhagaysiga Maxkamadda waxa ka reebban:
   a) Qof kasta oo la garanayo inuu yahay:
      i) muddayac;
      ii) qof aan dantiisa ilaalin oo iska meeraysta;
      iii) qofka laga filayo in uu gaysto denbi ku lid ah shakhsiga ama hantida
   b) qof kasta oo waalan;
   c) sakhraansan;
   d) qofka da'diisu ka yar tahay 14 sano;
   e) qof kasta oo u labisan hab aan wanaagsanayn;

2. Gudoomiyaha Maxkamaddu wuxuu:
   a) Wuxuu amrayaa isagoo eegaya danta:
      i) Nidaamka hagaagsan,
      ii) dammiirka, ama
      iii) anshaxa;

In laga saaro hoolka dhegaysiga Maxakamadda, qofkasta oo aan joogistiisu daruuri ahayn.

   b) U xadidi karaa soo gelitaanka gudaha hoolka dhegaysiga dacwadaha tirada dadka.

3. Goobo khaas ah looma qoondaynayo gudaha qolka dhagaysiga Maxkamadda, xubno gaara oo bulshada ka mid ah.

**Qod. 98**
**Waajibaadka dadka ka soo qaybgalaya dhagaysiga**

1. Qof kasta oo ka qaybgalaya dhagaysiga, wuxuu ku fadhiyayaa xushmad iyo aamusnaan;

2. Dhamaan dadka ka soo qaybgalay dhagaysiga wax ka reebban:
   a) In ay sitaan hub ama walax kasta oo awoodi karta inay sababto dhaawac ama waxyeelo ama cadho kicin karta;
   b) Sababi karta arbushaad;
   c) u dhaqmo:
      i) si cabsi gelin (argagixin)
      ii) si ka cadhaysiin ah
      iii) si ka soo horjeeda sharafta (sumcadda) dhegaysiga dacwada
   d) ay sababaan wax kastoo jabinaya nabadgelyada, ama
   e) si uun u soo bandhigo fikirkiisa ama dareenkiisa.

**Qod. 99**
**Hagida dhagaysiga**

Gudoomiyaha Maxkamadda ayaa leh awooda xasilinta nidaamka dhegaysiga dacwadda, wax kastoo uu u soo rogo habsami u socodka Maxkamadda isla markaaba waa loo hogaansamayaa.

**Qod. 100**
**Eedaysanaha ku jira xabsiga**

Eedaysanaha lagu hayo xabsiga ka hor dhegaysiga dacwadda, wuxuu ka soo qaybgelayaa dhagaysiga dacwadda, iyadoo aan la saarin wax xanibaad ah, haddii aan tallaabooyinka lagu xadidayaa lagama maarmaan u noqon ka hor tag fakasho ama weerar.

**Qod. 101**
**Hakinta dhegaysiga dacwada**

1. Maxkamaddu waxay amri kartaa hakinta furitaanka ama oogida dhegaysiga dacwadda, markii ay u aragto in ay lagama maarmaan u tahay ama ay haboon tahay in sidaa loo yeelo sababo ah maqnaansho maragyada ama sababo kale oo caqli gal ah.

2. Haddii eedaysanuhu xabsiga ku jiro, hakintu kama badan karto 7 maalmood.

**Qod. 102**
**Dabaqaada qodobada cutubka**

Tilmaamaha cutubka ayaa la dabaqayaa markasta oo la dabaqi karo marxalad kasta oo dhegaysiga dacwaddu marayso.

**Cutubka 2aad**
Furitaanka dhegaysiga doodaha

**Qaybta 1aad**
Ka gilgilashada eedaynta

**Qod. 103**
**Furitaanka dhegaysiga dacwadda & eed diididda eedaysanaha**

1. Gudoomiyaha Maxkamaddu:
   a) marka uu ogaado in ay goob joog yihiin eedaysanaha iyo Xeer Ilaaliyaha Guud, iyo
   b) marka uu u magacaabo Qareen difaaca eedaysanaha wakhtiga loo baahan yahay si waafaqsan tilmaamaha xarafka b) farqada 2 ee Qodobka 14 ee Xeerka Nidaamka Garsoorka ee marka eedaysanuhu, wixii doonaaba ha sababeene, aanu haysan Qareen difaaca, wuxuu u akhriyayaa eedaysanaha xaashida eeda.

2. Marka uu akhriyo eeda, Gudoomiyaha Maxkamaddu waxa uu:
   a) Ugu sharaxayaa eedaysanaha, hab bayaan ah oo faahfaahsan, nuxurka qayb kasta oo ka mid ah eeda.
   b) Ku wargelinayaa eedaysanaha saddexda jawaabood ee uu ka bixin karo eeda kasta si waafaqsan Qodobka 104, si kooban u tilmaamayaa natiijada ka dhalan karta jawaab kasta oo uu bixiyo;
   c) Waydiinyaaa eedaysanaha midka uu rabo sadexdaa jawaabood:
      i) in uu soo jeediyo is-hortaaga ku xusan Qodobka 105;
      ii) ku jawaabo in uu ga qabo;
      iii) ku jawaabo in aanu ga qabin.

3. Haddii ay jiraan in ka badan hal eedaysane, tilmaamaha farqada hore waxa lagu dabaqayaa eedaysane kasta gaarkiisa marka loo eego eed kasta.

**Qod. 104**
**Jawaabta Eedaysanaha**

1. Eedaysanuhu wuxuu, eed kasta kaga jawaabi karaa:
   a) In uu soo jeedo is-hortaaga ku taxan Qodobka 105;
   b) In uu ogolaado denbiilenimada;
   c) In uu diido denbiilenimada,

Jawaab la'aanta eedaysanuhu waxaa loo qaadanayaa diidmo denbiilenimo.

2. Marka laga reebo xaaladda eedaysanuhu qirto denbiga, jawaabta waxaa u bixin kara qareenkiisa.

**Qaybta 2aad**
Is-hortaagga eedda

**Qod. 105**
**Dabeecadda is-hortaagayada**

1. Eedaysanuhu, si waafaqsan tilmaamaha xarafka a) ee farqada 1 ee Qodobka 104 waxa uu isku hortaagayaa eeda ga sababahan:
   a) In aan isaga dacwadan lagu oogi Karin oo ay jiraan:
      i) mid ka mid ah duruufaha ku jira xarafka c), d), iii), iv) iyo e) ee farqada 2 ee Qodobka 70;
      ii) marka, dacwada ga lagu oogi karayay oo kali ah ashkatada dhinaca dhibanaha ah, xaqii in la sameeyo ashkatadaasina aan loo fulin sida ku xusan farqada 2 ee Qodobka 21.
   b) Maxkamaddu in aanay ikhtisaas u lahayn dacwada:
      i) maxaa yeelay ma laha ikhtisaas garsoor oo mawduuca dacwada khuseeyay, si waafaqsan Qodobada 4 iyo 7;
      ii) maxaa yeelay ma laha ikhtisaas dhuleed ee deegaan Maxkamaddu ku taal si waafaqsan Qodobada 5 iyo 8
   c) Eedayn kale ayaa laalan, oo leh xaqiiqooyin la mid ah, Maxkamad kale horteeda;

d) Xubin ka mid ah Garsoorayaasha ayaan u qalmaynin in uu ka qayb ka qaato dhegaysiga dacwada sida ku xusan Qodobka 10;
e) Xaashida eedu qaab ahaan iyo nuxur ahaan ma waafaqsana shuruudaha Xeerkani.

2. Waxa intaasi dheer, eedaysanuhu waxa uu soo qadimi karaa is-hortaag kasta ama codsi kasta oo kale oo uu u arko in uu difaaciisa wax ka tarayo.

**Qod. 106**
**Go'aanka Maxkamadda ee la Xidhiidha Is-hortaaga**

1. Maxkamaddu waxay go'aan ka gaadhaysaa is hortaag kasta:
   a) kadib marka la sameeyo hubin kasta oo loo arko lagama maarmaan, in lagu hubiyo dabeecada is hortaag kasta, iyo
   b) marka la dhegaysto aragtida Xeer Ilaaliyaha Guud.

2. Haddii is hortaagu u soo baxdo si waafaqsan farqada 1 ee Qodobka 105 lana ayido, Maxkamaddu:
   a) marka ay jiraan xaaladaha ku xusan xarafka (a) ee farqada 1 ee Qodobka 105:
      i) amraysaa in dacwadda lid ka ku ah eedaysanaha la oodo iyadoo sababaynaysa;
      ii) amraysaa talaabooyinka ka dhalanaya ee dabaqmi kara, ee xaaladaha ku tilmaaman Qod.76, waxay amraysaa xaaladahaa ku xusan xeerka ciqaabta dabaqaada talaabooyin ammaan.
      Go'aanka oodista dacwadda wuxuu la qiimo yahay xukun sida waafaqsan ujeedada farqada 3 ee Qodobka 13, iyadoo lagu dabaqayo tilmaamaha farqada 2 ee Qodobka 77 go'aankaas.

   b) xaaladaha uu sheegayo xarafka b) ee Qodobka 105 waxaa la amrayaa in dacwada loowareejiyo Maxkamad awood u leh;
   c) xaalada ku xusan xarafka c) Qodobka 105:
      i) haddii ay Maxkamaddu ku qanacdo in Maxmakad kale ikhtisaas u leedahay, waxa amraysaa in loo wareejiyo dacwadda Maxkamadda awooda u leh.
      ii) haddii Maxkamadu ku qanacdo in dacwaddu ikhtisaaskeeda tahay, waxaa imanaya su'aasha khilaafka ikhtisaaska ee waafaqsan Qodobka 9;
   d) xaalada ku xusan xarafka d) ee Qodobka 105, waxaa loo gudbinayaa Maxkamadda, oo go'aaminaysa sida waafaqsan farqadaha 2 iyo 3 ee Qodobka 11.
   e) xaalada ku xusan xarafka e) ee Qodobka 105 waxaa la amrayaa Xeer Ilaaliyaha Guud inuu wax ka bedel ku sameeyo eedda, isagoo soo waafajinaya sharciga, iyadoo markay, haddii ay lagamamaarmaan tahay, waxaa la siinayaa Xeer Ilaaliyaha Guud wakhti kooban oo ujeeddadan uu ku fuliyo.

3. Xaalad kasta oo kale Maxkamaddu waxay ka qaadaysaa is hortaaga tallaabooyinka ku haboon ee ay u aragto lagama maaarmaan.

**Qod. 107**
**Tallaabooyinka ay Maxkamaddu iskeed u qaadan karto**

1. Xaaladaha ku xusan Qodobka 105, Maxkamaddu waxay iskeed u qaadi karta talaabooyin waafaqsan tilmaamaha Qodobka 106, iyadoo la dhegaysanayo aragtida xeer-ilaaliyaha iyo eedaysanaha.

2. Marka geerida eedaysanaha la xaqiijiyo, waxay Maxkamaddu xafiis ahaan u amri kartaa in dacwadda la oodo, iyadoo la dhawrayo markay dabaqmi karaan tilmaamaha Qodobka 77.

3. Tilmaamaha Qodobkan, ilaa inta la dabiqi karo, waa la dhawrayaa marxalad kasta oo dacwaddu marayso.

**Qaybta 3aad**
Qirasho

**Qod. 108**
**Natiijadda Qirashada**

1. Marka eedaysanuhu uu qirto in uu galay ga lagu eedeeyay, si waafaqsan tilmaamaha xarafka b) farqada 1 ee Qodobka 104, Maxkamaddu waxay:
   a) haddii ciqaabta ugu badani ee gu ay tahay xadhig ka yar 10 sano ama ciqaab ka yar:
      i) isla markiiba ku dhawaaqaysaa xukunka si waafaqsan Cutubka IV ee Buugan, oo ku salaysan qirashada ga;
      ii) amraysaa in dacwadda dhegaysigeeda la wado si waafaqsan Cutubka III ee Buugan, haddii ay jiraan sabab la rumaysan karo qirashadu aanay run ahayn.
   b) haddii ciqaabta ugu badan ee gu tahay xadhig dhan 10 sano ka badan ama ciqaab ka sii adag, waxay amraysaa in dacwadda la dhegaysto si waafaqsan Cutubka III ee buugan.

2. Qirashada ga waa uu ka noqon karaa eedaysanuhu xili kasta oo dhegaysiga dacwaddu marayso marxalada koowaad ka hor intaanu xukun soo bixin, taasoo ay bedelayso in aanu gelin denbiga.
   Xaaladan tilmaamaha Waaxda IV ee Cutubkan ayaa la raacayaa.

**Qaybta 4aad**
Qirasho la'aanta dembiga

**Qod. 109**
**Natiijadda Qirasho la'aanta denbiga**

1. Marka eedaysanuhu uu dafiro ga, si waafaqsan xarafka c) farqada 2 ee Qodobka 104, Maxkamaddu waxay sii wadaysaa dhegaysiga dacwadda si waafaqsan tilaamaha Cutubka 3aad ee Buugan.

2. Marka Maxkamaddu ogolaato eedaysanuhu waa ka noqon karaa dafiraada denbiga waxaana halkeedii ku bedeli karaa qiraalka denbiga marxalad kasta oo dacwadu marayso derejada 1aad ka hor xukunka Maxkamadda.

3. Xaalada caynkaas ah marka lagu jiro, tilmaamaha Waaxda III ee Cutubkan ayaa la dhawrayaa.

**Qaybta 5aad**
Culayska cadaymaha, beddelaada ama ka noqoshada eedda

**Qod. 110**
**Culayska Cadaynta**

Xaaladaha lagu sheegay:
a) xarafka a) ii) farqada 1aad ee Qodobka 108;
b) xarafka b) farqada 1 ee Qodobka 108;
c) farqada 1 ee Qodobka 109.
Xeer Ilaaliyaha Guud waxaa saaran culayska cadaymeed oo bayaaminaysa:
i) in la galay,
ii) eedaysanuhu yahay kii galay.

**Qod. 111**
**Beddelaada Eedda**

1. Marka ay Maxkamaddu, ogolaato Xeer Ilaaliyahu waa bedeli karaa xaashida eeda dhammaanteed ama qayb ka mid ah, marxalad kasta oo dhegaysiga dacwaddu marayso derejada 1aad ka hor gebagebada dacwadda.

2. Xaaladda eeda la bedelo marka la dabiqi karo, waxaa la dhawrayaa tilmaamaha Qodobka 103.

3. Haddii bedelaada eeddu ay dhacday kadib markii uu bilaabmay dhegaysiga cadaymuhu, Xeer Ilaaliyaha iyo eedaysanu waxay:
   a) dib u imtaxaami karaa, marag hore loo dhegaystay, si uu u iftiimiyo, wax ka bedelka yimi;
   b) soo bandhigi karaan cadaymo cusub oo la xidhiidha waxka bdelka yimi.

Xaaladkasta oo wax ka bedelka xaashida eedu yimaado, markasta oo edaysanuhu codsado waxaa la siinayaa waqti caqli gal ah oo uu ku diyaarsado difaaciisa.

**Qod. 112**
**Ka noqoshada eedda**

1. Marka ay Maxkamaddu ogolaato, Xeer Ilaaliyaha Guud waa ka noqon kara eedda dhamaanteed ama qayb ka mid ah, xilli kasta oo dhegaysigu marayo derejada 1aad ka hor intaan xukunka la sheegin. Halka ciqaabta ugu yare e sharcigu u dhigay denbig ay tahay mid ka badan sadex sano, ka noqoshada eeda waxaa loo baahan yahay in Xeer-ilaaliyaha guud laftiisa qoraal lagaga helo[2].

2. Xaaladaha lagu sheegay faqrada hore ee qodobkan, Maxkamaddu waxay amraysaa iyadoo sababaynaysa in lagu oodo dacwadda ka noqoshada eeda, iyadoo qaadaysa talaabooyinka looga baahan yahay Qodobka 76.

3. Amarka in dacwadda la oodo ee lagu sheegay si waafaqsan Qodobkan waxay u dhigantaa xukunka sida ku cad ujeedada faqrada 3aad ee Qodobka 13.

**Cutubka 3aad**
Cadaymaha iyo gabagabaynta

**Qod. 113**
**Qodobada la dabaqayo**

Marka aan si kale loogu sheegin cutubkan, soo bandhigida iyo dhagaysiga cadaymaha waxaa lagu maamulayaa tilmaamaha Buuggan Saddexaad ee Xeerkan.

**Qod. 114**
**Tallaabada Xeerilaaliyaha Guud**

Xaaladaha ku xusan Qodobka 110, Xeer Ilaaliyaha Guud ayaa bilaabaya dhagaysiga cadaymaha, isagoo si kooban u xusaya:
a) Dabeecadda iyo faahfaahinta eedda;
b) Cadaynta lidka ku ah eedaysanaha.
Kadib Maxkamaddu waxay dhagaysanaysaa dacwada oogidda.

**Qod. 115**
**Amarka in dacwadda loo tirtiro Cadayn La'aan**

1. Marka cadaymaha oogista la dhamaystiro Maxkamadda haddii ay u muuqato in cadaymaha la soo bandhigay aanay ku filayn in ay cadeeyaan denbiilenimadda eedaysanaha, xataa haddii ay wax cadaynayaan, marka eedaysanuhu ka codsado ama

[2] Qodobkan waxaa wax lagaga bedelay qodobka 6 aad ee Xeer L. l ee 17/02/1968.

iskeedba, iyadoo marka hore waydiinaysa Xeer-ilaaliyaha haddiiba uu rabo in uu eediisa ka noqdo si waafaqsan Qodobka 112, waxay:

a) Amraysaa, iyadoo sababaynaysa in eeddaysanaha laga tirtiro eeda denbiilenumadiisa la cadayn kari waayay;
b) Waxay kaloo amraysaa talaabooyinka loo baahan karo ee Qodobka 76.

2. Amarkan lagu sheegay Qodobkan waxa uu u dhigmaa xukun sida ku xusan ujeedada farqada 3 ee Qodobka 13.

**Qod. 116**
**Tallaabada Difaaca**

1. Marka laga reebo xaaladaha ku xusan Qodobka 115, Gudoomiyaha Maxkamaddu wuxuu ku wargelinayaa eedaysanaha inuu:
   a) Difaaciisa ku soo bandhigo cadaymo
   b) Difaaciisa hadal ahaan ku soo jeediyo:
      i) Isagoo dhaaranaya;
      ii) Isagoo aan dhaaranayn;

Si uu uga jawaabo eedda lagu soo oogay.

2. Marka tilmaamaha faqradan la buuxiyo, eeddaysanaha wuxuu si kooban u soo bandhigayaa difaaciisa isagoo sheegaya:
   a) Guud ahaan dariiqada uu isku difaacayo;
   b) Dabeecada cadaymeed ee uu soo jeedinayo in uu difaaciisa ku soo bandhigo.

Maxkamaddu waxa ay dhagaysanaysa oo baadhaysaana cadaymaha difaaceed.

3. Haddii in ka badan hal eedaysane ay jiraan, Maxkamaddu waxay habaynaysaa nidaamka uu eedaysane kastaa difaaciisa u jeedinayo.

**Qod. 117**
**Cadaymaha beeninta**

1. Haddii eeddaysanuhu soo bandhigo cadaymo aanu Xeer Ilaaliyaha Guud filayn in ay iman karaan, Maxkamadda waxay u ogolaan karta Xeer Ilaaliyaha inuu keeno caddaymo uu ku beeninayo.

2. Xaaladahan ku xusan farqada hore, eeddaysanuhu ka dib marka Xeer Ilaaliyaha Guud, soo bandhigo cadaymihiisa beeninta isaguna wuxuu keeni karaa cadaymo kale oo dheeraada ah oo difaac.

**Qod. 118**
**Caddynta maxkamaddu iskeed u dalbato**

Maxkamaddu waxay iskeed u amri kartaa, soo bandhigid cadaymeed, markay u aragto in ku haboon tahay oo waxtar u leedahay gaadhista runta.

**Qod. 119**
**Soo gabagabaynta iyo xiridda dhagaysiga**

1. Kadib marka dhammaan cadaymaha la soo badhigo:
   a) Xeer Ilaaliyaha Guud ayaa soo koobaya dacwadiisa, una samaynaya, nuqdadayntiisa iyo tusmayntiisa sida uu lamahuraan u arko, isla markaana iftiiminaya aragtidiisa faleed iyo xeereed muuqaal ay Makamaddu ogolaan karto;
   b) Marka Xeer Ilaaliyaha dhamaysto gebgebayntiisa, dhinaca difaacuna wuxuu soo koobayaa dacwadiisa, iyadoo haddii eedaysanaha ay difaacayaan hal Qareen wax ka badan, qareen kastaa wuxuu soo koobayaa doodiisa, su'aalihiisa iyo codsigiisa qaybta aanay qareenada kale ee difaac soo bandhigin.

2. Haddii ay jiraan in ka badan hal eeddaysane Maxkamaddu waxay u dejinaysaa nidaamka ay waajahayaan Maxkamadda.

3. Haddii aanay Maxkamaddu ogolaan, hadal dheeraada jeedinkaro; markuu sidaa codsao eeddaysanaha ayaa markasta weedha ugu danbaysa leh.

4. Haddii Xeer Ilaaliyaha Guud, eedaysanaha ama Qareenka difaacu ay ku xadgudbaan nidaamka looga hadlo Maxkamadda, oo ay soo dhexgeliyaan hadal dheer oo aan daruuri ahayn, kuna haboonayn ama dariiq kastoo kale, laba digniinood oo is xiga dabadood hadii ay sii wadaan, Gudoomiyaha Maxkamaddu waxa uu kala noqonayaa xaqii inuu sii wato hadal jeedinta qof kasta oo sidaasi ugu xadgudba xaqaasiba.

5. Dhagaysigu waxa loo aqoonsanayaa inuu xidhmay marka gebagebaynta Maxkamadda loo samaynayaa ay dhammaato.

**Cutubka 4aad**
Xukunka

**Qod. 120**
**U Codaynta iyo ku dhawaaqidda Xukunka**

1. Xubnaha Maxkamadda ee ka qayb galay dhagaysiga, waxay u codaynayaan si waafaqsan farqada 1 ee Qodobka 86:
   a) isla markaaba, ama
   b) sida ugu dhakhsaha badan ee suurtowda

ka dib marka uu xidho dhagaysigu.

2. Falanqaynteeda, Maxkamaddu waxay go'aaminaysaa:
   a) Su'aalaha hordhaca ah;
   b) su'aasha xaqiiqo iyo su'aasha sharci ee la xihdiidha eeda, iyo
   c) haddii lagama maarmaan tahay, su'aalaha la xidhiidha dabaqaada ciqaabta iyo tallaabooyin nabadgelyo.

3. Gudoomiyaha Maxkamaddu, ama xubin kale oo ah Maxkamadda ah, ayaa, isla markiiba ka dib falanqaynta, ka akhriyaya qaybta xukunka ah ee la xidhiidha denbiilenimadda iyo ciqaabta marka ay jiraan:
   a) Maxkamad furan,
   b) goob joog yihiin:
      i) eedaysanaha iyo
      ii) Xeer Ilaaliyaha Guud.

Haddii eedaysanuhu uu noqdo bilaa ama la saaro ciqaab ganaax oo kaliya joogitaanka Qareenkiisa oo keliya ama wakiilkiisa ayaa ku filan.

4. Akhrinta qaybta xukunka ee ku xusan farqada 3 ee qaodobkan, waxay u dhigantaa ogaysiinta xukunka dhammaan dhinacyada jooga ama la matalo.

**Qod. 121**
**Qaabka xukunka**

1. Xukunka waxa diyaarin doona Gudoomiyaha Maxkamadda si dhamaystiran, waxaanu ka koobnaan doonaa:
   a) hordhaca waxa lagu bilaabi magaca Ummadda Soomaaliyeed iyo magaca Maxkamadda ku dhawaaqday xukunka;
   b) astaamaha guud ee eedaysanaha oo faahfaahsan iyo wax kastoo kale oo lagu aqoonsan karo;
   c) soo bandhiga xaqiiqooyinka iyo duruufaha qaabeeyay mawduuca eeda;
   d) Weedh kooban oo ah xaqiiqooyinka iyo asbaabaha qaanuuneed oo xukunku ku salaysan yahay,
   e) tixraaca Qodobada sharciga ah ee uu xukunku ku salaysan yahay;
   f) ku waayid ama xukumida eedaysanaha ee eeda kasta;
   g) ciqaabta laga saaray ee/sanaha eeda denbi kasta oo lagu helay in uu denbiile ku noqday oo ay la socoto tallaabooyin nabadgelyo ee la amri karayay;s
   h) Taariikhda iyo saxeexa Gudoomiyaha Maxkamadda iyo xubnaha kale ee garsoorka ka tirsan ee kala qayb galay.

2. Xukunka wuxuu noqonayaa mid baaba'a oo aan qiime sharci lahayn:
   a) haddii aan la sababayn, ama haddii ay sababuhu iska hor imanayaan;
   b) haddii ay maqan tahay ama aanay dhamaystirayn tiirarka aasaasiga ah ee la xidhiidha su'aasha denbiilenimdda ee qaybta xukunka.

**Qod. 122**
**Denbi ku waayidda eedaysanaha**

Marka ay Maxkamaddu hesho, eedaysanahu in aanu ile ku noqon eedayntii lidka ku ahayd ee lagu oogay isaga waxay:

a) ku dhawaaqaysaa xukunka ku waayidda
b) Iyadoo amraysa tallaabo kasta oo looga baahan karo Qodobka 76.

## Qod. 123
## Xukumidda Eedaysanaha

1. Marka ay Maxkamaddu ku hesho eedaysanuhu inuu galay ga eediisa lagu oogay, Gudoomiyaha Maxkamaddu wuxuu:
   a) Maxkamadda oo furan ka sheegayaa qaabka ku xusan faqrada 3aad ee Qod. 120, in eedaysaanha denbiga lagu helay;
   b) Waydiinayaa Xeer Ilaaliyaha Guud inuu eedaysanaha u hayo wax xukumo ah oo hore loogu diiwaan galiyay.

2. Haddii ay jiraan xukumo hore loogu diiwaan geliyay eedaysanaha, Xeer Ilaaliyaha Guud wuxuu caddaynayaa xukunadaasi eedaysanuhuna wuu ka doodi karaa in aanay sax ahayn kuwaasi.

3. Maxkamaddu markaasi ka dib waxa ay:
   a) Ku dhawaaqaysaa ciqaabta, marka laga reebo xaaladaha ku xusan Qodobka 126;
   b) Amaraysaa dabaqaada talaabooyinka amaan ee xaaladaha ku xusan Xeerka Ciqaabta;
   c) Go'aaminaysaa siinta maslaxad kasta oo uu sheegayo Qodobada 125 iyo 127;
   d) samaynaysaa amar kasta oo kale oo loo baahan karo;

4. Gudoomiyaha Maxkamaddu wuxuu;
   a) U akhriyayaa xukunka qaabka uu dhigayo farqada 3 ee Qodobka 120, iyo
   b) Ku wargelinaa qofka la xukumay in uu xaq u leeyahay in uu rafcaan ka qaadan karo xukunka lidka ku ah.

## Qod. 124
## Xidhiidhka u dhexeeya xukunka iyo eedda

1. Maxkamaddu waxay xaqiiqooyin isku mid ah ku heli kartaa eedaysaha denbiile denbi ka duwan kii xaashida eeda ku xusnaa, taasoo ciqaabteedii la socoto, xataa haddii ciqaabtaasi ka badan tahay ciqaabtii eeda denbigii hore, iyo tallaabooyinkii nabadgalyo ee la saarayo, marka ay ikhtisaas u leedahay ee ga eedaysanuhu ku noqday ilaha. Haddii kale Maxkamaddu waxay u wadi doontaa si waafaqsan tilmaamaha faqrada c) xarafka (i) ee Qod.106.

2. Marka dacwad dhegaysiga dhexdeeda la helo in denbiga lagu helay eedaysanaha uu ka duwan yahay kii markii hore lagu eedeeyay haddii:
   a) Denbiga lagu eedeeyay uu ka koobnaa tiro falal ama fal la'aan ah iyo
   b) Mid ama ka badan falalkaa ama fal la'aantaas ay dhisayaan denbi ka yar ama keliya isku dayga denbiga lagu eedeeyay oo keliya iyo
   c) Denbiyada lagu helay in uu galay uu ka yaraa ama isku dayga ahaa aanu xataa ku jirin.

3. Marka laga reebo xaaladaha ku xusan faqrada hore, marka ay cadaato in denbiga eedaysana lagu helay in uu galay uu ka duwan yahay denbigii lagu eedeeyay Maxkamaddu:

a) Haddii Maxkamaddu ay ikhtisaas u leedahay waxay:

    i. Amraysaa xeer-ilaalinta in ay soo bedesho eedeeda
    ii. Amraysaa in dib loo dhegaysto ilaa xadka ay tahay in aan lagu xadgudbayn xuquuqda eedaysanaha, iyadoo siinaysa eedaysanaha markasta oo uu dalbado waqti macquula oo uu difaaciisa ku diyaarsado.

b) Haddii kale waxay dacwada u dhegaysanaysaa si waafaqsan faqrada (c) xarafka (i) ee Qod. 106.

**Qod. 125**
**Ganaax halkii xadhigga**

1. Marka ay Maxkamaddu ku hesho eedaysanaha denbi lagu galay kama' oo saartay ciqaab aan ka badnayn hal sano, ganaax ha la socdo ama yaanu la socone, sida waafaqsan tilmaamaha faqradaha 3 & 4 ee Qod. 109 XCG, iyadoo maanka ku haysa duruufaha lagu sheegay Qod. 110 XCG, waxay amri kartaa in xadhiga loogu bedelo ganaax u dhigma, oo lagu bedelayo isu dhignaanshaha ku xusan Qod. 112 XCG.

2. Maslaxada lagu sheegay faqrada hore ee Qodobkan waxaa la adeegsan karaa marka uu eedaysanuhu sidaa codsado ka hor xukunka ciqaabeed ee Maxkamadda sida ku xusan faqrada 3 ee Qod. 123.

3. Maxkamaddu way ka noqon kartaa isku bedelka, haddii qofka xukumani waqtiga ay dejisay dhexdeeda:
    a) Ku guuldaraysto in uu bixiyo ganaaxii
    b) Ku guuldaraysto in guto masuuliyadii madani ee dhibanaha ee ka dhashay denbiga.

**Qod. 126**
**Cafis garsoor**

1. Haddii yada ay galeen dad:
    a) ka yar da'da 18 sano, ama
    b) ka wayn da'da 70 sano,

Marka sharcigu denbiga u jidaynayo ciqaabta ugu badan 3 sano, oo ay la socoto ama aanay la socon ganaax, ama ciqaab ka culays yar, Maxkamaddu waxay, si waafaqsan qaybaha Qodobka 147 ee Xeerka Ciqaabta:

    i) kadib marka uu noqdo qofka la xukumay ile, ka joojinaysaa ciqaabta;
    ii) Ku dhawaaqaysaa in g ku dhammaaday cafis garsoor.

Marka loo tixgeliyo duruufaha uu jideeyay Qod.110 ee Xeerka Ciqaabta, in aan eedaysanuhu denbi kale gelayn

2. Cafis garsoor lama bixin karo in ka badan hal mar.

**Qod. 127**
**Laalista ciqaabta**

1. Marka lagu dhawaaqo ciqaabta:
   a) xadhig mudadiisu aanay ka badnayn 6 bilood, ama
   b) ganaax uu la socdo ama aanu la socon xadhig, iyadoo lagu salaynayo isku badalka qiimaha uu sheegayo Qodobka 112 ee Xeerka Ciqaabta, oo uu u dhigmaya mudada xadhiga aan ka badnayn 6 bilood, Xukunkaas oo lid ku ah eedaysane aan caadayste ahayn, Maxkamaddu waxay amraysaa, si waafaqsan Qodobka 150 ee Xeerka Ciqaabta, in fulinta ciqaabtaasi la laalo mudo dhan 5 sanadood, iyadoo loo tixgaliyo in aanu qofkaasi denbi kale gelayn sida waafaqsan tilmaamaha Qodobka 110 ee Xeerka Ciqaabta.

2. Laalista ciqaabta waa laga noqon karaa marka uu ruuxa xukumani:
   a) uu muddo 5 sanadood gudahooda ku galo:
      i) dembi, ama
      ii) sharci khilaafid la nooc ah tii lagu xukumay, ama

   b) ku guul daraysto mudadii ay Maxkamaddu u cayintay in uu ku oofiyo waajibaadyadii madani ee ka dhashay denbiga lagu xukumay ka soo gaadhay dhibanaha.

3. Ciqaabtu waa dhammaanaysaa haddii, mudada lagu xusay farqada hore dhexdeeda, aanay ka noqosho iman.

**Qod. 128**
**Nidaam guud oo la xidhiidha cafiska garsoorka iyo laalista ciqaab**

Marka cafis garsoor lagu bixiyo si waafaqsan Qod. 126, ama laalista ciqaabta lagu ansixiyo si waafaqsan Qod. 127, Maxkamaddu waxay amri kartaa in ruuxa xukuman:
   a) uu sameeyo shaqo loo dajiyay;
   b) la marsiiyo daawayn caafimaadka ah ama cudurrada masakaxda ah;
   c) uu caadi ahaab uga kawaantoobo meelo khaas ah ama la socoshada dad gaar ah;
   d) aanu qaadan hub ama walxo kale oo khatar ah.

**Cutubka 4aad -A**
Garsoorka Habraaca Kooban

**Qod. 128-A**
**Ku wareejin Garsoorayaasha Awood Garsoorid Habraac Kooban**

Ayada oo aan waxba loo dhimeyn wixii ku jideysan Xeerkaan ama sharciyo kale, dhammaan Garsoorayaalka Gobollada iyo Garsoorayaalka Degmooyinka uu magacaabay Gudoomiyaha Maxkamadda Sare kadib soojeedin Gudoomiyaha Maxkamadda Gobolka, gudashada hawlahooda caadiga ah ka sakow, waxay awood u leeyihiin in ay ku galaan si habraac kooban ah dacwadaha faldembiyeedyada ku tilmaaman Qodobka 128B, si waafaqsan habraaca ku jideysan Qodobka 128C.

**Qod. 128-B**
**Dembiyada Lagu Garsoori Karo Habraaca Kooban**

Si ka duwan sida ku jideysan Xeerkaan, waxaa lagu garsoori karaa habraac kooban faldembiyeedyada soo socda:

a) Qod. 313 Aflagaado Diinta Qaranka
b) Qod. 314 Carqaladeyn Cibaado Diimeed
c) Qod. 315 Faldembiyeedyada Lidka ku ah Diimaha Fasaxan
d) Qod. 439 Jirdil
e) Qod.440 Qof waxyeelayn, haddii falka ay ka timaado jiro ama naafo ka hor istaageysa qofka dhibban in uu hawlihiisa shaqo si caadi u guto muddo ka badan toban maalmood.
f) Qod. 451 Aflagaadeyn
g) Qod. 470 Ku Xadgudbid Hoy
h) Qod. 480 iyo 481 Xatooyo
i) Qod. 496 Khayaano
j) Qod. 502 La wareegid xoolo dadow
k) Qod. 504 Ka Ganacsi wax la soo xaday marka lacagta ama qiimaha shayga faldambiyeedka uusan ka badneyn Sh.So 200.
l) Faldembiyeedyo kale si waafaqsan Xeerka Ciqaabta ama sharciyo kale, aan lagu ciqaabi Karin xukun dil ama xukun xabsiyeed aan ka badneyn muddo lix bilood ah.
m) Qulqulatayn ku kicid ama isku day ku kicid faldembiyeedyada kor ku xusan.

**Qod. 128-C**
**Habraaca Garsoorka Habraaca Kooban**

1. Garsoorka habraaca kooban waxaa loo marayaa isla habraaca loo maro habraacyada kale si waafaqsan Xeerkaan, farqiguna yahay keliya in Garsooraha aysan waajib ku ahayn in uu dejiyo gundhig qoraal tafaftiran ee dacwada laakiin waa in uu geliyo galka qoraalada dacwada macluumaadka soo socda:

a) Lambarka galka
b) Taariikhda faldembiyeedku dhacay
c) Taariikhda cabashada
d) Magaca dhinaca dhibanaha
e) Magaca eedeysanaha
f) Faldembiyeedka cabashada laga soo gudbiyey iyo midka baarista lagu hubsadey; iyo, marka ay tahay xaaladaha ku xusan xarfaha (h)(i)(j) iyo (k) ee Qodobka 128B, qiimaha shayga uu faldembiyeedku la xiriiro
g) Hadalka eedeysanaha
h) Gunaanadka iyo, haddii eedeysanaha loo aqoonsaday dembiile, warbixin koobeysa sababta dembiilinimada
i) Xukunka ama go'aanka kama dambeysta ah
j) Taariikhda dacwada la gebogabeeyey.

2. Haddii inta uu socdo garsoorka habraaca kooban ay ula ekaato Garsooraha in dacwada mid nooceedu uusan ku habooneyn habraaca kooban, Garsooraha haddii

ay uu awood u leeyahay in uu dacwada ku galo habraaca aan ahayn mid ka kooban, waa in uu ugu yeero dhageysi cusub markhaatiyaashii horey loo dhageystay dacwadana dood cusub u furo si waafaqsan habraaca ku tilmaaman Xeerkaan.

Haddiise, Garsooraha garsoorka habraaca kooban uusan awood u lahayn gelida dacwada, wuxuu u tilmaamayaa Xeer Ilaaliyaha in uu dacwada horgeeya Garsooraha awoodda u leh.

3. Haddii go'aan xukun dhaco si waafaqsan qawaaniinta Cutubkaan, lama go'aamin karo xukun xabsi ka badan seddex bilood ama xukun ganaax lacageed ka badan Sh.So 300.
4. Ayada oo aan waxba loo dhimeyn qawaaniinta Xeerkaan, looma ogola in uu racfaan ka qaato qofka lagu xukumey garsoorka habraaca kooban, haddii xukunka lagu riday uu yahay keliya ganaax lacageed.

## CUTUBKA 4aad-B

Maxkamadeyn qof baxsad ah

### Qod. 128-D
### Ogeysiis la mariyey naadin guud marxalado khaas ah

1. Haddii la bixiyey amar soo qabasho si waafaqsan Xeerkaan oo aysan suuragal aheyn in la gaarsiiyo eedeysanaha sabatoo ah in uu baxsad yahay ama uu dhuumanaayo, ama haddii faldembiyeed ka dhac meel ka baxsan dhulka Jamhuuriyadda Soomaaliya sida ku jideysan Qodobada 7 iyo 8 ee Xeerka Ciqaabta, Maxkamadda awoodda u leh, kadib codsiga Xeer Ilaaliyaha Guud, waxay soosaari kartaa naadin guud ay ku amreysaa eedeysanaha hor imaatin.
2. Naadinta hor imaatinka kor ku xusan waa in ay ku sugnaato:
   a) Magaca eedeysanaha;
   b) Taariikh, meesha iyo nooca faldembiyeedka lagu eedeeyey;
   c) Taariikhda, saacadda iyo meesha eedeysanuhu hor imaanaayo.

   Waana in muddada hor imaatinka aysan ka yaraan soddon maalin laga bilaabo maalinta la baahiyey naadinta.

### Qod. 128-E
### Faafinta naadinta

1. Naadinta ku xusan qodobka hore waa in loo faafiyo sida soo socota:
   a) Ku baahin raadiyow, ugu yaraan labo mar, oo raadiyaha Qaranka ah, iyo ku soo saarid labo caddadi isxiga oo wargeys deegaanka ah;
   b) Ku dhajin xarunta Maxkamadda iyo meel muuqan karta oo ka mid ah hoyga uu eedeysanahu inta badan ku nool yahay ama uu ku noolaa markii u dambeysay.
2. Caddeynta qoraalka ah ee Maxkamadda bixisay naadinta oo xaqiijineysa in naadinta lagu faafiyey sida waajibka ah maalin cayiman, waxay caddeyn kama dambeys ah u tahay in la raacey sida ku jideysan qodobka wixii la xiriira faafinta.

**Qod. 128-F**
**Xukun eedaysanaha baxsadka ah**

1. Dacwadaha faldembiyada lagu galay dhulka Soomaaliya ama muwaadin Soomaaliyeed ugu gaystay muwaadin kale oo Soomaaliyeed, meel kasta oo ka baxsan dhulka Jamhuuriyadda

Soomaalia, haddii qofka ogeysiiska naadinta loo gudbiyay ku hor imaan waayo dhageysiga wakhtiga iyo taariikhda loo cayimay, waxaa qofkaas lagu maxkamedeyn karaa si eedeysane baxsad ah, si kasta oo ku tilmaaman Xeerkaan ama sharciyo kale.

2. Maxkamadda bixisay naadinta waxay dejinta kartaa, kadib codsiga Xeer Ilaaliyaha Guud, taariikhda bilowga doodda dacwada kadib marka ay dhammaatay muddada naadinta, isla taariikhdaasna waxay dhaqaajin kartaa garsooridda waxayna, kadib marka ay dhageystato markhaatiyada, soo saareysaa go’aanka waxayna, haddii ay xukuntay eedeysanaha, ku qaadeysaa ciqaabta sida sharcigu qabo.
3. Garsoorku waa in uu ku dhaco si waafaqsan qawaaniinta Xeerkaan. Haddii uu maqan yahay eedeysanaha qawaaniinta Xeerkaan waxaa loo fasirayaa hab ay suuragelinayaan maxkamadeyn qof baxsad ah.
4. Markasta oo maxkamedyn qof baxsad ah Maxkamaddu waxay daraf qor ku tilmaameysaa haddii eedeysanuhu sameeyey “qiraal dembi la’aan”.

**Qod. 128-G**
**Ku dhawaaqidda xukunka**

1. Haddii eedeysanaha la maxkamadeeyey asagoo baxsad ah si waafaqsan qawaaniinta qodobka hore, lagu caddeeyo in uu galay faldembiyeedku lagu eedeeyey lana xukumo, go’aanka xukunkiisa waa in lagu soo saaro ogeysiin naadin guud qaabka ku tilmaaman qodobka 128-E. Eedeysanuhu waa isa soo xaadirin karaa wuxuuna racfaan ka qaadan karaa xukunka muddada sharcigu cayimay gudaheeda, kana bilaabaneysa marka la faafiyey naadinta guud. Haddii eedeysanuhu uusan isa soo xaadirin, racfaanna qaadan waayo wakhtiga kor ku cayiman, xuquuqdiisa racfaanka waa baaba’aysaa.
2. Go’aanka xukunka lagu soosaray maxkamadeynta qof baxsad ah, wuxuu jiraayaa inta uu maqan yahay xukumanaha waxaana la fulin karaa markasta oo laga qabto meel dhulka Somaliya ka mid ah.
3. Wixii ku jideysan qawaaniinta Cutubkaan waxba uma dhimeyso xuquuqda uu qof kastaa u leeyahay in uu codsado dib u eegista go’aanka xukunka si waafaqsan Cutubka 1V Qaybta I ee Buugga Afraad ee Xeerkaan.

**Qod. 128-H**
**Xaraashka hanti uu leeyahay eedeysanaha naadinta ku tilmaaman**

1. Maxkamadda bixisa naadin guud si waafaqsan qodobka 128-D waxay awooddaa in ay, isla markaas ama wakhti xiga, go’aamiso xaraashka hantida ku sugan deegaanka ay ka hawlgasho, ee uu leeyahay eedeysanaha ku tilmaaman naadinta, ama haddii hantida ay ku sugan tahay meel ka baxsan hawlgalkeeda, waxay Maxkamaddu bixin kartaa amar xaraashid waxay u gudbineysaa Maxkamadda

Racfaanka ee ka hawlgasha deegaanka hantida eedeysanuhu taalo ayadoo codsaneysa ogolaansho fulin amarka xaraashka, kaas oo ay Maxkamadda Racfaanku ikhtiyaar u leedahay in ay ogolaato si waafaqsan qodobkaan.

2. Haddii hantida kor xusan ay tahay xoolo nool iyo alaab kale degdeg dabiici ahaan ku hallaabeysa, Maxkamaddu, haddii ay la ahaato, waxay amreysaa in la iibiyo, isla markaasna wixii ka soo baxa lagu maamulo si waafaqsan amarka Maxkamadda.
3. Haddii eedeysanaha ku tilmaaman naadintaa uusan ku hor imaanin Maxkamadda wakhtiga ku cayiman naadinta, hantidiisa lagu xaraashay si waafaqsan qodobkaan waxaa hantiyaaya Dawladda oo u isticmaaleysa si qayb ka mid ah dakhliga guud ee Dawladda waxayna ugu magdhabeysaa qof kasta oo dhibaato ka soo gaartey faldembiyeedka uu geystay eedeysanaha naadinta ku tilmaaman. Haddii magdhawga noocaasi uu waajibey, Xoghayaha Arrimaha Gudaha ayaa go'aaminaaya caddadka asagoo amraaya cidda ay tahay in la siiyo.
4. Haddii muddo sannad gudihiisa laga bilaabo taariikhda xaraashka hantida, qofka hantidiisa ay hayso ama hayn jirtay Dawladda, uu si ikhtiyaar ah isku soo xaadiriyo ama la soo qabto oo la horgeeyo Maxkamaddii bixisay amarka xaraakhka, uuna caddeeyo in uusan baxsan ama uusan isqarin si uu uga dhuunto fulinta amarka soo qabashada loo gooyey, caddeeyana in uusan ogeyn naadinta, Maxkamaddu waxay amri kartaa in loo celiyo hantidiisaas ama qiimaheeda, oo laga jaray kharashaadkii dacwada iyo xaraashka.

## Cutubka 5aad

Habraacayada la maro xilliga dhegaysiga maxkamadda

### Qod. 129
### Dacwadaha maxkamaddu markiiba qaadayso

1. Marka, wakhtiga dhagaysiga, qof ku galo kuwa qaranku oogo ah, oo uu sharciguna u jideeyay ciqaab xadhig, ama ciqaab culus, Gudoomiyaha Maxkamaddu wuxuu:
   a) waxay sababayaa in dhacdada ga la diiwaangeliyo,
   b) amar ku bixinayaa in isla markiiba la xidho ilaha.

2. Haddii:
   a) ciqaabta uu u jidaynayo sharcigu ga la galay wakhtigii dhagaysiga aanu ahayn awooda garsoor ee Maxkamadda, iyo
   b) Maxkamaddaasi hadday tahay qaybta Ciqaabta ee Maxkamadda Degmada ama qaybta ciqaabta caadiga ah ee Maxkamadda Gobolka.

Xeer Ilaaliyaha Guud waxa uu isla markiiba isku dubaridayaa eedaynta waxaanu u gudbinayaa Maxkamadda, Maxkamaddu, waxa ay joojinaysa dhegaysigii dacwadii socotay ama kadib isla markiiba soo saarista xukunka dacwadii socotay, waxay bilaabaysaa dhagaysiga ga, cusub.
Haddii kale, Xeer Ilaaliyaha Guud waxa uu u gudagelayaa si waafaqsan qaybaha xarafka a) farqada 1aad ee Qodobka 70.

## Cutubka 6aad
Go'aanka codsiga dhinaca dhibbanaha

### Qod. 130
### Ogolaanshaha tabashada dhinaca dhibbanaha

1. Marka eedaysanaha lagu helo si waafaqsan Qodobka 123, Maxkamaddu haddii dhinaca dhibanuhu waydiisto khasaaraha madani oo lid ku ah eedaysanaha si waafaqsan farqadaha 2 iyo 3 ee Qodobka 14, waxay go'aan ka gaadhaysaa tabashada, haddii kale waxay ku dhawaaqaysaa in aanla aqbalin tabashadaa si waafaqsan farqadaha soo socda.

2. Tabashada dhibbanaha ee khasaaraha madani waxaa lagu dhawaaqayaa in uu yahay mid aan la aqbali karin haddii:
   a) Tabashada:
      i) aan loo samayn si waafaqsan shuruudaha farqada 3 ee Qodobka 14,
      ii) uu sameeyay ruux aan awood qaanuuni ah u haysan si waafaqsan xeerka madaniga;
      iii) ay lid ku noqoto qof, aan masuuliyad madani xambaari karin;
   b) Dhibanahu:
      i) uu ka bilaabay dacwad madani ah Maxkamad madani ah oo uu ka dalbanayo in la siiyo magdhawgii kkasaarihii uu ku keenay gu;
      ii) uu kala heshiiyay eedaysanaha waxii la xidhiidhay magdhowga;
   c) xadiga magdhowga uu ku doodayo ama sheeganayo ay ka badan tahay ikhtisaaska qaybta madaniga ee Maxkamadda dacwada lagu qaaday;
   d) dalabka madani aan si buuxda looga go'aan qaadan Karin isagoo u baahan cadaymo cusub ama sababo kale.

Marka ay jiraan xaaladaha sidaas ahi Maxkamaddu waxay ku dhawaaqaysaa in magdhowyada aan la ogolaanayn, waxayna u soo jeedinaysaa dhibanaha in uu dacwad madani ah ka furto Maxkamad madani ah.

### Qod. 131
### Go'aanka maxkamadda ee ku saabsan magdhowyada

1. Maxkamaddu marka ay tixgaliso caddaynta dhinaca dhibbanaha iyo eedaysanaha ee khusaysa sheegashada ama dalabka magdhowga, waxay markaasi kadib guda galaysaa in ay xukun ka soo saarto arrintaasi (120, 220).

2. Haddii aanu sharcigu si kale u sheegin, qaybaha Xeerka Madaniga, ee uu ku jira kuwa ka qaybta fulinta ayaa la dabaqayaa, ilaa iyo xadka lagu dhaqmi karo.

**Cutubka 6aad-A**

Tallaabooyin la xiriira hantida

**Qaybta 1aad**

Tallaabooyin la xiriira hantida guurta

**Qod. 131-A**

**Amarbixin ilaalinta iyo go'aan ka gaarista alaab guurta oo la dayacay ama lala wareegay.**

1. Haddii shay guura, oo lagu helay marxallad abuuri karta shaki in faldembiyeed lagu kacay, ama la la wareegay si waafaqsan Xeerkaan ama sharciyo kale, la horkeeno Maxkamadda, waxay awooddaa Maxkamaddu, ayada oo aan waxba loo dhimeyn qawaaniinta sharci kasta oo kale, in ay amarto la siiyo shaygaas qofka xaqa u leh ama leh xuquuqda haysashada ama, haddii aysan suuragal ahayn in la aqoonsado qofkaas, ilaalinta iyo keenista shaygaas.
2. Haddii qofka xaqa u leh shayga la yaqaano, Hay'adda Garsoorka waxay amri kartaa in shaygaas lagu siiyo qofkaas shuruudaha ay markaas la ahaato. Haddii aan qofka la aqoonin, Hay'adda Garsoorka waa ay hayn kartaa shaygaas, markaasna waxay bixineysaa naadin guud, waxay tilmaamaysaa walxaha uu shaygaasi ka sameysan yahay waxayna ugu baaqeysaa qof kasta oo ku leh xuquuq sheegasho shaygaas in ay hor yimaadaan Maxkamadda kuna soo gudbiyaan codsigooda muddo lix bilood gudahood laga bilaabo taariikhda naadinta.
3. Haddii muddada kor ku cayiman aan la soo gudbin wax cabasho sheegasho shayga ah iyo haddii qofkii shayga haystay markii lagala wareegay uusan cadeyn Karin in uu si sharci ah ku haystay shayga, gacanyta Dawladda ayaa shaygu ku sugnaanayaa.
4. Haddii aan la aqoon qofka leh xuquuqda haysashada shayga ama uu maqan yahay oo hantidana tahay xoolo nool si dabiici ah degdeg ugu halaabaaya, Maxkamaddu waxay markasta amri kartaa in lagu iibiyo xaraash guud, lacagta ka soo xarootana, oo laga reebay kharashaadka, lagu dhaqo, sidii ay suuragal u tahay, qawaaniinta faqradaha hore ee qodobkaan.

**Qod. 131-B**

**Amarbixin ilaalinta iyo go'aan ka gaarista hantida guurta inta Maxkamdeyntu socoto**

Haddii shay hanti guurta oo ay caddahay in faldembiyeed lagu galay ama ay caddahay in faldembiyeed loo isticmaaley la horkeeno Maxkamadda ayadoo dacwaddu socoto, Maxkamaddu, ayada oo aan waxba loo dhimeyn wixii qawaaniin ah oo kale, waxay amri kartaa, haddii sidaasi ay la ahaato munaasib, in shaygaas sida ugu haboon loo xafido ilaa inta Maxkamadda la soo gebagebaynaayo, isla sidaas, hantidu tahay xoolosi dabiici ah degdeg ugu halaabaya, Maxkamaddu, kadib markii ay hadal qoraal ka sameyso tallaabooyinka ay la ahaado muhiim, waxay amri kartaa in lagu iibiyo si xaraash guud ah.

**Qod. 131-C**

**Amarbixin go'aan ka gaarista hanti guurta gebogebada Maxkamadda**

1. Marka laga reebo wixii ku tilmaaman qodobka 183 ee Xeerka Ciqaabta iyo sharciyo kale, Maxkamaddu gebogebada dacwada waxay bixin kartaa amar, haddii sidaas ay la ahaato, la xiriira go'aan ka gaarista hantida guurta ee Maxkamadda la horkeenay amah ore loo xafiday taasoo ay caddaatey in faldembiyeed lagu galey ama loo istcmaaley faldembiyeed.
2. Haddii amarkaas ay bixisay Maxkamad darajo sare oo aan awoodin in ay shayga si fudud ugu celiso qofka iska leh ,ayadoo isticmaaleysaa gaarsiiyayaasheeda, Maxkamaddaasi waxay go'aamin kartaa in amarkaas ay fuliso Maxkamad darajo hoose.
3. Haddii amarbixinta qodobkaan ku jideysan laga bixiyey dacwad racfaan laga qaatey, amarkaas (haddii uusan la xiriirin xoolo nool si dabiici ah degdeg ugu hallaabi kara), lama fulin karo ilaa uu ka dhacaayo muddada racfaanka la qaadan karo, ama haddii racfaanka la soo gudbiyey inta isla racfaankaas go'aan laga gaaraayo.
4. Qodobkaan, erayga "shay", markii ay tahay shay ay caddaatey faldembiyeed lagu galay, waxaa soo gelaaya ma ahan keliya wixii uu shaygu asal ahaa markii uu haystay ama kontorool ku lahaa dhinac ka mid ah dhinacyada dacwada, balse sidoo kale wixii shaygaas lagu wareejiyey ama lagu doorsaday, iyo wixii kale laga iibiyey isla markaas ama yeysan ahaane, kadi wareejintaas ama doorsashadaas.

**Qod. 131-D**
**Baabi'inta alaab faxshar ah, dhaleeco ah ama waxyaabo kale**

Maxkamaddu waxay amri kartaa, kadib marka ay xukun ku dhawaaqdo, baabi'inta dhammaan nuqullada alaabta faxsharka ama dhaleecada ah, cuntada iyo cabitaanka iyo wixii kale ee la barxay, laga been abuuray ama waxyeello leh walxaha daawada laga sameeyo ama daawooyin halaabay ama aan sidii la rabay ahayn ama walxaha maandooriyaha ah kuwaas oo la xiriira xukunka Maxkamadduna hayso.

**Qod. 131-E**
**U celinta iibsadaha daacadda ah lacagta laga helay eedeysanaha**

Haddii qof lag xukumay faldembiyeed u dhigma xatooyo am aka ganacsiga alaab la soo xaday, ayna caddaatey in dad kale iibsadeen alaabta la soo xaday, ayaga oo aan ogeyn ama aysan jirin sabab ay u tuhmaan asalka xatooyo, oo eedeysanaha markii la soo xiray lagala wareegay lacagtii uu watay, Maxkamaddu waxay amri kartaa, kadib cosiga iibsadaha alaabta la soo xaday, in lacagtaas la soo bixiyo oo loo shubo iibsadaha, in aan ka badneyn qiimaha uu bixiyey.

**Qaybta 2aad**
Dib u celin hanti ma guurto ah

**Qod. 131-F**
**Awoodda u celinta haysashada hanti ma guurto ah**
1. Marka la xukmiyo faldembiyeed xoog ku maquunin sharcidarro ah la socotay, haddii ay Maxkamadda u caddahay ku maquuninta darteed qof looga qaatey haysashada hanti ma guurto ah, Maxkamaddu waxay amri kartaa, haddii ay sidaas la ahaato, u celinta haysashada.

2. Amarka u celinta haysashada waxba uma dhimaayo xuquuqdii iyo danihii hantidaas ma guurtada oo qofkaas ku caddeysto dacwad madani ah.

## Cutubka 7aad
Qaybaha ugu dambeeya

### Qod. 132
### Diiwaanka dhagaysiga

1. Gudoomiyaha Maxkamaddu wuxuu habayn doonaa diyaarinta diiwaan dhamaystiran oo ah dhagaysi kasta, haddii ay suurtowdo waa in lahelaaqoraa gacan fudud, diiwaankaasi wuxuu ka koobnaaan doonaa:
   a) Goobta, sanadka, bisha, maalinta dhagaysiga la sameeyay, iyo wakhtiga uu furmay iyo kuu xidhmay dhagaysigu, iyo tixraac kasta oo la joojiyay dhagaysiga iyo wakhtiga dib loo ambaqaadayo.
   b) magacyada xubnaha Maxkamadda;
   c) astaamaha faahfaahsan ee eedaysanaha iyo wax kasta oo kale oo lagu aqoonsan karo isaga; astaamaha guud ee dhinaca dhibanaha; magaca wakiilka Xeer Ilaaliyaha Guud iyo magacyada dhamaan wakiilada iyo Qareenada kale;
   d) astaamaha faahfaahsan ee maragyada iyo turjumaanada iyo tixraacyada ay ku dhaaranayaan;
   e) awaamiirta iyo go’aanada Maxkamadda iyo asbaabtoodaba;
   f) diidmooyinka, codsiyada iyo dalabaadka ay sameeyaan dhinacyadu;
   g) faahfaahinta marag muujimaha loo soo bandhigay Maxkamadda.
   h) qoraalada cadaymihii eedaysanuhu sameeyay;
   i) qoraalada cadaymihii maragyadu sameeyeen;
   j) diiwaan gelinta shay kata oo kale oo uu si khaas ah u xusay sharcigu, ama wax kasta oo gudoomiyaha Maxkamaddu kadib markay codsadeen dhinacyada midkood ama soo jeedinta Maxkamadda, la amray in lagu daro.

### Qod. 133
### Galka dacwada ee maxkamadda

Garmaqal kasta, kaaliyuhu waxa inuu dhamaystirayaa galka dacwada Maxkamadda oo ka kooban dhamaan nuqulada asliga ah ee hoos ku xusan isagoo u habaynaya nidaamka ay taariikhdoodu u kala horaysay:
   a) Amarkasta oo qabasho, amar, xukun ama talaabo kasta oo loo qaado eedaysanaha, dhinacyada kale, dammiintayaasha iyo maragyada;
   b) eedda iyo wax ka bedel kasta oo lagu sameeyay;
   c) diiwaan galinta dhagaysiyada;
   d) diiwaan galinta dhamaan mudaymaha, oo ay ka muuqato mudadooda iyo sababaha loo sameeyay;
   e) cadaynta in eedaysanaha lagu wargeliyay xaqa uu u leeyahay rafcaan;
   f) diiwaan galinta go’aanada Maxkamadda ee la xidhiidha dalab kasta oo ku saabsan khasaarayaashii soo gaadhay dhinaca dhibanaha;
   g) Qoraal kasta oo racfaan laga qaadan karo iyo asbaabtiisa

**Qod. 134**
**Nuqullada xukunka iyo galka dacwada maxkamadda**

1. Marka uu codsado eedaysanuhu, nuqulka xukunka waa la siinayaa isaga iyadoo aan lagu samayn wax dib u dhac ah waana lacag la'aan.

2. Nuqulka dhamayskatiran ee galka dacwada Maxkamadda waxaa lagu siinayaa eedaysanaha bixinta qiimeyaasha iyo fiiyada uu goyay qaraarka Wasiirka Garsoorka iyo Cadaaladda, iyadoo Maxkamaddii dacwada dhegaysatay ama Maxkamad ka saraysaa ay amri karto in dhamaan nuqulka galka dacwada Maxkamadda lagu siiyo eedaysanaha lacag la'aan haddii Maxkamadu tixgeliso in sidaasi ay lagama maarmaan u tahay rafcaankiisa.

## BUUGGA SADDEXAAD
Caddaymaha

## CINWAANKA 1AAD
Qiimagalnimada caddaymaha

### Cutubka 1aad
Guud ahaan qiimo-galnimada cadaymaha

**Qod. 135**
**Xaqiiqada dhacdada iyo cadaymaha qiimagalka ah**

1. Cadaymaha waxaa lagu soo bandhigi karaa dhegaysiga dacwad kasta oo ciqaaba, jiritaanka ama jiritaan la'aanta:
   a) Xaqiijinta dhacdada muranka; iyo
   b) Dhacda kasta oo sharcigu cadeeyay in qiimo-gal yihiin iyo kuwa kale;

2. Ujeedada xeerkan haddii aanu si kale u sheegin:
   a) Weedha (xaqiiqada dhacdada) waxa loola jeedaa xaqiiqo kasta oo lafteedu ama ku xidhnaanshaha xaqiiqooyin kale, jiritaankeeda ama jiritaan la'aanteeda, dabeecadeeda ama xadkeeda xaqiijinaysa jirtitaan ama jiritaan la'aan arrin lagama maarmaan ah;
   b) Weedha (xaqiiqo qiimo-gal ah) waxa ku jiraya xaqiiq kasta oo lagu cadayn karo dacwada.

**Qod. 136**
**Xaqiiqooyin qiimagal ah oo dhinac ka dhisaya dhacdo isku mid ah**

Xaqiiqooyin aan loo arkayn mawduuca muranka, ee si kale ugu xidhan xaqiiqda muranka, si ay qayb ahaan u wada dhisaan dhacdo isku mid ah, waxay noqonayaan

xaqiiqo qiimo-gal ah, ha muuqdaan waqtiyo iyo gobo isku mid ah ama waqtiyo ama gobo kala duwane.

### Qod. 137
### Xaqiiqyooyinka marmar qiimo-gal u noqda dhacdada muranka

Xaqiiqooyinka:

a) marmar sababa ama saameeya, markiiba ama si kaleba, xaqiiqooyin qiimo-gala ama ku saabsan dhacdada; ama
b) dhisa xusida walxo siday u dhaceen, ama
c) soo bandhiga fursada dhicitaankooda ama macaamilkooda, ama waxyaabo dhab ah.

### Qod. 138
### Asbaabta keenta, Diyaargarawga iyo dhaqanka hore iyo kuwa ku xigaya

Xaqiiqo kastaa waa qiimo-gal marka ay:

a) muujinayso ama dhisayso sababta kicisay ama diyaargaraw xaqiiqo dhacdada ah ama xaqiiqo ku saabsan mawduuca dacwada;
b) dhaqan kasta oo ka horeeyay ama ka danbeeyay denbiga, marka laga tago hadal qoraal kasta oo uu sameeyay qof ku eedaysan dacwad denbi ah, haddii dhaqankaasi uu saameeyay ama saamaynayo xaqiiqa kasta oo dhacdada ah ama xaqiiqo qiimo gal ah ama
c) hadal qoraal kasta oo loo sameeyay goob-joognimada ama dhegaysiga qofka sameeyay dhaqan qiimo-gal ah sida qodobkani dhigayo, haddii hadalku dhaqankaa su'aal geliyay.

### Qod. 139
### Xaqiiqooyinka lama huraanka u ah soo bandhigidda ama sharraxaadda xaqiiqooyin qiimo-gal ah

Xaqiiqooyinka:

a) lama huranka u ah in sharaxaan ama soo bandhigaan xaqiiqooyinka dacwada ama xaqiiqo qiimo-gal ah;
b) taageeraya ama beeninaya soo jeedinta dhacdo dacwada ama xaqiiqo qiimo-gal ah.
c) sugida aqoonsiga shay kasta ama ruux kasta aqoonsigiisu khuseeyo mawduuca,
d) xadidaada wakhtiga iyo goobta dhacdo kasta oo muran ama xaqiiqo qiimo-gal ahi ka dhacday, ama
e) muujinaya xidhiidhka dhinacyada xaqiiqo kasta oo sidaas ah sameeyay;

Waa qiimo-gal ilaa xadka ay yihiin kuwo lagama maarmaan u ah ujeedadaas.

### Qod. 140
### Waxyaabo ay yidhaahdeen ama sameeyeen dad shirqool isla waday

Markay jiraan sababo macquula oo lagu rumaysan karo in dad laba ama in ka badani ay wada jir u samaynayaan shirqool si ay ugu galaan, wax kasta oo ay yidhaahdeen, qabteen

ama qoreen mid uun dadkaasi ka tirsani ku xiriirsan ku talo gal guud, muddo kadib marka ku talagalkii uu ku kaco mid uun iyaga ahi, waa xaqiiqo khusaysa mawduuca oo lid ku ah mid kasta oo dadka la rumaysan yahay inay ujeedadaasi wax u shirqolayaan:

a) Cadaynta jiritaanka shirqoolkaasi
b) Muujinta qofkasta oo iyaga ka mid ah ka qayb qalkiisa.

**Cutubka 2aad**

Xaqiiqooyin qiima-gala duruufo gaara keliya

**Qod. 141**
**Marka xaqiiqooyin aan sida kale qiimo-gal u ahayn ay qiimo-gal noqdaan**

Xaqiiqada aan sida kale qiimo-gal ahayn waxay qiimo-gal noqdaan:

a) Haddii aanay wada socon karayn xaqiiqooyin ka dhacdada muranka ama xaqiiqooyin qiimo-gal ah, ama
b) Haddii, iyaga laftigoodu ama ku xidhnaanta xaqiiqooyin kale, ay samaynayaan jiritaanka ama jiritaan la'aanta xaqiiqo dhacdada muranka ah ama xaqiiqo qiimo-gal ah oo si aad u saraysa loo fili karo ama aan loo fili Karin;

**Qod. 142**
**Xaqiiqooyinka Tusinaya xaalad Maskaxeed ama Jidheed**

Marka jiritaanka xaalad maskaxeed ama jidheed ama dareen jidheed uu yahay dhacdada muranka ama xaqiiqo qiimo-gal ah, xaqiiqda la xidhiidha mawduuca su'aasha ee ka muujinaya qof cayiman jiritaanka:

a) Xaaladiisa Maskaxeed sida dereenkiisa, aqoontiisa, niyad-samaantiisa, taxadir-daradiisa, rasnaantiisa, qalbi wanaagiisa ama qalbi xumaantiisa;
b) Xaaladiisa jidheed ama dareenkiisa jidheed

Waxaa loo tixgalinayaa inay qiimo-gal yihiin.

**Qod. 143**
**Xaqiiqooyinka ku taagan su'aasha falku midka uu yahay kama' ama kas**

Marka ay su'aali ka taagan tahay in:

a) falku ka uu ahaa kama' iyo ku talogal ama
b) uu ku dhacay aqoon gaar ah ama ku talogal,

Xaqiiqda sidaa ah qaybta ka ah dhicitaanka falal kan la mid ah, midkasta sida qofku u sameeyay waxaa loo tixgelinayaa in ay qiimo-gal yihiin:

**Qod. 144**
**Hadal qoraal qayb ka ah hadal dheer oo macaamil ku saabsan**

Marka hadal qoraal cadymeed uu saamaynayo qayb ka mid ah:

a) Hadal qoraal dheer;
b) Wada hadal (sheekaysi);
c) Dhukumenti keli ah;

d) Dhukumenti ka koobnaa buug ama;
e) Waraaqo ama xaashiyo taxane ahaa;

cadaynta sidaa loo siiyo Maxkamada, oon ka badnayn, hadal qoraal, wada sheekaysi, dhukumanti, buug ama waraaqo ama xaashiyo taxane ah sida ay Maxkamaddu ugu muuqato lagama maarmaan xaaladaasi gaarka ah dhexdeeda si buuxda loogu fahmayo dabeecada iyo jiritaanka qoraalka, iyo duruufaha lagu sameeyay.

**Qod. 145**
**Xukunada hore**

Ujeedooyinka farqada 3 ee Qodobka 13, jiritaanka xukun walba oo hore oo sharcigu ka reebbayo Maxakamad walba inay qaado oogitaan Maxkamadeed, waa xaqiiqo la xidhiidha marka su'aashu ay tahay, haddiiba Maxkamadaa laga oogi karo dacwada.

**Qod. 146**
**Tixgelinta xaqiijinta qiraalka kuwa wada-eedaysan**

Marka,

a) dad badani wada jir loogu oogayo denbi isku mid ah, iyo
b) qiraal,
    i) uu sameeyo mid ka mid ah dadkaasi iyo
    ii) cadayn inuu ga isaga laftiisu in uu ku lug lahaa, isaga iyo qaar kuwa la eedaysan ka mid ah uu cadeeyo;

Maxakamaddu waxay u tixgelin karaa qiraalkaas, ka uu lidka ku yahay iyo kuwa kale ee uu cadaynayo in ay kala qaybgaleen.

**Cutubka 3aad**
Ahmiyadda caddaymaha Eedaysanaha

**Qaybta 1aad**
Ogolaanshaha

**Qod. 147**
**Qeexitaanka Ogolaanshaha**

Ogolaanshahu waa badheedhe hadal ah ama qoraal ah oo muujinaysa soo bandhigid siday u dhacday dhacdo kasta oo mawduuca muran ama xaqiiqo qiimo-gal ah, oo uu sameeyo qofkasta oo ku eedaysan dacwad ciqaaba.

**Qod. 148**
**Qiimo-galnima Ogolaanshaha**

Ogolaanshuhu waa qiimo-gal loo adeegsan karo cadayn lid ku ah kan sameeyay, balse cadayn uma noqon karo u daneeya kan sameeyay.

**Qaybta 2aad**
Qiraalka

**Qod. 149**
**Qeexida Qiraalka**

Qiraal waa hadal afka ah ama qoraala oo uu sameeyo qof lagu eedeeyay cadaynayana ama muujinaya soo bandhiga in uu denbiga galay.

**Qod. 150**
**Qiraalka lagu sababay, dhiirigalin, cabsigelin ama balanqaad**

Qiraalka uu bixiyo qof eedaysane ahi waa mid aan qiimo-gal ka ahayn dacwada ciqaabta ah markay u muuqato Maxkamada in qiraalkaas bixintiisa ay sabab u ahayd dhiiri- gelin, cabsi-galin ama balan-qaad.

**Qod. 151**
**Xaaladaha aan qiraalka cadayn ahaan loo Ogolaanayn**

1. Qiraal uu qof sameeyay looma adeegsan karo cadayn lid ku ah isaga, haddii aan qiraalka lagu samayn Garsoore hortiisa sida u sheegayo Qodobka 68.

2. Si kastaba, marka xaqiiq lagu andacoonayo in ay ku timi natiijo war laga helay qofka eedaysan laftiisa, ha ahaado qiraal ama yaanu ahaane, siday ula xidhiidho muuqashada xaqiiqada la daahfuray, ayaa lagu cadayn karaa.

**Cutubka 4aad**
Badheedhaha dukumenti guud

**Qod. 152**
**Qiimo-galnimada hadal qoraalka dukumenti guud**

Qoraal galinta lagu sameeyay buug ama diiwaan kasta oo rasmi ah, oo sheegaya xaqiiqada muranka ama xaqiiqo qiimo-gal ah, oo uu sameeyey shaqaale dawladeed, ama qof u xilsaaran hawl dan guud, isagoo xilkiisa gudanaya waa xaqiiqo qiimo-gal ah.

**Qod. 153**
**Hadal qoraal xaqiiqo dabeecad guud leh**

Markay Maxakamaddu qaabaynayso ra'yi, jiritaanka xaqiiqo dabeecad guud leh, badheedhe kasta oo laga sameeyo:

a) Sharci kasta, ama
b) Hadal qoraal kasta, daabacaad ama wargelin la sameeyay iyadoo loo tixraacayo sharci uun.

Waa qiimo-gal.

**Qod. 154**
**Qiimo-galnimada hadal qoraallada sawir shaxeedada iyo khariiddadaha**

Hadal qoraalada laga sameeyay dhacdo muran ama xaqiiqo qiimo-gal ah oo:

a) Khariidad ama qorshayaal ay samaysay hay'ad Qaran, ama
b) lagu faafiyay sawir shaxeed ama khariidado si guud loogu soo bandhigay iib

Iyaga laftoodu waa qiimo-gal markay soo bandhigayaan ama wax ka sheegayaan khariidadahaa, ama sawir shaxeedyadaas ama qorshayaashaas.

**Cutubka 5aad**
Badheedhaha dadka aan marag ahaan loogu yeedhi karin

**Qod. 155**
**Xaaladaha badheedhaha dadka aan loogu yeedhi karin marag ahaan ay qiimo-gal yihiin**

Badheedhaha qoraal ama af ahaan ee xaqiiqo qiimo-gal ah ee uu sameeyo, qof dhintay, ama aan la heli karin, ama aan awoodi karin inuu bixiyo cadayn, ama kuwo imaanshahooda lagu keeni karin waqti badan ama kharash badan la'aantiis, oo marka loo eego duruufaha dacwada u muuqda mid aan caqligal ahay, iyaga lafdootu waa qiimo-gal xaaladaha hoos ku xusan:

a) Marka badheedhuhu qofku u sameeyay ay tahay:
   i) sababta dhimasha;
   ii) duruuf walba oo natiijada dhimashadu ku timi

Xaaladaha sababta dhimashada ee qof ay muran gasho;

b) Marka badheedhaha lagu sameeyay macaamil ganacsi oo caadi ah iyo marka ay si gaar ah ugu kooban tahay:
   i) qoraal gelin xusuus qor uu qofku ugu talagalay in uu ku xusuus dhawrto macaamil caadi ah oo ganacsi ama ka saarid xil mihnadeed;
   ii) qoraal xaqiijin uu qoray ama u saxeexay helitaan lacageed, alaab, damaanad ama hanti noocay doonto ha ahaatee;
   iii) qoraal dhukumanti ganacsi lagu isticmaalay ama uu saxeexay isagu; ama
   iv) taariikhda warqada ama dhukumanti kasta oo caadiyan leh taariikh uu qoraal ama saxeexay isagu;

a)

c) Markay badheedhuhu lid ku yahay xatooyo ama dano hantiyeed ee qofka samaynaya ama haddii runnimadeedu ay soo shaac saarayso ama laga yaabo in ay ku soo shaac saarto dacwad ciqaaba ama dacwad madani oo khasaare.

**Qod. 156**
**Qiima-galnimada waxyaabo caddaymo ah oo dacwad soo socota**

1. Cadaymo ay maragyo ka bixiyeen dhegaysiga dacwad Maxkamadeed ama ka hor bixieen masuul awood u leh, waxaa loo qaadanayaa qiima-gal, sida nuxurka faqrada 2 aad ee qodobkan, marka loola jeedo cadaynta runta dhacdada sheegaysa:

a) Dhegaysiga dacwada Maxkamadeed ee xigta, ama;
b) Marxlada hadhsan ee isla dacwadaas.

2. Cadaymaha lagu sheegay faqrada 1 aad ee qodobkan waxay qiima-gal yihiin oo keliya:
   a) wakhtiga:
      i) uu dhintay maragu,
      ii) maraga aan la helaynin,
      iii) maragu aanu awoodi karin inuu bixiyo maragfur,
      iv) maraga dhinaca kale ka xanibay maragfurka, ama
      v) imaanshaha maraga aan lagu keeni karin, lumin waqti badan ama kharash badan oo duruufahaasi Maxkamada ula muuqdaan kuwo aan caqligal ahayn, iyo
   b) haddii:
      i) dacwadu lid ku tahay isla qofkaa ama isla dadkaas,
      ii) dhinaca, aan ahayn dhinaca u yeedhay maraga, uu xaq iyo fursad u leeyahay in uu maraga waydiiyo su'aalaha imtixaamida gudban,
      iii) su'aasha muranku dacwada danbe ay nuxur ahaan la mid tahay tii dacwadii hore.

**Cutubka 6aad**

Ra'yiga khubarada

**Qod. 157**
**Ra'iyaga khuburada**

1. Marka Maxakamaddu ay qaabaynayso ra'yi:
   a) Ku saabsan nuqdad sharci shisheeye,
   b) Ku saabsan nuqdad saynis ama farshaxan.

Ra'yiga ku saabsan mawduucaas, dadka ku takhasusay xirfadahaas waa xaqiiqo qiimo-gal.

2. Xaqiiqooyinka aan marka kale qiimo-gal ahayn, ayaa qiimo-gal noqonaya markay taageerayaan ama ka hor imanayaan ra'yiyo khabiiro kale oo qiimo-gal ah.

**Qod. 158**
**Ra'yiyada qoraalka gacanta**

Marka Maxakamaddu ra'yiyo ka qaadanayso, sida dhukumenti gacanta loogu qoray ama loo saxeexay, ra'yiga qofka aqoonta u leh in qofka la filayo in uu qoray, uu isagu gacanta ku qoray ama saxeexay qoraalka, ama aanu isagu qorin ama saxeexin waa qiimo-gal.

**Qod. 159**
**Ra'yiyada ku saabsan dhaqamada**

Marka ay Maxakamaddu ra'yi ka qaadanayso:

a) Macaamilka iyo dhaqamada lagu isticmaalo qayb dhul ah oo ay ku dhaqmaan koox isir ama koox dad ahi, ama
b) Ujeedada weedho meelo cayiman looga isticmaalo, ama ay u isticmaalaan kooxo isir ama kooxo dad ah oo cayiman

Ra'yiga qofka aqoonta gaarka u leh, waa qiimo-gal.

**Qod. 160**
**Asbaabta Ra'yiyada**

Markasta uu ra'yi qof qiimo-gal yahay, asbaabta uu ku salaysan yahayna waa qiimo-gal.

**Qod. 161**
**Qaabka ra'yiga khabiirka**

1. Marka ay Maxakamaddu lama huraan u aragto in khabiir fikirkiisa ka bixiyo mawduuc gaara, Maxakamadu waxay dalabka Xeer-ilaaliyaha ama eedaysanaha ama iskeedba u cayimaysaa in ay khabiirka ka dhex doorato dad cayiman oo dhinacyadu ka heshiiyeen haddii ay suurtawdo.

2. Imaanshaha khabiirka ee in uu bixiyo cadayn, marka sidaa loogu yeedho waa khasab kharashka ku baxanayana waxaa laga bixinayaa khasnada dawladda.

3. Maxakamaddu waxay ku wargelinaysaa khabiirka waajibaadkiisa, waxayna ku waydiinaysaa su'aalo waqtiga lagu dhegaysanayo xafiiska, iyadoo ay goob-joog yihiin dhinacyada loo baahan yahay. Marka dabeecda arrimka ama culayska baadhitaanka, aanu khabiirku markiiba fikirkiisa Maxkamada siin Karin, Maxakamaddu waxay u cayimaysaa wakhti xadidan, kaasi oo ra'yiga lagu soo gudbin karo warbixin qoraal, wakhtigaasi xadidan ee la bixiyay waxa lagu sheegayaa asbaab cadcad.

4. Ra'yiga khabiirka waa in ay dhegaysataa Maxkamaddu, haddii lagu bixinayo hadal afka ah, waxa lagu soo koobi doonaa qoraal. Haddii khabiirku ra'yiga ku bixiyo hab qoraal ah, waxa lagu lifaaqi doonaa diiwaan gelinta garmaqalka. Nuqulna waxa la siinayaa dhinac kasta oo danaynaya.

5. Khabiirka waxa loogu yeedhi karaa marag ahaan si uu u bixiyo markay dhinacyada midkood dalbado ama iskeedba Maxkamadu u go'aansato.

6. Magacaabista khabiirka si uu cadayn u bixiyo, sinaba looguma xadgudbi karo xaqa dhinac kastaaba u leeyahay, in uu kharashkiisa ku keeno khabiir kale oo ra'yi farsamo bixiya.

7. Marka shaqo dhakhtar maskaxeed loo yeedho, waxaa waajib ku ah Maxakamada inay waydiinaysato dhakhtarka in eedaysanahu uu khatar ku yahay bulshada, mar kasta oo uu sharcigu dalbanayo in la qaado talaabooyin ku haboon oo xaga amniga ah.

**Cutubka 7aad**
Qiimo-galnimada dabeecada eedaysanaha

**Qod. 162**
**Dabeecada eedaysanaha**

1. Dhegaysiga dacwada ciqaabta ah:
   a) Xaqiiqada in eedaysanaha dabeecadiisu wanaagsan tahay waa mid qiimo-gal ah; iyo
   b) Xaqiiqada ah in eedaysanaha dabeecadiisu ay xuntahay qiimo-gal maaha haddii aan:
      i) aan la bixin cadayn ah in dabeecadiisu wanaagsan tahay, xaaladaas waa qiimo-gal;
      ii) aan dabeecada xun ee qofka iyada lafteedu tahay mawduuca muranka, xaaladaas markasta waa qiimo-gal.

2. Xukumada hore waa qiimo-gal, markay cadaynayaan dabeecad xumaanta eedaysanaha.

**CINWAANKA 2AAD**
Soo bandhigidda iyo saamaynta caddaymaha

**Cutubka 1aad**
Culayska cadaynta

**Qod. 163**
**Culayska Oogitaanka**

Dhegaysiga dacwadaha ciqaabta ah oogitaanku waa in uu u cadeeyaa si aan shaki ku jirin:
a) In denbiga la soo oogay xaqiiqa ahaan la galay; iyo
b) In eedaysanahaasina uu galay denbia.

**Qod. 164**
**Culayska caddayn ee xaqiiqo gaar ah**

Haddii aanu sharcigu si kale u sheegin, culayska cadayn ee xaqiiqo gaara wuxuu saaran yahay dhinaca doonaya in jiritaankeeda in Maxkamadu ka rumaysato.

**Qod. 165**
**Culayska caddayn ee in eedaysanuhu dacwadda ku galay duruuf gaara**

Marka ruux lagu eedayo, culayska cadayn ee jiritaanka duruuf denbiga fududaysa, ama jiritaanka duruuf ciqaabta reebtaa waxay saran tahay eedaysanaha.

## Cutubka 2aad

Xaqiiqooyinka aan u baahnayn in la caddeeyo

### Qod. 166
### Xaqiiqooyinka Garsoor ahaan lagu Ogaaday

Ma jirayso xaqiiqo Maxkamadu ku ogaatay garsoor ahaan oo u baahan in la cadeeyo.

### Qod. 167
### Xaqiiqooyinka ay tahay in Maxkamadu garsoor ahaan ku ogaato

Maxkamadu waa in ay garsoor ahaan u ogaato xaqiiqooyinka soo socda:

a) Dhamaan sharciyada iyo qawaaniinta ka shaqaynaysa ama horeba uga shaqaynaysay Jamhuuriayada Soomaaliya ama qayb kasta oo ka mid ah dhulka Jamhuuriyada Soomaaliya ka hor intii ka horaysay intaanay Dastuurkeeda Qaran ku noqon iyo sidoo kale habka la raacay diyaarintii qawaaniinta iyo xeerarkaas;

b) Shaambaha Qaranka iyo shaambadkasta oo kale oo uu adeegsado qof xeerku u ogolaaday ama laga yaabo in uu awood u siiyay isticmaalka qaybo dhulka Dalka ka mida dastuurka hortii;

c) Hanashada xafiisyada, magacaabidaha, xilalka, hawlaha iyo saxeexa dadka ilaa mudo haynaya xafiis kasta oo dawladeed kuna yaal Jamhuuriyada Soomaaliya, haddii xaqiiqada magacaabista Xafiiska sidan ah lagu baahiyay faafinta Rasmiga ah ama faafin u dhiganta oo laga isticmaalo qayb ka mid ah dhulka Jamhuuriyada Soomaaliya ee xilli walba

d) Jiritaanka, cinwaanka iyo calanka Qaranka ee Dal kasta oo ay aqoonsan tahay Dawladda Jamhuuriyada Soomaaliya;

e) qaybaha wakhtiga, fasaxyada rasmiga ah ee geyiga Qaranka.

### Qod. 168
### Xaqiiqooyinka ay Maxkamaddu ku ogaan karto garsoor ahaan

Maxakamaddu marka dhinacyada midkood ka codsado ama iskeedba, waxay garsoor ahaan ku ogaan kartaa xaqiiqo qiimo-gal ah, haddii si maangal ah loogu qanacsan yahay in xaqiiqda muranku ay tahay mid si guud loo og yahay ama si fudud loo xaqiijin karayo.

### Qod. 169
### Adeegsiga walxo tixraac garsoor ku ogaanshaha

1. Dhamaan xaaladaha ay Maxakamaddu tahay in garsoor ahaan u ogaato ama ay garsoor ahaan ku ogaanayso xaqiiq qiimo-gal ah, Maxakamaddu waxa ay daalacan kartaa buugaagta iyo dhukumentiyada ku haboon ee noqonaya tixraac caawin kara.

2. Xaaladaha ku xusan Qodobka 168, Maxakamaddu waxay diidi kartaa inay u qaadato ogaansho garsoor xaqiiqo kasta, ilaa iyo inta dhinaca ay khusaysaa ku keenayo waqti

cayiman buug kasta ama dhukumenti kasta oo ay Maxakamaddu ujeedadaasi u aragto daruuri.

## Cutubka 3aad
Ictiqaadyada

### Qod. 170
### Ictiqaadyada ansaxnimada ama saxnaanta

1. Haddii aanay jirin cadayn dhan ka ah, Maxakamaddu waxay ictiqaadaysaa (u qaadanaysaa):
   a) In uu yahay dhokumanti ansax oo si munaasib ah ay u soo saartay:
      i) hay'ad kasta oo ka tirsan Qaranka ama hay'ad katsa oo ka jirtay qaybo ka mida dhulka Qaranka ka hor dastuurkeeda;
      ii) ruux ka shaqeeya hawl qaran ee dalka dhexdiisa ama goob ka mid ahyd dhulka qaranka ka hor dastuurkeeda;
      iii) hay'ad Dal shisheeye ama qof ka shaqeeya hawl guud ee dalkaas marka sharciga dalkaasi ansixiyay;
   b) Sarkaalkasta dhokumentiga caynkaasi ah soo jeediyay in la soo saaro, saxeexay ama hubiyay, qaaday, markii uu soo baxay, saxeexay ama hubiyay, xilka rasmiga ah ee dhukumentiga caynkan ah sheegayo.

2. Ula jeedooyinka Qodobkan dhukumanti waxa loola jeedaa xidhiidhkasta oo qoraal.

### Qod. 171
### Maxakamaddu waxay u qaadan kartaa jiritaanka xaqiiqooyin gaar ah

Maxakamaddu waxay qaadan kartaa, iyadoo ku xidhiidhinaysa duruufaha gaarka ah ee xaalada, jiritaanka xaqiiqo kasta oo ay u filayso inay u badan tahay in ay dhacday xili:
   a) Casharada caamka ah ee dhacdooyinka dabiiciga ah;
   b) Casharada caamka ah dabeecada aadamaha iyo dhaqamadiisa
Casharada caamka ah ee macaamilada guud ama gaar ahaaneed ee si maangal ah kuugu hogaaminaya citiqaadkaas.

## Cutubka 4aad
Soo bandhigidda walxo qalabo iyo waxyaabaha kale

### Qod. 172
### Qalab walxeedka iyo waxyaabo kale ee Maxkamada loo soo bandhigi karo

1. Waxa Maxkamada loo soo bandhigi karaa:
   a) Shay ama walax loola jeedo ama ah qalabkii denbiga;
   b) Diiwaangelinta qiraalada loo qaaday si waafaqsan Qodobka 68;
   c) Shaykasta oo qalab denbiyeed ah, oo ay Maxakamaddu ogolaatay in la soo bandhigo.

2. Dhinac kasta waxa uu adeegsan karaa walxaha la soo bandhigay:

a) Isagoo ka waraysanaya maragga wax ku saabsan walxahaasi;
b) Isagoo walxahaas ka sheegaya hadal uu hore uga jeediyay ama markaaba uu Maxkamada ka codsanayo.

## Cutubka 5aad

Caddaymaha aan loo baahnayn bixintooda

### Qod. 173
### Qoyska is-qaba marag lid iskuma furi karaan

Qof kasta oo guursaday ama la guursaday ma bixin karo marag lid ku ah kan ay is qabaan, marka ay tahay arrin dhacday mudadii ay is qabeen, xataa haddii ay kala tageen sababtay doonaan ha ku kala tagaane marka laga reebo:

a) Ogolaansho cad oo qofka kale ee qoyska (ninka iyo oorida),
b) Ay la xidhiidho lagu eedeeyay in mid ka galay
    i) qofka bixinaya cadaynta;
    ii) ((cid ay dhaleen)) ama ((cidii dhashay)) labadooda midkood ama labada is qaba midkood.

### Qod. 174
### Sirta Qaranka

1. Cadaymahan lama bixin aan la bixinayn:
    a) Sirta Qaranka ee ku saabsan siyaasad ama milateri
    b) Wax kasta oo loo xidhay in ay dhaawacayaa:
        i) nabadgalyada dalka
        ii) danta siyaasadeed, ee gudaha iyo dibadaba oo Qaranku leeyahay.

2. Haddii eedaysanaha waydiisto bixinta cadayn ka mid ah kuwa aan ku sheegnay faqrada hore ee qodobkan, Maxakamaddu iyadoo ku naaqishaysa xafiiskeeda dabeecada cadaynta caynkan ah, ka dib markay dhegaysato fikirka Xeer Ilaaliyaha Guud, markay tixgeliso in diidmada cadayntani si culus u dhaawacayso difaaca, waxay amraysaa markaasi in dacwada la oodo, iyadoo qaadaysa talaabo kasta oo kale oo ku sheegan Qodobka 76.
    Amarka lagu oodayo dacwada waxa uu yeealan doonaa saamayn la mid ah xukunka sida ay tahay ujeedada farqada 3 ee Qodobka 13.

### Qod. 175
### Marag noqoshada garsoorayaasha

1. Ma jirayo Garsoore, marka laga reebo amar gaar ah oo ka soo baxa Maxkamadda Sare, lagu khasbayaa inuu ka jawaabo su'aal kasta, oo:
    a) Dhaqankiisa uu ku guto hawlihiisa garsoor
    b) Wax kasta oo uu ku ogaaday sabab ah xafiiskiisa ah.

2. Qaybaha farqada hore waxa kale oo lagu dabaqayaa garsoorayaasha dadwayne.

**Qod. 176**
**Warka sida loo galay denbiga**

Maxakamaddu ma noqon doonto mid:

a) ku khasabta Xeer Ilaaliyaha Guud ama Sarkaal Boolis ah inay sheegaan magaca qof kasta oo war siiyay;
b) ka hesha Xeer Ilaaliyaha Guud ama Sarkaal Boolis ah war ay ka helaan dadka magacyadooda, Saraakiishani aanay u arkayn inay haboon tahay in la sheegaa. Ilaa iyo xadka la adeegsan karo, qaybaha Qodobka 119 ayaa lagu dhaqmayaa.

**Qod. 177**
**Siraha mihnadeed**

1. Xirfadle qaanuun looma ogolaanayo wakhtinaba, haddii aanu jirin ogolaanshaha muwakilkiisa, in uu daahfuro:
   a) Arrin kasta oo si sir ahaan loogu sheegay isaga;
   b) Arrin kasta oo uu ku ogaaday isagoo ku dhex jira gudashada xirfadiisa qaanuuneed.

2. Tilmaamaha farqada hore waxa kale oo lagu dabaqayaa karaaniyada, turjumaanada iyo shaqaalaha kale ee xirfadlayaasha qaanuunka.

**Qod. 178**
**Caddaymaha waxba kama jiraanka ah**

Marka lagu fashilmo in loo hogaansamo qaybaha Cutubkan wuxuu ka dhigayaa cadaynta mid aan qaanuun ahaan la isticmaali Karin (baaba'a), Maxakamadduna waxay go'aan ka gaadhi kartaa soo jeedinteeda marxalad kasta oo dhegaysiga dacwadu marayso.

**CINWAANKA 3AAD**
Waraysiyada maragyada

**Cutubka 1aad**
Qaybaha guud

**Qod. 179**
**Waraysiga markhaatiga**

Haddii aanu sharicu si kale u sheegin, markhaatiga waxa loo waraysan doona:

a) hadal afka ah iyadoo Maxkamaddu ay dadwaynaha u furan tahay,
b) eedaysanaha oo goob joog ah,
c) maro dhaar ama xaqiijin.

**Qod. 180**
**Dadka marag furi kara**

1. Dhamaan dadku marag waa furi karaan, haddii aanay Maxakamaddu u tixgelin in qofka loogu diiday fahamka su'aalaha isaga la waydiiyay ama bixinta asbaabaha ay ku salaysan yihiin su'aaluhu oo ay ugu wacan tahay:
   a) da' yaraan,
   b) da' aad u wayn,
   c) xanuun, xagga jidhka ama maskaxda ah.

2. Waajibka markhaati furku waa khasab.

**Qod. 181**
**Dhaar ku xaqiijinta**

Marka laga reebo sida uu sheegayo farqada 4 ee Qodobka 182, marakhaati kastaa, inta aanu bixin cadaynta, waxa:
   a) laga qaadi doonaa dhaar waafaqsan diintiisa, ama
   b) Wuxuu samaynayaa xaqiijin, taasi oo u dhiganta dhammaan ujeedooyinkii dhaarta, haddii
      i) isagu aanu sheeganayn diinaba, ama
      ii) in la dhaariyo ay maanacayso diinta uu aaminsan yahay qofka maraga ahi.

**Qod. 182**
**Nidaamka dhaarta ama xaqiijinta**

1. Dhaarta ama xaqiijinta waxa lagu hor samaynayaa Garsooraha ama Gudoomiyaha dacwadda.

2. Dhaarta waxa loo adeegsanayaa weedhahan "Anigu waxaan ku dhaaranayaa magaca Ilaahay in aan sheegayo runta, runta oo dhan sheegayo oo aanan wax kale sheegaynin run mooyaane".

3. Xaqiijinta waxa loo samaynayaa weedhaha ah sidan "Anigu waxaan si dhab ah (rasmi ah) u cadaynayaa in aan anigu sheegayo runta, runta oo dhan sheegayo run mooyaane aanan wax kale sheegayn".

4. Ruux kasta oo aan gaadhin da'da afar iyo toban sano jir xiliga laga qaadayo dhaarta ama uu samaynayo xaqiijinta waxa loo ogolaan doonaa si looga qaado dhaarta ama uu u sameeyo xaqiijinta marka uu Garsooraha Maxakamadda hagayaa si cad ugu digo isaga masuuliyada saaran si uu u sheego runta, runta oo dhan, run mooyaane aanu wax kale sheegayn.

## Qod. 183
## Maragyada dhegaha la’ iyo kuwa aan hadalka karayn

1. Si loo su’aalo, waraysto ama looga qaado dhaar ama xaqiijin maraga dhagoolka ah ama aan hadalka karayn ama dhagool ma hadle ah, habkan soo socda ayaa la raacayaa:
   a) dadka dhagoolka ah waxa loogu jeedinayaa dhaarta ama xaqiijinta iyo su’aalaha qoraal ahaan; iyagu waxay ku bixinayaan dhaarta, ama ku samanayaan xaqiijinta, su’aalahana kaga jawaabayaan hadal afka ah;
   b) dadka ma hadalayaasha ah hadal afka ah ayaa wax lagu su’aalayaa waxayna dadkaasi ku jawaabayaan qoraal; dhaarta iyo xaqiijinta waxa u akhriyaya Garsooraha Dacwada wada, dabadeetana ku siinaya iyaga qoraal ahaan iyaguna way saxeexayaan;
   c) dadka dhagaha la’ mahadlayaashana ah waxa lagu siin doonaa su’aalaha qoraal ahaan, waxayna jawaabaha ku bhixin doonaan qoraal ahaan; dhaarta iyo xaqiijinta waxa lagu siin doonaa qoraal ahaan waanay saxeexi doonaan iyada.

2. Hadii dhagoolku, ma hadle yahay ama dhagool iyo ruuxa ma hadlaha ah oo aan garanaynin akhriska ama qoraalka, Garoorahu waxa uu u magacaabayaa mid ama in ka badan oo turjumaano ah, haday suurtagal tahay ka ugu fiican laga soo dhex doortay, dadka aqoon u leh inay la hadlaan dadka noocan ah.

## Qod. 184
## Caddaynta xaqiiqda marag-furka afka ah

1. Cadaynta afka ahi xaaladaha oo dhan, waxay abaaraysaa in toos loo yiraahdo;
   a) haddii ay la xidhiidho wax la arkay, waxay noqonaysaa marag-furka markhaatiga sheegaya in uu arkay;
   b) haddii ay la xidhiidho wax la maqlay, waxay noqonaysaa Maraga-furka markhaatiga sheegay in uu maqlay;
   c) haddii ay la xidhiidho xaqiiqo lagu gartay ama lagu helay dareemada ama si kale loo ogaaday, waxay cadayntu noqonaysaa maraga sheegaya in uu dareenkaa ku helay ama sidaa kale u ogaaday;
   d) haddii ay la xidhiidho fikrad ama asbaabta fikradaasi lugu qaatay, waxay noqonaysaa cadaynta qofka fikradaasi qaba ee asbaabtaas ku qaatay.

2. Haddii cadaynta afka ahi la xidhiidho jirtaanka ama xaalada, walax maatar ah, Maxakamaddu waxay amraysaa, haday u aragto inay ku haboon tahay, soo bandhigida shaygaas ama hubintiisa.

3. Iyadoo aan lagu xadgudbayn waxyaabaha qodobkan, aragtiyaha khabiirada ee sheegaya heshiis si guud iib loogu soo bandhigay iyo asbaabta aragtidaa lagu qaatay, waa lagu cadayn karaa soo bandhigida heshiiskaa haddii kii sameeyay uu:
   a) Dhintan
   b) aan la heli karin,
   c) uu noqday mid aan awoodi karaynin bixinta cadayn, ama

d) aan loogu yeedhi karayn marag ahaan iyadoo aanay dhicin habsan ama ku kacayn yeedhitaankiisu kharaj oo ay Maxakamaddu u tixgelinayso in aanay duruuftaas caqligal ahayn.

**Qod. 185**
**Su'aalo waydiinta eedaysanaha**

Haddii aanu sharcigu si kale u sheegin, qaybaha la xidhiidha su'aalo waydiinta maragyada ayaa la dabaqayaa, ilaa iyo xadka lagu dhaqmi karayo, si loo su'aalo iyo si looga qaado dhaar ama loo sameeyo xaqiijinta eedaysanaha

**Qod. 186**
**Xaaladaha caddaynta lagu qaadi karo meel aan ahayn maxakamadda**

1. Haddii aanu sharcigu si kale u sheegin haddii:
   a) Madaxweynaha Jamhuuriyada,
   b) Gudoomiyaha Golaha Baarlamaanka
   c) Ra'iisal Wasaaraha

looga baahdo in marag ahaan loogu yeedho, Garsooraha hogaaminaya ayaa ugu tagaya goobta ay la waafaqaan maragyada noocan ahi si uu uga helo cadayn.

2. Garsooraha hogaaminta hayaa wuxuu ku dhegaysanayaa cadaynta ku xusan farqada hore iyadoo aanay goobta joogin dadweynuhu. Xeer Ilaaliyaha Guud iyo eedaysanaha ama Qareenkiisa waxay yeelan doonaan xaqa ah in ay goobtaasi joogaan, waxaana waajib ah in iyaga lagu wargeliyo wakhtiga iyo goobta cadaynta noocan ah lagu dhegaysan doono.

3. Tilmaamaha farqadan hore ayaa sidoo kale lagu dabaqayaa marka ay jiraan xaaladaha maragu aanu karayn in uu yimado iyadoo ay ugu wacan tahay sababo caafimaad daro ah oo khatar ah.

4. Heshiisyada caalamiga ah, hab-dhaqanka caalamiga ah ayaa la raacayaa xaaladaha dublamaasiyiinta Wadamada shisheeye u soo magacaabaan Jamhuuriyada Soomaaliya iyo wakiilada Ururada Caalamiga ah ee leh, milgaha dublamaasinimada loogu yeedhayo markhaati ahaan.

**Cutubka 2aad**
Waraysiga markhaatiyada

**Qaybta 1aad**
Qaybaha guud

**Qod. 187**
**Qeexitaanno**

Ujeedada Xeerkan, haddii aan si kale mawduuca loogu dhigin:

a) Weedha “su’aalaha tooska ah”, waxaa loola jeedaa su’aalaha maraga uu weydiiyo dhinicii u yeedhay;
b) Weedha “su’aalaha gudban” waxaa loola jeedaa su’aalaha maraga uu weydiiyo dhincii u yeedhay maahee dhinaca kale;
c) Weedha “su’aalo ku celis ah” waxaa loola jeedaa su’aalaha maraga uu waydiiyo dhincii u yeedhay isagu ka dib marka uu ka jawaabo su’aalaha gudban;
d) Weedha “su’aalaha hogaaminta” waxaa loola jeedaa su’aala kasta oo maraga loo waydiiyo qaab loogu dhigayo in uu bixiyo jawaabta uu ka doonayo ama uu ka filayo dhinaca waydiiyay.

**Qod. 188**
**Nidaamka su’aalaha**

1. Maragyada marka ugu horaysa waxaa la weydiinayaa su’aalaha tooska ah; kadib, haddii dhinaca kale sidaas rabo, maraga waxaa la waydiinayaa su’aalaha gudban; kadib, haddii dhinicii u yeedhay maraga uu doono, maraga wuxuu weydiinayaa su’aalo ku celis ah.

2. Su’aalaha tooska iyo su’aalaha gudban waxay la xidhiidhayaan xaqiiqooyinka qiimo-galka ah, laakiin su’aalaha gudban looma baahana in ay ku xadaysnaadaan xaqiiqooyinka uu maragu ku cadeeyay su’aalihiisii tooska ahaa.

3. Su’aalaha ku celiska ah waxay ku wajahnaanayaan faahfaahinta arimaha lagu sheegay su’aalaha gudban; iyadoo haddii arrimo cusub lagu sheego, ogolaanshaha, Maxkamada ka dib dhinaca kale su’aalo gudban dib uga waydiin karo arrinkaas.

**Qod. 189**
**Cusboonaysiinta xasuusta**

1. Markhaatigu, xilliga la waraysanayo haddii Maxkamaddu u ogolaato, wuxuu dardar galinayaa xasuusta la xidhiidha arrimaha ku saabsan kuwa laga waraysanayo, si uu u sheego:
   a) Qoraal uu isagu sameeyay;
      i) wakhtigii dhicitaanka dhacadada la xidhiidha waxa la su’aalayo isaga;
      ii) kadib isla markii ay dhacdadu dhacday taas oo Maxakamaddu u tixgalinayso in laga yaabo in taasi qayb ka ahayd xilligaa uu dib u xusuusanayay maragu.
   b) Qoraal kasta oo caynkaasi ah oo uu sameeyay qof kale oo uu akhriyay maragu, markuu ku dhex jiray wakhtigaa aynu soo sheeganay, haddii, markii uu maraggu akhriyay iyada, uu isagu garanayay inay ahayd sax;
   c) Hab-dhaqan mihnadeed, haddii maraggu yahay khabiir ama la taliye xaga farsamada ah.

2. Mar kasta oo maragga loo ogolaado inuu xusuustiisa dib u soo celiyo isagoo daalacanya dhukumenti ama qoraal, wuu daalac karaa nuqul dhukumantigaasi ama qoraalkaas ah, haddii asalka oo dib loo sameeyo uu kaas kaga maarmayo.

3. Maragu waxa kale oo uu cadayn karaa xaqiiqooyin ku xusan dhukumantigaa iyo qoraalkaas sida ay ugu xusan tahay Qodobkan, xataa si kasta oo aanu isagu u xusuusan xaqiiqooyinka laftooda, haddii uu isagu hubo in xaqiiqdaasi si sax ah loogu diiwaan galiyay dhokumentiga.

4. Dhukumenti ama qoraal kasta oo lagu xusay qaybaha Qodobkani waxa la keeni doonaa Maxkamadda horteeda waxaana loo sheegi doonaa dhinaca kale, haddii dhinacaasi sidaasi doono.

**Qod. 190**
**Soo bandhigida dokumaniga**

Maraga loogu yeedho inuu soo bandhigo dhukumanti ama qoraal wuxuu, haddii uu ku jiro gacantiisa ama awoodiisa ku soo bandhigayaa Maxkamadda horteeda, iyadoo diidmo kasta oo laga yaabo inay ka timaado soo bandhigida ama aqbalaadooda. Saxnimada is-hortaagaas ay Maxkamaddu go'aan ka gaadhayso, iyadoo ujeedadaas Maxakamaddu ay:

a) ku hubin karto dhukumentiga sidaasi ah fadhi Maxkamadeed oo gaar ah;
b) qaadi karto cadaymo kale oo Maxakamadda awood u siiya in xadido aqbalaadeeda;
c) amri karto turjumida dhukumentiga, iyadoo xaaladaas amraysa turjumaha in uu ilaaliyo sirnimada nuxurkooda.

**Qaybta 2aad**
Waraysiga maragga uu la yeelanayo dhinicii u yeedhay

**Qod. 191**
**Reebbbanaanta su'aalaha hoggaaminta**

1. Su'aalaha hogaaminta lama waydiin karo xilliga su'alaha tooska ah iyo su'aalaha ku celiska ah haddii aanay ogolaan Maxakamaddu.

2. Maxakamaddu waxay ogolaan kartaa su'aalaha hogaaminta marka lagu jiro su'aalaha tooska ah iyo su'aalaha ku celiska ah, keliya arrimaha hordhaca ah, ama aan laysku haysan ama kuwa, ra'yigeeda mar horeba si ku filan loo cadeeyay.

**Qod. 192**
**Su'aalaha maraga cadawga ah ama aan ogolayn**

Maxakamaddu, marka ay ku qanacdo in maragu cadow ku yahay ama aanu doonayn inuu ka jawaabo su'aalaha dhinaca u yeedhay isaga, waxa ay iyadoo fiiro iyo taxadir badan leh u ogolaan kartaa dhinaca u yeedhay maraga inuu u jeediyo su'aalo kasta oo laga yaabo in lagu waydiin lahaa su'aalaha gudban ee dhinaca kale, si waafaqsan tilmaamaha qaybta soo socota.

**Qaybta 2aad**

Waraysiga maragga uu la yeelanayo dhinaca kale

**Qod. 193**
**Ogolaanshaha su'aalaha hogaaminta**

Su'aalaha hogaaminta waxa la waydiin karaa marka lagu jiro su'aalaha gudban.

**Qod. 194**
**Su'aalaha gudban ee caddaynta qoraalka ah**

Markhaatiga waxa laga waydiin karaa su'aalo gudban oo hadal qoraal uu hore ugu sameeyay ama qoraal lagu soo bandhigay, iyadoo aan qoraalka caynkaas ah aan la tusin isaga ama loo cadayn; lakiin haddii looga jeedo in uu si kas ah u buriyo qoraalkaas, waa in loo sheegaa qoraalka ka hor qaybta qoraalka ah ee looga jeedo in uu beeniyo.

**Qod. 195**
**Su'aalaha sharciga ah xilliga su'aalaha gudban**

1. Marka maraga la waydiinayosu'aalaha gudban, waxa la waydiin karaa su'aal kasta oo u jandheedha,
   a) si loo tijaabiyo runtiisa,
   b) si loo ogaado ka uu yahay isagu iyo wuxuu yahay mansabka ama heerka uu nolosha kaga jiro,
   c) si loo ruxo sumcadiisa,

Si kastoo jawaabaha su'aashani ay toos ahaan ama si dadban u sababi karto daah furida dacwado ciqaabeed oo isaga ku lid ah ama dacwado madani oo magdhaw la xidhiidha.

2. Haddii sida su'aasha loo waydiiyo ee waafaqsan farqada hore ay la xidhiidho xaqiiq qiimo-gal u ah dacwada ay Maxkamadu amarto in maragu ka jawaabo su'alahaa si waafaqsan tilmaamaha faqradaha soo socda, waxaa la dabaqayaa tilmaamaha Qod. 200.

3. Haddii su'aasha caynkan ahi aanay la xidhiidhin mawduuc qiimo-gal ah ee ay ku wajahan tahay oo keliya in la abaaro sumcada marga, Maxakamaddu waxay go'aamin doontaa in markhaatiga lagu khasbo iyo in kale jawaab bixintaasi, iyadoo ikhtiyaarkeeda isticmaalaysa, Maxakamaddu waxay leedahay tixgelinta ahmiyadahan hoos ku qoran.

   a) su'aalaha noocaas ahi way haboon yihiin, haddii iyagu leeyihiin dabeecad muujinasa runimada cambaaraynta maraga oo aad u raadaynayaan fikirka Maxkamada ee ku wajahan sumcada maraga ee arrinka uu ka marag-furayo.
   b) su'aalaha noocaas ahi ma haboona haddii:
      i) cambaaraynta ay muujinayaan ay la xidhiidho mawduuc aad u fog waqtigan ama dabeecada ay runimada ku cambaaraynayaan aanu

raadayn ku lahayn ama ay aad u yar tahay raadintiisa fikirka Maxkamada ee sumcada maraga arrinka uu ka marag-furayo.

ii) aanay isu dhigmayn muhiimada cambaaraynta dabeecada maraga lidka ku ah iyo mihimada cadayntiisa.

Maxkamaddu markay u aragto in ku haboon tahay, waxay maraga uga digi kartaa in aanu ku khasbanayn in uu ka jawaabo su'aalaha.

4. Su'aalnaba oo sida loogu xusay faqrada hore ah, maaha in la waydiiyo maraga, haddii qofka waydiiyay aanu u hayn asbaab macquul ah, oo loogu fikiro in cambaarayntaasi aasaas adag leedahay.

5. Maxkamaddu:
   a) Way mamnuuci kartaa su'aalo kasta ama waydiin kasta oo ay u aragto xushmad daro ama fadeexadayn, in kastoo su'aalahaas ama waydiimahasi ay muujinayaa su'aal Maxkamada hortaal, haddii aanay iyagu la xidhiidhin xaqiiqooyinka taagan ama arrimaha lagama maarmaanka u ah in la ogaado si loo go'aansado inay jiraan iyo in aanay jirin xaqiiqooyinka taagani.
   b) Way mamnuuci kartaa su'aalkasta ama waydiin kasta oo u muuqda in loogu talo galay kaliya in lagu weeraro ama lagaga cadhaysiiyo ama kuwa inkastoo ay haboon yihiin laftooda, ugu muuqato Maxkamadda xadgudub aan loo baahnayn.

**Qod. 196**
**Caddaymaha is burinaya ee jawaabaha su'aalaha tijaabinta run sheegnimada**

1. Cadayn lagama bixin karo jawaabo is burinaya oo maragu ka bixiyo su'aal la waydiiyay taasoo looga jeedo oo keliya in lagu ruxo daacadnimadiisa marka laga reebo:
   a) haddii Maxakamaddu ogolaato, ama
   b) haddii:
      i) su'aalahu la xidhiidhaan xukun denbi hore loogu xukumay markhaatiga, ama
      ii) su'aalahu u jeedaan in lagu jebiyo dhex-dhexaadnimadiisa

2. Marka lagu jiro xaaladaha lagu xusay xarafaha a) iyo b) ee farqada hore cadayn is-burinaysa waa la bixin karaa.

**Qod. 197**
**Eedaynta aaminaadda markhaatiga**

Kalsoonida markhaatiga waa ku cambaarayn karaa dhinicii u yeedhay maahee dhinaca kale ama, marka ay Maxkamaddu u ogolaato, dhinaca u yeedhay isaga:
   a) cadayn dad ka marag kaca aqoonta shaqsiga ah ee ay u leeyihiin markhaatiga ay ku yaqaaniin in aanay wanaagsanayn aaminaadiisu;
   b) cadaynta in markhaatigaasi, si uu u bixiyo maragfur:
      i) ay sabab u ahayd ama uu ku cadaadiyay ruux kale in uu siiyo ama u soo bandhigo in uu siinayo, isaga ama ruux saddexaad wax laaluush ah ama musuq kale oo dhiiri galin ah, ama

ii) la ogolaaday balanqaadka laaluush ama qalqaalo musuq kale;

c) cadaynta badheedhayaal hore, oo khilaafsan qayb maragfurka ah, taasoo uu mudan karo in uu buriyo.

d) marka nin lagu oogay:

   i) ama isku day oo ah xadgudub kufsi, ama

   ii) ama iskuday lidku ah cabiidsasho ama galmo u haysasho; gabadh ka wayn da'da 16 sanadood, cadayn lagu bixiyo in guud ahaan dhaqankeedu uu xumaa.

## Qaybta 4aad

Su'aalaha ay maxakamaddu waydiinayso maragga

### Qod. 198
### Ikhtiyaarka iyo awoodaha maxkamadda

Maxakamaddu si ay u daahfurto ama u hesho sugnaanshe cad oo la xidhiidha xaqiiqada:

a) way waydiin kartaa su'aalkasta oo ay jeclaysato, qaab kasta oo ay u taal, xilli walba marka laga reebo arrimaha ku xusan qodobada 173, 174, 175, 176, 177, 178 iyo 200, marag kasta ama dhinacyada, taasi oo ku saabsan xaqiiqo kasta oo la xidhiidha mawduuca ama aan mawduucaba khusaynin;

b) way amri kartaa soo bandhigida, ama baadhista dhokumantiyo, walxo ama goobo iyo qaadida talaabo kasta oo ay u aragto inay ku haboon tahay, oo ay munaasibna ay u tahay dabool ka qaadida ama helitaanka daliilo munaasib ah.

## Qaybta 5aad

Xoojinta daliilka

### Qod. 199
### Denbi wada gelid

Dadka ka wada qayb qaatay, way ka noqon karaan marag dacwada.
Si kasta oo ay tahay, Maxakamaddu kuma xukumi karto qof eedaysane, iyadoo sal uga dhigaysa marag-fur uu bixiyay qof la eedaysan, haddii aanay xoojin cadaymo kale.

### Qod. 200
### Su'aalaha u Janjeedha in ay xoojiyaan xaqiiqo qiimo-gal ah

Marka ay lagama maarmaan tahay ama la rabo in la taageero cadayn marag, kaasoo ka marag furay xaqiiqo qiimo-gal ah, waa laga waraysan karaa arrin kale oo la xidhiidha oo uu kula kulmay goobtaa ama waqtigaa ama ku dhowayd dhacdadaa qiimo-galka ah dhicitaankeeda, haddii Maxakamaddu u aragto duruufaha caynkan ah in haddii la suggo, ay taageerayaan cadaynta maragu uu ka bixiyay arrintaa la xidhiidha xaqiiqada qiimo-galka ah ee uu cadeeyay.

### Qod.201
### Hadal qoraal hore oo maragyo xoojiyayaal ah

Si loo xoojiyo cadayn maragyo, hadal qoraal hore oo la xidhiidha xaqiiqo la mid ah oo ay sameeyeen maragyadaasi:

a) oo ahaa ama u dhawaa ama qiyaastii wakhtiga marka xaqiiqadu ay meesha ka dhacday; ama
b) hortooda maamul sharci ahaan awood u lahaa baadhitaan xaqiijin ah.

Waa la cadayn karaa.

## Qaybta 6aad
Qiimaynta caddaymaha iyo go'aannada ay ku oggolaanayso caddaymaha

### Qod. 202
### Ku go'aan qaadashada miisaanka cadaymaha

Maxakamaddu waxay go'aan qaadanaysaa miisaanka cadaymaha la keenay.

### Qod.203
### Aqbalaadda caddaymaha

1. Maxakamaddu waxa kaliogolaanaysaa oo keliya in cadayn la bixiyo, markuu sharcigu ogol yahay in laga cadeeyo dhegaysiga dacwada.

2. Haddii qiimo-galnimada xaqiiqo muran ay ku xidhan tahay xaqiiqo kale oo muran oo ay tahay in iyada la hor cadeeyo, Maxkamadu waxay awoodeeda ku ogolaan kartaa bixinta cadaynta dhacdada hore ama in la bixiyo cadaynta dhacdada labaad intaan tan hore la cadayn.

### Qod.204
### Oggolaanshaha aan haboonayn ama diidmada caddaynta

Ogolaanshaha aan haboonayn ama cadaymaha la diidaa ma noqon karaa sabab dhegaysiga loo cusboonaysiiyo ama loo tirtiro go'aan dacwadeed, haddii Maxkamada laga hor oogay is-hortaagaa ay u muuqato:

a) Si ka madaxbanaan cadaymaha la hor joogsaday iyo kuwa la ogolaaday ay cadaymaha kale ku filaayeen in xukun lagu gaadho. Ama
b) Haddii cadaymaha la diiday helitaankoodu aanu waajib ka dhigayn bedelaada xukunka.

## Qaybta 7aad
Qaybaha guud

### Qod. 205
### Jawaabaha is eedaynta

1. Markhaatiga waa ku waajib ah inuu ka jawaabo su'aalo walba oo dhinac u jeediyo ama Maxakamaddu ku amarto in uu ka jawaabo, xataa haddii jawaabaha su'aalahani ku daah-furayaan isaga dacwad ciqaab ah ama, si toos ah ama si aan toos ahayn, ugu keenayso talaabo madani oo magdhow khasaare ah.

2. Jawaabnaba, oo markhaatiga lagu khasbay inuu u bixiyo si waafaqsan faqrada hore ee qodobkan, waxay ku keeni doonto isaga in la xidho ama lagu oogo dacwad, ama loo adeegsado cadayn dhan ka dhan ah, oo dacwad ciqaaba, marka laga reebo dacwad marag beenaalenimo oo ka timi jawaabtiisa.

### Qod. 206
### Shuruudaha la Xidhiidha su'aalaha gudban ee eedaysanaha

Eedaysanaha:

a) lama waydiinayo su'aalo gudban marka uu jeediyo hadal dhaar la'aana sida waafaqsan xarafka b) ii) ee farqada 1 ee Qodobka 116;
b) waxa la waydiin karaa su'aalo gudban marka hadal laga qaado isagoo dhaarsan si waafaqsan xarafka b) i) ee farqada 1 ee Qodobka 116, marka kaliya hadafku yahay mid lagu hubinayo runnimada cadayntiisa.

### Qod. 207
### Turjumaannada

1. Maxkamadda ayaa magacabaysa turjumaan, laga soo doortay, haddii ay suurtoobayso, dad badan oo dhinacyadu dhexdooda isla waafaqaan:
   a) marka dhukumanati ku qoran luqad shisheeye la soo turjumayo;
   b) marka qofka laga doonayo in uu hadal jeediyo ama cadayn bixiyo aanu fahmayn luqada Maxkamada lagaga hadlayo;
   c) xaalad kasta oo kale markay lama huraan tahay ama Maxkamadu u aragto in loo baahan yahay.

2. Gudashada waajibka turjumidu waa khasab, kharashkana waxaa laga bixinayaa khasnada Dawlada.

3. Inta aanu gudashada waajibaadkiisa bilaabin, turjumanku wuxuu gudanayaa dhaarta ama xaqiijinta ku xusan Qod. 82, in uu hawshiisa u gudanayo si daacadnimo ah oo ku xaqiijinayo runta.

4. Marka hawsha turjumanku tahay in la turjumo qoraal waqti dheer qaadanaya, Maxkamadu waxay dejin kartaa waqti xadidan oo uu turjumaanku ku soo gudbinayo

qoraalka la tarjumay, iyadoo waqtigaa kordhin karta marka ay u muuqato sababo caqli gal ah oo sidaa loo yeelaa.

5. Waxaa la dabaqayaa tilmaamaha Qod. 161, inta laga dabaqi karo.

## BUUGGA AFARAAD
Racfaannada iyo fulinta

## CINWAANKA 1AAD
Racfaannada

### Cutubka 1aad
Tilmaamo guud

### Qod. 208
### Nidaam Guud

1. Sharcigaa qeexaya xaaladaha talaabooyinka garsoor racfaan mudan yihiin, wuxuu kaloo qeexayaa dariiqooyinka racfaanadaas loo samaynayo.

2. Xaqa racfaanku wuxuu ku xadidan yahay dhinacaas ama dhinacyadaas uu sharcigu si cad u sheegay.

3. Dhinaca dan u leh oo keliya ayaa leh xaqa racfaan qaadashada.

4. Dacwad kasta:
   a) Eedaysanuhu kama racfaan qaadan karo xukunka denbiilenimadiisa ee uu isagu u qirtay denbiilenimadaas si waafaqsan tilmaamaha xeerkan.
   b) Dhinac racfaan kama qaadan karo amar dacwada lagu oodayo oo lagu soo saaray codsigiisa si waafaqsan tilmaamaha xeerkan.
   c) Xeer-ilaalintu ma qaadan karto racfaan lid ku ah amar oodis dacwadeed oo lagu soo saaray ka talo galin aanay xeer-ilaalintu is hortaagin soo saarista amarkaa si waafaqsan tilmaamaha xeerkan.

5. Racfaanada waxaa lagu nidaaminayaa tilmaamaha xeerka Nidaamka Garsoorka, haddii aan xeerkan si kale loogu sheegin.

### Qod. 209
### Racfaanka eedaysanaha

1. Ee/sane waa u racfaan qaadan karaa shakhsi ahaan ama iyadoo ay u qaadayaan wakiiladiisa gaarka ahi.

2. Marka la soo saaro xukun Dil ah, qareenka ee/sanaha dacwada ka difaacayay, wuu u qaadi karaa racfaan, isagoo aan haysan igmasho gaar ah, xataa haddii aanu sidaa doonayn qofka la xukumay.

3. Waalidka caruurta yar-yar iyo wakiiladooda qaanuuneed ee xanaanooyinku, xataa haddii aanay lahayn xaqa gaadhsiinta xukunka way u qaadi karaan racfaan.

4. Marka laga reebo xaalada faqrada 2aad ee qodobkan, ee/sanuhu waa tirtiri karaa racfaan uu u qaaday qof kale isaga dartii, isagoo ogaysiinaya Maxkamada in aanu rabin in racfaankaas loo qaado.
   Haddii ee/sanuhu yahay caruur ama qof karti laawe ah, waalidka ama wakiilka qaanuuneed ayaa bixinaya, ogolaanshaha saxnimada racfaanka.

5. Haddii qofka ee/sanaha ah ama qof kale ogolaado sidan, oo si waafaqsan tilmaamaha qodobka loo gudbiyo racfaano, kuwaas oo midkood noqdo mid aan sax ahayn, kan saxa ah iyo asbaabtiisa ayaa lagu dhaqmayaa, haddii khilaaf ka soo dhex baxo racfaanada la gudbiyay ka nee/sanuhu gudbiyay ayaa mudnaanta leh.

**Qod. 210**
**Racfaannada xeerilaalinta**

1. Racfaan wuu qadimi karaa xafiiska Xeer-ilaaliyaha guud ama qofka dacwada uga wakiil ahaa, si waafaqsan, tilmaamaha Qod.12 faqradiisa 2 aad.

2. Haddii Xeer-Ilaaliyaha guud, ku xigeenadiisa ama wakiiladiisu ay qadimaan racfaan, racfaanadaasna midkood noqdo mid aan sax ahayn, waxaa saxaya racfaanka kale ee saxa ah, iyadoo sababuhu noqonayaa kuwa kan saxda ah, haddii racfaanadaasi is-khilaafaan, ka uu gudbiyay Xeer-Ilaaliyaha guud ama ku xigeenadiisu ayaa mudnaanta yeelanaya.

**Qod. 211**
**Racfaannada dhinacyada kale**

Dhinacyada kale way qadimi karaan racfaan shakhsi ahaan ama iyagoo ay u qadimayaan wakiiladooda gaarka ah.

**Qod. 212**
**Qaabka racfaannada**

Racfaanada waxaa loo qadimayaa si ogaysiin ah, kaasoo noqon kara af ahaan, waana in ay ku xusan yihiin:

a) Amarka garsoor ama xukunka racfaanka la qadimayaa lidka ku yahay.
b) Taariikhda amarkaas ama xukunkaas.
c) Hay'ada garsoor ee soo saartay.
d) Dacwada laga racfaan qaadanayo.

**Qod. 213**
**Qabashada ogaysiinta racfaanada**

1. Ogaysiinta racfaanka waxaa loo gudbinyaa kaaliyaha Maxkamada soo saartay amarka ama xukunka laga racfaan qaadanayo; ogaysiinta waxaa kaloo loogu gudbin karaa kaaliyaha warqad diiwaangashan ama telegaram ama waxaa la keenayaa xafiiska Boosta ama telegaramada, waqtiga cayiman ee ku qeexan Qod.14, dhexdiisa.

2. Haddii qofka racfaanka qaadanayaa xidhan yahay, ogaysiinta racfaanka waxaa loo dirayaa maamulka haya qofka xidhan, maamulkaasina waa in uu markiiba u gudbiyaa ogaysiinta racfaanka kaaliyaha Maxkamada xukunka ama go'aanka laga racfaan qaadanayo soo saartay.

3. Kaaliyuhu wuxuu ku xidhayaa ogaysiinta racfaanka galka dacwada, ka dib markuu qoro taariikhda uu qabtay ogaysiinta racfaanka ee uu saxeexo.

**Qod. 214**
**Waqtiga ogaysiinta racfaan ku xaddidan yahay**

1. Waqtiga uu ku xadidan yahay gudbinta ogaysiinta racfaanku waa:
   a) 30 casho, haddii racfaanku lid ku yahay xukun oo ka bilaabanaysa maalintii xukunkaa lagu dhawaaqay.
   b) 15 casho, haddii racfaanku lid ku yahay go'aan kale oo garsoor oo ka bilaabanaysa:
      i) Maalinta la soo saaray go'aankaas, iyadoo dhinacyadu goob-joog yihiin.
      ii) Dhinacyada aan joogin la gaadhsiiyay

2. Maxkamada Sare iyo Maxkamada racfaanku way ku kordhin karaan go'aan ay qolka tashiga ku qaataan, waqtiga gudbinta racfaanada lidka ku ah xukumada ama go'aamada Maxkamadaha hoose, markay xaqiijiyaan in aan ee/sanuhu waqtiga u xadidan gudbinta racfaanka ku gudbin kari waayay sababo ka baxsan awoodiisa; iyadoo ilaa xadka ay dabaqmi karaan tilmaamaha faqradaha 2&3 ee Qod. 223 la dabaqayo.

**Qod. 215**
**Gaadhsiinta racfaanka XeerIlaalinta**

1. Ogaysiinta racfaan ee Xafiiska Xeer-Ilaalinta, ee/sanaha waxaa lagu gaadhsiinayaa 30 casho gudahood oo ka bilaabanaysa maalinta kaaliyaha Maxkamada loo gudbiyay qabtay ogaysiinta, haddii kale ogaysiintu waa baaba'a.

2. Gaadhsiinta racfaanka waxaa loo samaynayaa si waafaqsan faqrada 5, ee Qod. 80, iyadoo la siiyay haddii ay suuragal noqon waydo gaadhsiintu sida waafaqsan faqradaha 2,3 & 4, ee Qod. 51, waxaa loo qaadanayaa in la gaadhsiiyay ogaysiinta ee/sanaha iyadoo la dhigayo nuqulada asalada ah midkood si uu ugu gudbiyo

ee/sanaha kaaliyaha Maxkamada go'aanka ama xukunka laga racfaan qaadanayo soo saartay.

**Qod. 216**
**Asbaabta racfaanka**

1. Asbaabta racfaanku waa in ay sharci ku dhisan tahay.

2. Asbaabta racfaan waa in ay cayiman tahay, haddii aanay cayinayn lama ogolaanayo; asbaabta racfaanku waa ku dhex jiri kartaa ogaysiinta racfaan, haddii kale asbaabta racfaanka waa in lagu keenaa qoraal uu saxeexay qofka racfaanka qaadanayaa ama wakiiladiisa gaarka ah ama qareenkiisa, waqtiga lagu sheegay Qod. 214 gudihiisa. Dhinacyadu way gudbin karaan qoraalo sharaxaad ah, asbaab dheeraada, xataa marka uu dhaco waqtiga la sheegay.

3. Ilaa inta la dabiqi karo tilmaamaha Qod. 213 iyo faqrada 2 ee Qod.214, ayaa la dhawrayaa.

**Qod. 217**
**Dabaqaadda racfaanka dad badan**

1. Marka laba qof ama dad badan lagu eedeeyo ka wada qayb qaadashada denbi keliya oo dacwad loo wada dhegaysto, ogaysiinta racfaan ee hal ee/sane iyo asbaabta racfaankaas, haddii aan racfaanka iyo ogaysiinta si gooni ah loogu dabaqin halkaas qof, waxaa iyana loo dabaqayaa ee/sanaha ama ee/sanayaasha kale.

2. Marka hal dacwad la isugu keeno denbiyo kala duwan, ogaysiinta racfaan waxay saamaynaysaa dhammaan ee/sanayaasha kale, haddii asbaabta racfaanku ku wajahan tahay xadgudub hab raac oo aanay si gooni ah ugu wajahnayn ee/sanha soo racfaan qaatay.

3. Haddii racfaanku noqdo mid aan la aqbalin ama laga noqdo, si waafaqsan Qod. 221, aqbalid la'aanta ama ka noqoshada waxaa lagu dhaqayaa ee/sanayaasha kale sida ku sheegan faqrada hore.

**Qod. 218**
**Hawsha racfaanka iyo joojinta fulinta**

1. Haddaan si kale loogu sheegin sharciga, marka lagu jiro waqtiga u xadidan racfaan qaadashada iyo waqtiga lagu jiro dhegaysiga dacwada racfaan, fulinta go'aan ama xukunkasta waa laalaanayaa.

2. Si kastaba:
   a) Talaabo kasta oo la xidhiidha xoriyada qofka waa in isla markiiba la fuliyaa.
   b) Markasta oo ee/sane uu dammaanad ku jiray, Maxkamada ku dhawaaqday xukunka ama Maxkamada racfaanka loo qaatay, way ka noqon kartaa

dammaanadii, haddii xadiga dammaanadeed ama balanqaadka kale loo arko mid aan u dhigmayn ciqaabta la saaray.

### Qod. 219
### Racfaanka lidka ku ah amarrada iyo qaraarrada dhegaysiga dacwadda ka hor ama dhexdeeda.

Marka laga reebo in sharcigu si kale u sheego:

a) Amarada iyo go'aamada la sameeyo ka hor dhegaysiga waxaa laga racfaan qaadan karaa oo keliya hadii ay dacwada nidaaminayaan.
b) Amar kasta ama go'aan kasta oo la sameeyo dhegaysiga dhexdiisa, waxay u bandhigan yihiin racfaan in lala qaato xukunka dacwada oo keliya ama marka ay dacwada oodayaan, iyadoo la siiyay in uu rabitaanka racfaan qaadasho ogaysiiyo Maxkamada isla marka go'aankaas ama amarkaas la soo saaro.

### Qod. 220
### Racfaannada khuseeya khasaaraha madani

1. Racfaanada dacwadaha ciqaabta ah ee dhibanaha ama ee/sanaha ee lidka ku ah khasaaraha madani ee lagu soo saaro si waafaqsan Qod. 131, waxaa keliya oo la ogolaanayaa marka racfaanka lidka ku ah xukunka ama siidaynta uu qadimo ee/sanaha ama xafiiska xeer-ilaalinta.

2. Racfaanka lidka ku ah xukunka ee khasaaraha madaniga, waxaa lagu nidaaminayaa tilmaamaha xeerka madaniga ilaa inta ay dabaqmi karaan marka:
   a) Aanay qadimin wax racfaan ah oo lid ku ah xukunka ama siidaynta ee/sanaha ama xeer-ilaalintu;
   b) Racfaanku noqday mid aan la aqbalin ama mid uu ka noqday dhinicii soo qadimay, si waafaqsan Qod. 221.

3. Marka aan racfaan laga ogolayn dacwada ciqaabta ah, waqtiga u xadidan racfaanka loo qaadanayo Maxkamada madani ee ku saabsan xukunka inta ka khusaysa khasaaraha madani wuxuu ka bilaabanayaa.
   a) Maalinta xukunku noqday kama danbays aan laga noqon karayn, xaaladaha hoos imanaya tilmaamaha xarafka (a) ee faqrada hore.
   b) Midkood maalinta lagu dhawaaqay aqbalid la'aanta racfaanka ama maalinta racfaankaas laga noqday, xaaladaha hoos imanaya tilmaamaha xarafka (b) ee faqrada hore.

4. Xukunka ku saabsan khasaaraha madani, waxaa loo qaadanayaa in si iskeed ah looga noqday, haddii natiijada ee/sanaha la siidaayay ama la soo saaro go'aan dacwada lagu oodayo, iyadoo la ogolaaday in dacwad madani oo ku saabsan khasaaraha madani laga furan karo Maxkamad madani; marka dacwad furashadaasi aanay dhaawacayn dabeecada ama nuxurka go'aanka Maxkamada ciqaabta ah.

**Qod. 221**
**Ka noqoshada racfaanka**

1. Dhinac waa ka noqon karaa racfaan qaadashada, ka noqoshada racfaanka waxaa lagu samaynayaa qoraal loogu gudbiyo kaaliyaha Maxkamada soo saartay xukunka ama go'aanka laga racfaan qaatay ama kaaliyaha racfaanka loo qaatay, waxaaa kaloo racfaanka lagaga noqon karaa fadhiga dhegaysiga dacwada racfaanka, waana in garmaqalka lagu diiwaangeliyaa.

2. Haddii racfaanka uu qadimay xeer-Ilaaliyaha guud ama mid ka mid ah ku xigeenadiisa, lagama noqon karo haddii aan la helin ogolaanshaha hore ee Xeer-Ilaaliyaha guud.

**Qod. 222**
**Gudbinta dukumentiga ku xidhan racfaanka**

Ka dib marka ay dhammaato waqtiga racfaanka ee la xadiday, kaaliyaha Maxkamada soo saartay xukunka ama go'aanka laga racfaan qaadanayo, wuxuu daahid la'aan ugu dirayaa kaaliyaha Maxkamada racfaanka loo qaatay, nuqulka gal-dacwadeedka iyo go'aanka laga racfaan qaatay iyo ogaysiinta iyo asbaabta racfaanka iyo weliba dhukumenti kasta ama qoraalkasta oo dacwada khuseeya.

**Qod. 223**
**Aqbalid la'aanta racfaanka**

1. Marka**:**
   a) Racfaanka uu qadimo:
      i) qof aan lahayn xaqa racfaan qaadasho ama qof aan racfaankaas wax dan ah ku lahayn.
      ii) Uu lid ku yahay go'aan aan mudnayn in racfaan laga qaato
   b) Ogaysiinta iyo Asbaabta racfaan qaadasho aan loo soo bandhigin qaabka, waqtiga iyo goobta loo cayimay.
   c) Aan la samayn gaadhsiinta la'aanteed racfaanku noqonayo baaba'a
   d) Racfaanka laga noqday.
   e) Sharcigu si cad u qeexay aqbalid la'aanta racfaanka.

Maxkamada racfaanka loo qaatay waxay qolka tashiga ku faaqidaysaa qolka tashiga, ka dib markay siiyaan dhinaca racfaanka soo qaatay, markay lama huraan noqoto, waqti munaasib ah oo uu ku soo bandhigosababihiisa oo qoraaala, codsiyada iyo difaaca, haddii ay helaan in racfaanku yahay mid aan la aqbalin, sidaa ayay ku dhawaaqaysaa, waxayna amraysaa in xukunka racfaanku lidka ku yahay la fuliyo.

2. Go'aanka in aan racfaanka la aqbalin waxaa la ogaysiinayaa dhammaan dhinacyada danta ku leh iyo Xeer-Ilaaliyaha guud, racfaanka go'aankaas ku lidka ahna waxaa loo gudbin karaa Maxkamada Sare.

3. Gaadhsiinta waxaa loo samaynayaa sida lagu sheegay faqrada 2, ee Qod. 215.

**Qod. 224**
**Aqbalida maxkamadda ee ogaysiinta racfaanka**

1. Racfaanka Maxkamadu qaadato in la dhegaysto, waxay ka aqoonsanaysaa qaybaha go'aanka ama xukunka lagu muransan yahay ee racfaanku ku salaysan yahay, marka laga reebo xaaladaha ku sheegan Qod. 107.

2. Waqtigaa gudihiisa iyo haddii uu soo qadimay racfaanka:
   a) Xeer-Ilaaliyaha Guud:
      i) Racfaankuna lid ku yahay xukun, Maxkamadu waxay ku dhawaaqi kartaa ilaa xadka ikhtisaas ee Maxkamada derejada 1 aad, in denbigu ka duwan yahay ka lagu soo oogay, xataa haddii denbigan cusubi ka culus yahay kii hore loogu eedeeyay ama ay bedelayso ama kordhinayso ciqaabta, lagala noqonayo faa'iidooyin hore loo siiyay, waxay kaloo ku dabiqi kartaa talaabooyin ammaan ama qodobo kale oo la saaray ama uu sharcigu ogolaaday.
      ii) Racfaanku lid ku yahay siidayn, Maxkamadu waxay soo rogi kartaa, xukun ay ciqaabta la dabaqdo iyo talaabooyinka kale ee ku sheegan faqrada hore ee qodobkan.
   b) Maxkamadu dhinaca ee/sana oo keliya kuma saari karto ciqaab ka culus ama ka dheer waqti ahaan, kalamana noqon karto faa'iidooyin hore loo siiyay, waxaase la siiyay Maxkamada in markay dhegaysato xafiiska xeer-ilaalinta ay kordhin karto ciqaabta ilaa xadka ugu sareeya, haddii maxkamada hoose saartay ciqaab ka yar xadka ugu hooseeya ee ku sheegan xarafka {(a),i}ee faqradan, wayna ku dhawaaqi kartaa in denbigu ka duwan yahay kan laga soo racfaan qaatay, xataa haddii ka danbe ka culus yahay kii hore, marka denbiga danbe noqonaya ikhtisaaska Maxkamadii hoose ee soo saartay xukunka.

**Qod. 225**
**Dhegaysiga racfaanka**

1. Haddii aan sharcigu si ka duwan u sheegin, racfaanada waxaa Maxkamad furan lagu dhegaysan karaa oo keliya, markay lidka ku yihiin xukumada ama qaraarada dacwada lagu oodayo ee ka soo baxay dhegaysiga dacwada.

2. Racfaanada kale ee lidka ku ah go'aamada kale, Maxkamada awooda u lihi waxay kaga go'aan qaadanaysaa qolka tashiga, ka dib marka la siiyo dhinacyada danaynaya waqti macquul ah oo ay qoraal ku soo bandhigaan asbaabtooda, codsiyadooda, is-hortaagyadooda iyo asbaabahooda difaac.

3. Markay maxkamadu samaynayso go'aankeeda ku saabsan racfaanka lidka ku ah xukumada khuseeya khasaaraha madani, ilaa inta dabaqmi karta waxaa la ilaalinayaa tilmaamaha Qod. 130, 131.

### Qod. 226
### Ka tanaasulidda xaqa ka qaybgalka dhegaysiga racfaanka

1. Eedaysaha iyo dhinaca dhibanuhu marka ogolaato Maxkamada awooda u leh dhegaysiga racfaanka, waxay ka tanaasuli karaan xaqa ay u leeyihiin ka soo qayb-galka dhegaysiga racfaanka.

2. Ku guuldaraysiga imaanshaha ee/sanaha iyo dhibanaha ee dhegaysiga racfaanku ma joojinayso dhegaysiga dacwada marka:
   a) Marka aanu jirin cudurdaar macquula ka soo qayb-gal la'aantoodu iyo
   b) Aanay u arag Maxkamadu lama huraan ka soo qayb-galkooda.

Iyadoo la ogolaaday si kasta oo ay tahay tilmaamaha la xidhiidha difaaca ee/sanha ee xaaladaha ku sheegan xarafka (b) ee faqrada 2, ee Qod.14 Xeerka Nidaamka Garsoorka la dhawrayo.

## Cutubka 2aad
Racfaanada

### Qaybta 1aad
Tilmaamo guud

### Qod. 227
### Arrimaha racfaanka laga qaadan karo iyo asbaabaha racfaan

1. Marka lagu daro xaaladaha lagu daboolay xeerar gaar ah, waa la qadimi karaa racfaan lid ku ah xukun iyo talaabooyinka kale ee Maxkamadaha dereja 1 aad, sida ku dhigan faqradahan soo socota.

2. Marka aan si kale loogu sheegin cutubka 1 aad, ee qaybtan, waxyaabahan soo socda waa laga racfaan qaadan karaa:
   a) Racfaan lid ku ah siidayn ama xukun:
      i) Eedaysanaha marka la xukumo ama la siiyo cafis garsoor ama marka lagu dabaqo talaabooyin ammaan.
      ii) Xeer-Ilaalinta guud marka ee/sanaha la siidaayay ama la xukumay.
   b) Racfaan lid ku ah qaraar dacwada lagu ooday.
      i) Eedaysanaha marka talaabooyin ammaan lid ku ah lagu dabaqay
      ii) Xeer-Ilaalinta guud
   c) Racfaan lid ku ah talaabooyin khuseeya xoriyada qofka
      i) Eedaysanaha
      ii) Xeer-Ilaalinta guud
   d) Racfaanada lidka ku ah xukumada khuseeya khasaaraha madaniga.
      i) Eedaysanha
      ii) Dhinaca dhibanaha
   e) Racfaan lid ku ah saarista ciqaabta hoos yimaada tilmaamaha faqrada 2, ee Qod. 16 ee qareenka sidaa loo xukumo.

3. Racfaan waxaa lagu ogolaan karaa asbaab xaqiiqo iyo asbaab xeer

**Qod. 228**
**Maxkamadaha racfaan dhegaysan karta**

Maxkamada racfaanka ayaa ikhtisaas u leh dhegaysiga racfaanka:

a) Qaybta racfaanada guud ee Maxkamada racfaanku waxay ikhtisaas u leedahay
    i) Go'aamada lagu sheegay Qod. 223
    ii) Xukumada ay soo saartay qaybta ciqaabta Maxkamada Degmada iyo qaybta ciqaabta guud ee Maxkamada Gobolka iyo weliba go'aan kasta oo ay soo saaraan qaybahaasi oo ay dacwada ku oodayaan.
    iii) Amarka in aan dacwad la oogi Karin ee Maxkamad kastaa soo saarto dhegaysiga dacwada ka hor.
    iv) Arrimaha hoos yimaada xarfaha (c) & (e) ee faqrada 2, ee Qod.227
b) Qaybta tashiga ee Maxkamada racfaanku waxay ikhtisaas u leedahay racfaanada ku saabsan xukumada ay soo saarto qaybta tashiga Maxkamada Gobolka iyo amar kasta oo dacwada lagu oodayo oo qaybtaasi soo saarto.

**Qod. 229**
**Go'aamada maxkamada racfaanka**

1. Maxkamada racfaanku:
    a) Haddii racfaanku lid ku yahay go'aamada ku cad xarfaha {(a),ii}& (b), ee Qod.228, waxay go'aaminaysaa dulucda dacwada ka dib marka ay samayso dhegaysiga ku tilmaaman qaybta II ee cutubkan; iyadoo la ogolaaday in haddii Maxkamadda Racfaanka ay u cadaato in aanay iyadu ikhtisaas u lahayn dhegaysiga dacwada ama ay cadaato xukunkii Maxkamada derejada 1 aad yahay baaba'a, markaa waxay ku dhawaaqaysaa in dacwada dib loogu celiyo Maxkamada awooda u leh si loogu soo dhegaysto.
    b) Haddii racfaanku lid ku yahay go'aamada ku cad xarfaha {a(iii)} ee Qod.228, waxay qolka tashiga ku ayidaysaa ama ku tirtiraysaa go'aanka racfaanku lidka ku yahay, si waafaqsan faqrada 2 aad ee Qod. 225, haddii go'aanka la tirtiro, waxay amraysaa in dacwada loo gudbiyo maxkamada awooda u leh.
    c) Dhammaan xaaladaha kale waxay kaga go'aan qaadanaysaa dulucda racfaanka qolka tashiga, sida waafaqsan faqrada 2 aad ee Qod.225, iyadoo markaa go'aanka laga soo racfaan qaatay ayidaysa ama tirtiraysa ama wax ka bedelaysa.

2. Go'aanka Maxkamada racfaanka waa la baahinayaa:
    a) Iyadoo loogu akhriyayo qaybta wax kala jaraysa (gunaanadka) ee go'aanka Maxkamad furan, xaaladaha lagu sheegay xarafka (a) ee faqrada hore.
    b) Iyadoo la dhigayo go'aanka kaalinta Maxkamada dhammaan xaaladaha kale

3. Nuqul go'aanka Maxkamada racfaanka ah wuxuu kaaliyuhu u dirayaa Maxkamadii xukunka laga soo racfaan qaatay soo saaratay, sidoo kale kaaliyaha maxkamadu wuxuu go'aanka gaadhsiinayaa dhinacyada uu khuseeyo, sida lagu sheegay faqrada 2 aad ee Qod. 215, waana in la gaadhsiiyo xafiiska xeer-ilaalinta marka aanay goob-joog ahayn ku dhawaaqistiisii.

**Qaybta 2aad**

Dhegaysiga racfaannada

**Qod. 230**

**Dabiqida habraaca maxkamada derejada 1aad ee dhegaysiga hordhaca ee racfaanka**

1. Tilmaamaha la xidhiidha dhegaysiga dacwada ee Maxkamada derejada 1 aad ayaa loo raacayaa dhegaysiga racfaanka ilaa xadka ay dabaqmi karaan.

2. Marka ay tahay in racfaan la dhegaysto Gudoomiyaha Maxkamadu wuxuu:
   a) cayimayaa taariikhda dhegaysiga
   b) Amrayaa ka soo qayb-galka dhegaysiga ee:
      i) Ee/sanaha marka uu racfaanle yahay
      ii) Ee/sane aan racfaanle ahayn, haddii racfaanka uu soo qadimay xafiiska xeer-ilaalintu ama loo sameeyay racfaanka si la xidhiidha xaaladaha ku sheegan Qod. 217 midkood.
   c) U magacaabaysaa ee/sanaha qareen xaaladaha ku xusan xarafka (b), faqrada 2 ee Qod. 14 XNG, marka ee/sanuhu aanu qareen lahayn, iyadoo ee/sanaha iyo qareenkiisa ku wargelinaysa mudadaas.
   d) Amraysaa in dhibanaha loogu yeedho dhegaysiga haddii ee/sanaha ama dhibanuhu ka soo racfaan qaateen khasaaraha madani.
   e) Amraysaa in Xeer-Ilaaliyaha la gaadhsiiyo mudada.

3. Muddada dhegaysiga, ee/sanha, qareenkiisa iyo xeer-ilaalinta waxaa la ogaysiinayaa ugu yaraan (15) casho ka hor maalinta dhegaysiga.
   Ilaa xadka ay dabaqmi karaan waxaa la dhawrayaa tilmaamaha faqrada 5 aad ee Qod. 80 & 89.

**Qod. 231**

**Dhegaysiga racfaanka**

1. Ka dib marka la furo fadhiga dhegaysiga racfaanka, racfaanlaha ayaa faahfaahinaya asbaabtiisa racfaanka, ka dibna dhinaca kale ayaa la siinayaa fursad uu kaga jawaabo, dhinacyadu way samayn karaan soo jeedimo, tusmayn, way oogi karaan is-hortaagyo, way soo bandhigi karaan dalabyo iyo codsiyo ay u arkaan wax-tar, iyagoo aragtidooda ka soo jeedinaya arrimo xeer iyo xaqiiqo oo ay aaminsan yihiin in Maxkamadu ogolaanayso, xaqa ka jawaab celinta waxaa lagu adeegsan karaa oo keliya ogolaanshaha Maxkamada. Haddii dhinacyadu dacwad keliya ka soo wada racfaan qaataan, kan ee/sanha ayaa ugu danbayn la dhegaysanyaa; tilmaamaha Qod.119 ayaa la dabaqayaa ilaa xadka ay dabaqmi karaan.

2. Haddii racfaanku lid ku yahay xukun ama siidayn, oo ay Maxkamadu u aragto in aanay kaga go’aan qaadan karayn cadaymaha horyaal, waxay amri kartaa, xataa iskeed:
   a) In dib loo dhegaysto dacwada dhammaanteed ama qaybteed;

b) In ay su'aalo waydiiso maragyo derejadii hore lagu soo dhegaystay, kuwaas oo laga yaabo in ay cadeeyaan arrimo aan hore loo tixgelin;
c) Ay qaado cadaymo cusub;
d) Ay dib u dhegaysato maragyo khabiir.

3. Haddii racfaanku lid ku yahay amar dacwada lagu ooday oo Maxkamadu u aragto in racfaanku ku salaysan yahay asbaab sax ah, Maxkamadu waxay dhinac isaga leexinaysaa go'aanka la duray, iyadoo ama amraysa in ay dacwada iyadu dhegaysato si waafaqsan tilmaamaha Buugga 2 aad ee Xeerkan, ama waxay ee/sanaha u garsugaynaysaa dhegaysiga Maxkamadii soo saartay go'aanka laga soo racfaan qaatay.

**Cutubka 3aad**

RacfaanNada maxkamadda sare

**Qod. 232**

**Arrimaha racfaan Maxkamada Sare loogu qaadan karo**

1. Marka lagu daro xaaladaha lagu aasaasay tilmaamo gaar ah iyo kuwa hoos yimaada tilmaamaha cutub I ee qaybtan, racfaan Maxkamada Sare waxaa u qaadan kara:
   a) Dhinacyada ku xusan faqrada 2 aad ee Qod. 227, racfaan ku lid ah talaabo kasta ama go'aankasta oo halkaa lagu sheegay, markay soo saarto Maxkamad derejo labaad.
   b) Ee/sane ama Xafiiska xeer-ilaalinta, racfaan lid ku ah go'aankasta oo kale oo laga soo saaray dhegaysigii racfaanka ama go'aan ku saabsan aqbalid la'aanta racfaan ee Maxkamada Racfaanka.

2. Racfaankan waxaa loo aqbali karaa oo keliya su'aalahan sharci:
   a) Ikhtisaas la'aan ama awood la'aan garsoorid ee Maxkamadaha hoose
   b) Ku xadgudub ama khalad u dabaqid qodob qaanuuneed.
   c) Baaba'a xukunka ama dhegaysiga dacwada
   d) Asbaab la'aan, asbaabta oo aan ku filayn ama is-khilaafka asbaabta xukunku ku dhisan yahay ee la xidhiidha arrimo dhinacyada midkood oogay ama Maxkamaduba

**Qod. 233**

**Go'aanka Maxkamada Sare**

1. Maxkamada Sare marka loo eego dacwad gaar ahaateed waxay u go'aamin kartaa siyaabahan soo socda:
   a) Haddii racfaanku lid ku yahay xukun, ka dib markay ku dhegaysato Maxkamad furan, sida waafaqsan Qod. 234 waxay:
      i) Waxay diidaysaa racfaanka iyadoo samaynaysa sixitaanka lama huraanka ah ee khaladkasta oo sharci ee asbaabta lagu saleeyay xukunka ama khaladka qodob qaanuuneed oo loo cuskaday xukunka,

iyadoo ay tahay in aanu khaladkaasi saamaynayn qaybta wax kala jaraysa ee xukunka.

   ii) Waxay dhinac isaga leexinaysaa xukunka laga soo racfaan qaatay, ee/sanahana waxay u garsugaynaysaa Maxkamada ikhtisaaska u leh;
   iii) Waxay dhinac isaga leexinaysaa xukunka laga soo racfaan qaatay, iyadoo aan ee/sanahana u garsugayn Maxkamadna, xaaladan waa marka aan la soo saarayn xukun, ama dacwad aan la oogayn ama la sii wadayn;
   iv) Waxay dhinac isaga leexinaysaa dhammaantii ama qaybta xukunka laga soo racfaan qaatay; marka aan cadaymo dheeri ah loo baahnayn waxay go'aan ka gaadhaysaa dulucda, marka cadaymo dheeraad ah loo baahan yahay, waxay ee sanahana u garsugaynaysaa Maxkamada racfaanka laga soo qaatay.

b) Haddii racfaanku lid ku yahay amar dacwada lagu ooday oo la soo saaray dhegaysigii dhexdiisa, ka dib markay Maxkamadu ku dhegaysato fadhi furan, sida waafaqsan Qod. 234:
   i) Waxay diidaysaa racfaanka;
   ii) Waxay dhinac isaga leexinaysaa xukunka laga soo racfaan qaatay, ilaa xadka la dabaqi karona waxay dhawraysaa tilmaamaha xarfaha hore ee faqradan.

c) Xaalad kasta oo kale, waxay u dhegaysanaysa sida lagu sheegay xarfaha hore ee faqrada oo ay go'aankeeda ku gaadhaysa qolka tashiga, sida waafaqsan faqrada 2, ee Qod. 225.

2. Xukunka Maxkamada waxaa qoraal ku soo dhigaya Gudoomiyaha maxkamada ama xubin kale oo guddiga ka tirsan

3. Tilmaamaha faqrada 2 aad ee Qod. 229 ayaa la dabaqayaa ilaa inta ay dabaqmi karaan.

**Qod. 234**
**Dhegaysiga racfaanka ee Maxkamad furan**

Marka ay tahay in racfaanka lagu dhegaysto fadhi furan, tilmaamaha Qod. 230 iyo faqrada 1 aad ee Qod. 231 ayaa la dhawrayaa, ilaa xadka ay dabaqmi karaan.

**Qod. 235**
**Racfaanka lidka ku ah go'aamada ay soo saarto Maxakamadda dib u dhegaysata dacwadaha ay Maxakamadda Sare garsugaysay.**

1. Maxkamada dib u dhegaysanaysa dacwadaha ay Maxkamada Sare dib u dhegaysi u garsugaysay, waxay ku qasban tahay, wax kasta oo Maxkamada Sare ka qaaday su'aalaha ay ka go'aan qaadatay.

2. Marka Maxkamadi dib u dhegaysato dacwad Maxkamada Sare dib u dhegaysi u garsugaysay, racfaan waxaa laga qadimi karaa ku lid ah xukunka cusub oo keliya qaybaha xukunka ee aanay u go'aamin Maxkamada Sare, waxaa kaloo racfaan laga

qadimi karaa marka Maxkamada dib u dhegaysiga samaynaysaa ku fashilanto raacitaanka tilmaamaha faqradan hore.

**Qod. 236**
**Racfaan lama qaadan karo lid ku ah xukumada Maxkamada Sare**

Ma jirayo racfaan lid ku ah xukun Maxkamad Sare oo laga qaadanayaa arrimaha la xidhiidha dacwadaha ciqaabta.

## Cutubka 4aad
Dib u eegis

**Qod. 237**
**Dacwadaha mudan dib u eegis**

Marka xukunku noqdo kama danbays ama marka ciqaabta la dhamaysto ama ay baaba'ado, dib u eegis u dan ah xukumanaha waa la ogolaan karaa waqti kasta ee ku salaysan xaaladaha hoos yimaada tilmaamaha Qod. 238.

**Qod. 238**
**Xaaladah dacwaddi dib u eegis u mudnaan karto**

1. Dib u eegistu waxa la ogolaan karaa:
   a) Haddii xukun ka dib ay soo baxeen ama la daahfuray xaqiiqo cusub ama cadayn cusub, taasoo ama gooni ahaanteeda ama ku xidhnaansho xaqiiqo ama cadayn hore loogu qiimeeyay dhegaysigii, ay si cad u dhisayaan in aan denbi la gelin ama ee/sanuhu aanu ahayn kii galay denbiga.
   b) Haddii ay muuqato in xkunku ahaa natiijo ay sababtay fal been ah ama dhukumenti been ah ama fal kale oo sharcigu denbi u aqoonsaday, iyadoo ay tahay in xukun kama danbays noqday uu ka soo baxo natiijo ahaanta falkaas beenta ah ama dhukumentigaa beenta ah ama denbigaa kale.
   c) Haddii helitaanka uu xukunku ku dhisnaa uu ka hor imanayo kuwa xukun kale oo ciqaab ah oo kama danbays ah.

2. Codsi kasta oo dib u dhegaysi waa in uu ku salaysan yahay xaqiiqo ama cadayn, haddii la soo bandhigo cadaynaysa:
   a) In aan denbiga la gelin, haddii la galayna aanu ahayn ee/sanaha kan galay ama
   b) In aanay jirin waxa cadayn ah wax kastoo ay yihiin in denbi la galay ama in haddii la galay aanu ahayn ka galay eedaysanha.

Haddii kale codsiga lama aqbalayo.

**Qod. 239**
**Dadka dalban kara dib u eegis iyo codsiga dib u eegista**

1. Dib u eegis waxaa laga ogolaan karaa:
   a) Qofka xukuman;

b) Xeer-Ilaaliyaha guud;
c) Faraca (ubadka), asalka (waalidka) ama xaaska/sayga qofka la xukumay, haddii qofkii la xukumay dhintay.

2. Arjiga dib u eegista waxaa loo soo gudbin karaa qof ahaan ama waxaa soo gudbin kara wakiiladiisa gaarka ah, waxaana loola soo gudbinayaa dhukumentiga taageeraya kaaliyaha Maxkamada Sare.

**Qod. 240**
**Dhegaysiga hordhaca ah**

1. Gudoomiyaha Maxkamadu markuu helo codsiga dib u eegista iyo dhukumentiga qiimo-galka ah, wuxuu Maxkamada ku kulminayaa tashiga, si hordhac ahna waxay uga go'aan gadhayaan haddiiba arjigu yahay mid la aqbalayo.

2. Haddii shuruudihii arjiga lagu qaban lahaa maqan yihiin ama arjigu uu si buuxda ugu muuqdo mid aan sal lahayn, Maxkamadu waxay ku dhawaaqaysaa in aan la aqbalin. Haddii Maxkamadu u tixgeliso arjiga mid la aqbalo waxay u dhegaysanaysaa si waafaqsan Qod. 241.

**Qod. 241**
**Dhegaysiga Maxkamad furan**

1. Haddii Maxkamada Sare ogolaato codsiga, dhegaysiga waxaa lagu samaynayaa Maxkamad furan, sida lagu sheegay Qod. 234.

2. Maxkamada Sare:
   a) Haday hesho in xaqiiqda iyo cadaymaha muujinayaan in arjigu si fiican u dhisan yahay, waxay dhinac isaga leexinaysaa xukunka.
   b) Haday hesho in baadhis dheeraadi tahay lama huraan, sidii hore waxay dhinac isaga leexinaysaa xukunka, waxay dacwada u gudbinaysaa Maxkamada ikhtisaaska u leh si ay ugu soo dhegaysato sidii caadiga ahayd.
   c) Xaalad kasta oo kale waxay diidaysaa codsiga.

**Qod. 242**
**Hab-raaca marka xukunka dhan laysaga leexinayo**

Maxkamada Sare markay xukunka dhan isaga leexinayso, iyadoo aan ee/sanaha u garsugayn Maxkamad hoose ama Maxkamad dacwada loo garsugeeyay, markaa Maxkamadu waxay xukumaysaa siidayn, iyadoo weliba amraysa celinta ganaaxa ama khasaaraha uu u bixiyay sababta xukunkaas.

**Qod. 243**
**Khasaaraha**

1. Xukumanaha lagu siidaayo dacwad dib u eegis wuu u soo gudbin karaa codsi Maxkamada Sare uu ku codsanayo in khasaaraha uu bixiyo qaranku.

2. Maxkamada Sare waxay tashi ku go'aaminaysaa haddiiba loo soo qaadayo khasaare iyo xadiga loo soo qaadayo, iyadoo Maxkamadu ku xisaabtamaysa khasaaraha maadi iyo mooraal ee qofka xukunaa la dhibaatooday natiijada xukunkaa la tuuray dartii.

3. Qaranku wuxuu magdhabi karaa kharashkaa, ilaa xadka sharcigu ogol yahay, qofkasta oo kas qasdi denbi u sababay xukunka khaldan.

**Qod. 244**
**Racfaan lid ku ah xukunka dacwadaha dib loo garsugeeyay**

1. Xeer-Ilaaliyaha guud, waa qaadan karaa racfaan lid ku ah xukun siidayn oo ay soo saartay Maxkamada dacwada loo garsugeeyay.

2. Racfaan kama jirayo xukun ciqaab ah oo ay soo saartay Maxkamada lagu xusay faqrada hore.

3. Dhammaan xaaladaha waxaa la samayn karaa arji dib u eegis dacwadeed, haddii codsigu ku salaysan yahay xaqiiqo ama cadayn kale.

**CINWAANKA 2AAD**
Fulinta

**Cutubka 1aad**
Tilmaamo guud

**Qod. 245**
**Ka dhaqangalka dhuleed ee xukunka iyo talaabooyinka kale ee Maxkamaduhu soo saaraan**

Xukun kasta ama talaabo kasta oo kale oo Maxkamadi soo saarto ee ku saabsan arrimaha ciqaabta waxaa laga fulin karaa qayb kasta oo ka mid ah Jamhuuriyada

**Qod. 246**
**Fulinta xukunka iyo amarka dacwada lagu oodayo**

1. Xukunka ciqaabta waxaa la fulinayaa marka uu kama danbays noqdo ama marka sharcigu u ogolaado fulin hore.

2. Xukunku wuxuu kama danbays yahay marka aan racfaan lid ku ah oo kale oon ahayn codsi dib u eegis laga qadimi Karin.

3. Marka xukunka racfaan ku lid ah laga qadimi karo wuxuu kama danbays noqonayaa maalinta uu dhaco waqtiga u xadidan racfaan qaadashada, markaa aan waqtigaa racfaan lagu qadimin.

4. Xaalada racfaan Maxkamada Sare ah la ogol yahay, xukunku wuxuu kama danbays noqonayaa maalinta:
   a) Racfaanka lidka ku ah go'aanka Maxkamada Racfaanka ee ku dhawaaqay in racfaanku noqdo mid aan la aqbalin la diido.
   b) Lagu dhawaaqo aqbalid la'aanta ama diidmada racfaanka.

5. Xukunka siidayntu waa in la fuliyaa isla marka lagu dhawaaqoba.

6. Xukunka ciqaabta waxaa la fulinayaa 5 casho ka dib laga bilaabo maalinta maamulka u xilsaaran fulinta xukunku uu helo ogaysiinta in xukunku kama danbays noqday. Si kastaba haddii xukunku bixinayo siidaynta ee/sanaha, eedaysanahaa waa in markaba la siidaayaa.

7. Ilaa xadka ay dabaqmi karaa tilmaamaha qodobkan waxaa la dhawrayaa amarada ku saabsan oodista dacwada.

8. Codsiga loo sameeyo in waqtiga racfaanka u xadidan la kordhiyo ee loo sameeyo sida waafaqsan tilmaamaha faqrada 2, ee Qod. 214, uma adeegayso in lagu negeeyo fulinta xukunka, haddii aan Maxkamada awooda u lihi si kale amrin.

### Qod. 247
### Xeerarka lagu maamulayo fulinta.

Fulinta xukunka waxaa lagu maamulayaa timaamaha xeerkan iyo kuwa xeerka cqaabta.

## Cutubka 2aad
Fulinta ciqaabta

### Qod. 248
### Fulinta xukunka Dilka

1. Marka xukunka Dilka ahi noqdo kama danbays, Xeer-Ilaaliyaha guud, wuxuu si deg dega ah u wargelinayaa Maxkamada Sare iyo Wasiirka cadaalada.

2. Maxkamada Sare markay hesho galka/macluumaadka dacwadaas, waxay amraysaa fulinta iyadoo cayimaysa, maalinta, waqtiga iyo goobta, waxayna amarkaas u diraysaa Xeer-Ilaaliyaha guud.

3. Xukunka Dilka waxaa loo samynayaa toogasho, waxaana samaynaya xubnaha ciidanka Asluubta, xukun dil ah fagaare laguma fulin karo, haddii aan Wasiirka cadaaladu si kale amar ku bixin. Fulinta xukunka Dilka waxaa goob-joog ka noqonaya wakiilada Xeer-Ilaaliyaha guud, sarkaal caafimaad oo uu isagu magacaabo iyo Wasiirka diinta oo korka ka ilaalinaya haddii qofka xukumani sidaa dalbado.

4. Diiwaangelin gaara waa in ay sameeyaan wakiilada Xeer-Ilaaliyaha guud ee ku saabsan wax kasta oo uu yidhi qofka la dilayaa iyo dhakhtarka cadeeyay inuu dhintay.

5. Xukunka dilka ah dib ayaa loo dhigayaa:
   a) marka arji cafis la gudbiyay ilaa inta arjigaa cafiska go'aan laga gaadhayo.
   b) Markuu lid ku yahay haweenay uur leh ilaa inta ay uurka sido.
   c) Markuu lid ku yahay haweenay ilmo dhashay waqti ka yar hal sano ka hor, ilaa inta ilmuhu ka dhinto ama loo xilsaaro xanaanadiisa qof kale, dhalmadana ay ka soo wareegto wax ka badan laba bilood.

**Qod. 249**
**Fulinta xukunka xadhigga ah**

1. Marka xukunka xadhigu noqdo kama danbays, Gudoomiyaha Maxkamada derejada kowaad ee soo saartay xukunka, wuxuu soo saarayaa amarka xadhiga qofka xukuman, wuxuuna amarkaas iyo nuqul xukunka ah u dirayaa Xeer-Ilaaliyaha guud si uu u fuliyo.
   Haddii qofka xukuman hore u xidhnaa, waxaa kaloo loo dirayaa nuqul amarka xadhiga maamulka haya qofka xukuman.

2. Amarka xadhigu waa inuu sheegaa:
   a) Nooca xadhiga iyo dhererka mudada xadhiga.
   b) Maalinta ay tahay in qofka xukunman la siidaayo, iyadoo aan amar dheeraada loo baahan, haddii isaga aan sabab kale loo sii hayn.

3. Gudoomiyaha Maxkamadu wuu amri karaa in xukunka xadhiga la laalo, xaaladaha hoos yimaada tilmaamaha faqrada 2, ee Qod. 44, ilaa waqtiga ay sababaha laalitaanka keenay ay meesha ka baxayaan.

**Qod. 250**
**Fulinta xukunka Ganaaxa**

1. Iyadoo aan lagu xadgudbayn waxyaabaha xeerka ku jira, marka ee/sanaha lagu xukumo in uu ganaax bixiyo, ee xukunku kama danbays noqdo, haddii aan ganaaxa la bixin, Maxkamada xukunka soo saartay waxay:
   a) Ogolaan kartaa waqti lagu bixiyo ganaaxaa, iyo kordhinta waqtigaa la ogolaanayo.
   b) In si toos ah loo bixiyo ganaaxa iyadoo qayb-qayb loo bixinayo.
   c) Soo saari kartaa amar xajis qadarka ganaaxa loo xayirayo loona iibinayo hanti uu ee/sanuhu leeyhay.
   d) Tilaami kartaa bixinwaaga ganaaxa in ee/sanha loo xidho ilaa waqti sida sharciga waafaqsan, iyadoo xadhiga lagu biirinayo, waqtikasta oo kale oo laga yaabo in la xidho.
   e) Tilmaami kartaa in ee/sanha la baadho oo lacag kasta oo laga helo lagu bixiyo ganaaxa iyo weliba dheeraadka haddii wax soo hadhaan. Iyadoo la siiyay in lacgata gacantiisa ku jirta aan ganaaxa lagu bixin haddii Maxkamadu ku qanacdo in aanu isagu lahayn.

2. Xadhiga bixinwaaga ganaaxa markasta waxaa dhamaynaya bixinta ganaaxa ama qabashada hantidiisa loogu qabto hab sharci.

3. Haddii qayb ganaaxa ah la bixiyo ama hab sharci hantidiisa loogu qabto intaan waqtiga xadhigu dhammaan, inta weli hadhay waxaa looga dhimi doonaa si isu dhignaan ah.

**Qod. 251**
**Xadhigga ka horeeya xukunka**

1. Waqtiga xadhiga ee xidhnaanta ka hor intaan xukun kama danbays noqon, waxaa laga jarayaa waqtiga guud ee xukunka xadhiga; marka ciqaabtu ganaax tahay, qadarka u dhigma waqtigaa xadhiga waxaa laga jarayaa guud ahaan ganaaxa.

2. Marka dacwada lagu dhegaysto dalka dibediisa, ka dibna dib loogu dhegaysto Jamhuuriyada Somaliya, ciqaabta dibeda lagu qaatay waxaa laga jarayaa ciqaabta ay saaraan Maxkamadaha Jamhuuriyada Somaliya, iyadoo markasta xisaabta lagu darayo nooca ciqaab ee dibeda lagu qaatay, haddii qofku xidhnaa xukunka dibeda ka hor, tilmaamaha lagu xusay faqrada hore ayaa la dabaqayaa.

**Qod. 252**
**Fulinta ciqaabaha kaabayaasha ah**

1. Ilaa inta ay dabaqmi karaan, tilmaamaha cutubkan, waxaa lagu dabaqayaa fulinta ciqaabaha kaabayaasha ah.

2. Mudooyinka soo socda lama xisaabinayo ciqaabaha kaabayaasha ah:
   a) Mudada gudaheeda ee qofka xukumani uu qaadanayo ciqaabta xadhiga ah.
   b) Xiliga gudihiisa qofka xukuman ay saran tahay xabsi ku hayn talaabo ammaan.
   c) Xili kasta oo dhexdiisa qofka xukumani uu si rabitaankiisa ah uga hor yimi fulitaanka ciqaab xadhig ama talaabo ammaan.

**Qod. 253**
**Kala noqoshada shuruudaha xukun laalidda iyo faa'iidooyin kale**

1. Kala noqoshada shuruudaha xukun laalida waxaa loo qaadayaa qaabka, uu hab fulinta uu u dhigay Gudoomiyaha Maxkamada derejadii kowaad ee xukunka ku dhawaaqday ama Maxkamada ka dib ku dhawaaqday xukunka ciqaabta ee xaaladaha ku dhigan faqrada 2 aad ee Qod. 127.

2. Si taas la mid ah waxaa kaloo laga noqon karaa talaabooyinkan soo socda:
   a) Faa'iidada siidayn shardiyaysan, xaaladaha ku sheegan xarafka (a), faqrada 2 aad ee Qod. 127;
   b) Cafiskasta, saamaxaad shuruud leh ama cafis, markasta oo qofka xukumani ku guuldaraysto buuxinta shardi kasta oo laga rabay ama waajibkasta oo la saaray.

3. Kala noqoshada faa'iidada xadhig ganaax ku bedelka, waxaa loo amrayaa sida uu ugu dhigay hab fuliinkeeda, Gudoomiyihii soo saaray xukunka derejada 1 aad, xaaladaha lagu dhigay faqrada 3 aad ee Qod.125.

4. Ilaa inta ay dabaqmi karaan tilmaamaha faqradaha 2 & 3 ee Qod.223 waa la dabaqayaa.

**Cutubka 3aad**
Dhamaadka danbiga iyo ciqaabta

**Qod. 254**
**Ku dhawaaqidda baaba'a denbiga iyo ciqaabta**

1. Markasta oo xukunka ka dib, denbi ama ciqaabi baaba'ado, Gudoomiyaha Maxkamada derejada kowaad ee xukunka soo saartay, wuxuu cadaynayaa in denbiga ama ciqaabtu baaba'aday, isagoo qaadaya dhammaan talaabooyinka baaba'aa ka dhalanaya.

2. Ilaa inta ay dabaqmi karaan tilmaamaha faqradaha 2 & 3 ee Qod.223 waa la dabaqayaa.

**Qod. 255**
**Hababka la xidhiidha saamaxaadda iyo siidaynta shardiyaysan**

1. Codsiga ku saabsan saamaxaada iyo siidaynta shardiyaysan, waxaa lagu hagaajinayaa M/waynaha Jamhuuriyada, waxaana loo dirayaa Xeer-Ilaaliyaha Guud.
   Codsiga waa in uu saxeexaa:
   a) Qofka xukuman
   b) Asalka (Waalidka), faraca (Ubadka), xaaska/sayga qofka xukuman.

2. Saamaxaada ama siidaynta shardiyaysan, waxaa lagu soo saarayaa dekreto M/waynaha Jamhuuriyada, ka dib marka uu la tashado Wasiirka Cadaalada iyo Xeer-Ilaaliyaha Guud.

3. Ilaa inta ya suuragal tahay, tilmaamaha Qod. 254, waxaa lagu dabaqayaa fulinta dekreetada.

**Qod. 256**
**Dib u dejinta xukunka ka dib**

1. Xaaladaha lagu xusay Qod. 153 ee Xeerka ciqaabta, dib u dejin waa lagu siin karaa qofka la xukumay dalabkiisa amarka Gudoomiyaha Maxkamada Racfaanka oo dhegaystay Xeer-Ilaaliyaha Guud.

2. Haddii dib u dejin aan la bixin, sababtoo ah qofka la xukumay oo aan cadayn dhaqan wanaagiisa, codsi dib u dejin waxaa la gudbin karaa oo keliya laba sano ka dib, gudbinta codsiga hore.

3. Dib u dejinta waxaa ka noqon kara Gudoomiyaha Maxkamada racfaanka ee dib u dejinta bixiyay ama maxkamadii Xukunka ugu danbeeyay ku dhawaaqday, xaaladaha lagu xusay Qod. 154 Xeerka ciqaabka.

4. Ilaa xadka la dabiqi karo, waxaa la dabaqayaa tilmaamaha faqradaha 2 & 3 ee Qod. 223.

## Cutubka 4aad

Arrimaha fulinta ka soo baxa

### Qod. 257
### Ikhtisaaska arrimaha fulinta ka soo baxa

Gudoomiyaha Maxkamada ikhtisaaska u leh fulinta amarada iyo talaabooyinka kale, ayaa iska leh awooda ka go'aan qaadashada dhammaan arrimaha ka soo dhexbaxa marxalada fulinta.

### Qod. 258
### Habraaca arrimaha fulinta ka soo dhexbaxa

1. Arrimaha fulinta waxaa soo if-bixin kara Xeer-Ilaaliyaha guud ama dhinaca ay khusayso.

2. Gudoomiyaha Maxkamada ayaa ka go'aan gaadhaya arrimahaas ka dib marka uu siiyo dhinacyada danaynaya waqti macquul ah oo ay ku soo bandhigaan badheedhahooda, codsiyadooda iyo difaacooda oo qoraal ah.

3. Ilaa xadka la dabiqi karo, waxaa la dabaqayaa tilmaamaha faqradaha 2 & 3 ee Qod. 223.

## Cutubka 5aad

Fulinta tallaabooyinka ammaan

### Qod. 259
### Dabaqaada, wax ka bedelka, beddelaadda iyo ka noqoshada tallaabooyinka ammaan

1. Talaabooyinka ammaan waxaa amraya Maxkamada oo raacinaysa xukunka ciqaabta ama amarka oodista dacwada.

2. Xaaladaha lagu sheegay faqrada 2 ee Qod. 165 XCG, talaabooyinka ammaan Gudoomiyaha Maxkamada Xukunka soo saartay ama amarka oodista dacwadu wuxuu ku dabaqayaa codsiga Xeer-ilaaliyaha, siyaabaha lagu sheegay arrimaha fulinta ka soo baxa.

3. Ilaa xadka la dabiqi karo, waxaa la dabaqayaa tilmaamaha faqradaha 2 & 3 ee Qod. 223.

**Cutubka 6aad**
Diiwaanka denbiyada

**Qod. 260**
**Xafiiska diiwaanka denbiyada**

1. Waxaa jiraya hal xafiis oo midaysan oo ah Xafiiska diiwaanka denbiyada, kaas oo qayb ka noqonaya xarumaha ciidanka Booliska, oo taas u hoos imanaya jihaynta iyo kormeerka Xeer-Ilaaliyaha Guud.

2. Xafiiska diiwaangelinta denbiyada, waxaa lagu kaydinayaa midhaha amarada iyo talaabooyinka kale ee lagu xusay Qod. 261,262 ee ay soo saaraan Maxkamadaha Jamhuuriyada Somaliya, iyo sidoo kale kuwa Maxkamadaha dibeda ee lagu aqoonsaday si sharciga waafaqsan.

3. Midhaha amarada iyo talaabooyinka kale ee ku saabsan xukumada dadka shisheeye ama wadan laawaha si gaara ayaa loogu kaydinyaa xafiiska diiwaanka denbiyada.

**Qod. 261**
**Amarrada la xidhiidha dacwadaha ciqaabeed in lagu kaydinayo xafiiska kaydinta denbiyada.**

1. Xafiiska kaydinta denbiyada waxaa lagu kaydinayaa maxsuulka:
   a) Xukumada ciqaabta ee kama danbaysta ah;
   b) Amarda lagu bixiyay dib u dejin ama lagaga noqday
   c) Talaabo kasta oo la xidhiidha dalbashada, wax ka bedelka, kala noqoshada ciqaabta, talaabooyinka ammaanka iyo faa'iidooyinka sharciga lagu bixiyay.

2. Laguma kaydinayo xafiiska kaydinka denbiyada, xukumada denbiyada khilaafaadka ee la ogol yahay bixinta ganaaxa hay'adaha maamul iyo kuwa la masaalaxayn karo.

**Qod. 262**
**Arrimaha madani ama maamul ee la kaydinayo**

Xafiiska kaydinta denbiyada waxaa kaloo lagu kaydinayaa nuxurka:
   a) Arrimo madani ee ku saabsan:
      i) Xukunka kama danbaysta ah ee lagu cadeeyay karti daro dhan ama qaybeed ama xukunka kama danbaysta ah ee cadayntaa lagaga noqday.
      ii) Amarka Maxkamad madani soo saarto ee qof lagu haynayo isbitaal maskaxeed ama ka noqoshada amarka caynkaas ah.
      iii) Xukunka musalafnimada
   b) Amarada maamul ee ku saabsan luminta jinsiyada iyo masaafurinta jinsiyad laawaha.

**Qod. 263**
**Kaararka kaydinta**

1. Koobniinka amarada ama xukumada lagu xusay qodobada hore, kaaliyaha Maxkamada amarka ama xukunku kama danbays ku noqday ama xaalada racfaanka Maxkamada derejada kama danbaysta ah soo saartay, wuxuu ku diiwaangelinayaa kaadhadh ku haboon.

2. Kaadh diiwaangelin gaara ayaa loo samaynayaa qofkasta ama dacwadkasta. Haddii qofka lagu xukumay hal denbi wax ka badan, si gaara ayaa loogu kala sheegayaa kaadhka denbi kasta sida ay ugu kala horeeyaan xukunka ama amarka.

3. Ujeedada kaydinta kaaliyuhu wuxuu isticmaalayaa foomam ay boolisku siiyaan oo ka kooban khadka faraha ee qofka ay khusayso.

4. Diiwaangelinta waa in lagu diyaariyaa waqti aan toban maalmood ka danbayn laga bilaabo maalinta xukunku kama danbays noqday. Tixraaca waa in laga sameeyaa nuqulka asalka ah ee xukunka ama amarka arrinka lagu diiwaangelinayo xafiiska kaydinta denbiyada.

**Qod. 264**
**Gudbinta kaararka kaydinta**

1. Isla marka la dhamaystiro kaadhadhka kaydinta, kaaliyuhu wuxuu u gudbinayaa xafiiska kaydka denbiyada oo ay la socoto qoraal loo saxeexayo in uu u gudbiyay oo u soo noqonaya.

2. Haddii qofka diiwaangelintu sheegaysaa aanu lahayn diiwaan hore oo denbi, kaaliyuhu wuxuu u diyaarinayaa nuqulka labaad oo uu u dirayaa.

3. Haddii diwaanku sheegayo qof shisheeye ah, kaaliyuhu wuu diyaarinayaa nuqulka labaad ee kaadhka kaydinta wuxuu u gudbinyaa xukuumadda dalka qofkaasi muwaadin ka yahay si waafaqsan Axdiyada caalamiga ah ama dariiq is waydaarsiga.

**Qod. 265**
**Habaynta kaararka kaydinta**

1. Kaadhadhka kaydintu isla marka ay soo gaadhaan Xafiiska diiwaangelinta denbiyada, waxaa lagu diiwaangelinayaa diwaan u jeedadaas u habaysan.

2. Haddii kaadhadhka kaydintu ka hadlayaan qof aan xukun denbi oo hore lahayn, xafiiska kaydinta denbiyadu kaadh sheegaya macluumaadka qofkaa ayuu fayl ku ridayaa oo ay la socdaan faraha laga qaaday qofkaa iyo noocay galaan, kaas oo lambar xidhiidh ah wata iyo tixraaca kaadhka kaydinta. Nuqulka kale ee khaadhka kaydinta waxaa lagu xafidayaa xusuus dhawrka faraha. Wuxuu kaloo xafiiska kaydka denbiyadu diyaarinayaa lifaaqa kaadhadhka oo ay ku jiraan macluumaadka shakhsi ee

qofka, nooca khadka farihiisa iyo lambarka faylkiisa, sidoo kale kaadhadhkaa waxaa si haboon loogu habaynayaa kabadh fayl si xarafaysan.

3. Haddii kaadhka kaydintu ka hadlayo qof leh xukun ciqaab hore, waxaa lagu ridayaa qofkaa faylkiisii hore, ka dib marka lagu sameeyo tixraacyada loo baahan yahay galka dushiisa.

**Qod. 266**
**Tirtiridda kaydka denbiga**

1. Kaydka denbi ee qof waxaa lagu baabi'in marka si rasmi ah loo shaaciyo dhimashada qofkaa ama marka ay ka soo wareegto waqtigii dhalashadiisa 80 sano.

2. Kaydadka denbi ee soo socda waxaa kaloo lagu baabi'inayaa:
   a) Xukum ama amar Maxkamadeed oo si haboon loo diiwaangeliyay;
   b) Kayd denbi oo si khaldan loo siiyay qof aan lahayn oo ka dhashay ku khaldamid ama macluumaad shakhsi oo been ah ama khalad dhegaysigii dacwada ah, kaasoo dib looga soo saaray amar ama xukun lagu saxayo.

3. Sarkaalka u xilsaaran xafiiska kaydka denbiyada waaa in uu bil walba ka saaraa kaadhadhka kaydka denbiyada ee la baabi'iyay, isagoo ku samaynaya tixraaca kaadhka diiwaan ku haboon.

**Qod. 267**
**Caddaynta loo soo saarayo maamulka guud**

1. Hay'ada Garsoorku waxay xaq u leedahay in ay u hesho ujeedo cadaaladeed cadaynta kaydka denbi ee qofkasta oo ay khusayso.

2. Maamulka guud isna wuxuu leeyahay xaqaas oo kale, marka cadayta kaydka denbi loogu baahdo ujeedo rasmi ah ee qofkaa ay khusayso.

**Qod. 268**
**Caddaynta loo soo saaro qof rayid ah**

Isagoo aan wax sabab ah bixin qofku wuxuu xaq u leeyahay in loo soo saaro cadayntiisa kaydka denbi ee khuseeya xafiiska kaydka denbiyada.

**Qod. 269**
**Arrimaha aan lagu qorayn caddaynta loo soo saaro qofka rayidka ah**

Cadaynta kaydka denbi ee codsigiisa loogu soo saaro qofka rayidka ah lagu xusimaayo:
   a) Xukunka xaaladahan soo socda:
      i) Marka xukunka dhinac la isaga leexiyay ee lagu siidaayay dacwad dib u eegis ah.
      ii) Marka qofka ay khusaysaa aanu gaadhin sideed iyo toban sano waqtigii denbiga lagu xukumay ganaax ama xadhig keliya ama ay la

socoto ciqaab kale oo aan dhaafsiisnayn lix bilood denbiyada ama hal sano khilaafaadka, iyadoo ay tahay in aan qofkaa mar danbe dib loogu xukumin denbi kale.

iii) Marka denbiga qofkaa lagu xukumay lagu dhawaaqay in uu dhammaaday, ama marka qofkaa dib loo dhaqan celiyay, dib u dhaqan celintaas oo aan dib loogala noqon.

b) Talaabo kasta oo lagu sheegay Qod. 262

**Qod. 270**
**Codsiga soo saarista cadaynta kaydka denbi**

1. Codsiga cadaynta kaydka denbi waxaa lagu hagaajinayaa xafiiska kaydka denbiyada, codsigaa waa in uu ka muuqdaa magaca qofka ay khusayso, magacyada Aabihii iyo Hooyadii, goobta iyo taariikhda dhalashada iyo faahfaahinkasta oo kale oo lagu aqoonsan karo oo ay ku jirto marka loo baahan yahay sawirka faruhu.

2. Cadayntaa waxaa soo saaraya xafiiska u xilsaaran ee xafiiska kaydka denbiyada. Haddii aanu jirin Xafiiska kaydka denbiyada, kayd denbi oo qofkaa khuseeyaa iyo haddii ay jiraan oo keliya kuwa sharcigu reebay faafintooda, Xafiiska kaydka denbiyadu wuxuu ku qorayaa cadaynta weedha "NIL" "MA LEH" haddii kale Xafiiska kaydka Denbiyadu wuxuu qorayaa faahfaahinta kaydka denbi ee qofkaa khuseeya oo u taxan hormayn xarfeed.
   Marka diiwaanka la gelinayo xukumada denbiilenimo, waxaa lala qorayaa taariikhda iyo Maxkamada xukunka ku dhawaaqday, waxaa kaloo la muujinayaa nooca denbiga, ganaaxa ama xadhiga la xukumay, wixii kaabe ah, wixii talaabo ammaan ah iyo wixii faa'iido la siiyay.
   Sarkaalka masuulka ka ah xafiiska kaydka denbiyada waa in uu cadayntaa ka muujiyaa taariikhda la soo saaray, saxeexiisa iyo shaanbada xafiiska kaydka denbiyada, soo saaristeeda waa in uu geliyaa diiwaan ku haboon.

3. Haddii cadayntaa xafiiska kaydka denbiyadu ku soo saaray codsiga qof rayid ah waxaa lagu qorayaa waraaqda tigidhka leh, haddii cadaynta xafiiska kaydka denbiyadu soo saaray looga baahdo sugitaan (tasdiiqin), saxeexa sarkaalka u xilsaaran waxaa suggaya Xeer-Ilaaliyaha guud.

**Qod. 271**
**Khilaafyada qoraalka iyo caddaynta kaydka denbi**

Wixii khilaafa ee ku saabsan arrimaha ka dhasha qodobka hore ama haddii wax saxitaan ah uu qof uun ka codsado cadayn uu soo saaray xafiiska kaydka denbiyadu, xeer-ilaaliyaha guud ayaa arrimahaa go'aan ka gaadhaya marka qofka ay khusaysaa dalbado, haddii qofkaa ay khusaysaa ka doodayo go'aanka xeer-ilaaliyaha wuxuu xaq u leeyahay in sidaa yeelo arrimaha ka soo baxa fulinta.

## Cutubka 7aad

Saamaynta dacwada ciqaabta ah ee dacwadaha madani, maamul ama anshax-marineed

### Qod. 272
### Laalidda dacwadaha madani, maamul ama anshax-marineed

Haddii qof lagu oogo dacwad ciqaaba oo sababta dacwadaasi saamaynayso dacwad madani ah, maamul ah ama dacwad anshax-marineed, kuwa danbe waa laalaanayaan haddii aan sharcigu si ka duwan u sheegin ilaa xukunka dacwada ciqaabta ah ama amarka lagu oodayaa uu kama danbays noqdo ama uu ka soo baxayo amar dacwada lagu xidhayaa.

### Qod. 273
### Xidhiidhka dacwada ciqaabta ah iyo dacwada madaniga ah

Ma jiri karto dacwad madani ama maamul oo la bilaabi karaa ama la socodsiin karaa ama dib loo furi karaa, xiliga dacwad ciqaaba ay Maxkamadu ku dhawaaqday:

a) In aan falka la gelin.
b) In aan ee/sanuhu gelin.
c) In falka lagu galay
    i) gudasho waajib
    ii) adeegsiga xaq sharci ah.
d) In aan la helin cadaymo ku filan in:
    i) falka la galay
    ii) ee/sanuhu galay.

### Qod. 274
### Saamaynta xukunka dacwadda ciqaabta ah

1. Dacwada madani ama maamul ee soo celin ama magdhaw khasaare, xukunka ciqaabta ee kama danbaysta ah ama xukunka kama danbaysta ah ee siidaynta iyo amarka kama danbaysta ah ee dacwada lagu oodayo, waxay leeyihiin awooda wax la xukumay *"res judicata"* waxyaabaha ku saabsan:
    a) su'aasha haddiiba denbiga la galay ama aan la gelin;
    b) Sharcinimada ama sharcidarda falka.
    c) Masuuliyada denbi ee ee/sanaha

Xukunka kama danbaysta ah ee lagu bixiyay cafis garsoor, isaguna wuxuu leeyahay awooda wax la xukumay *"res judicata"* waxyaabaha ku saabsan dacwadaha madaniga iyo maamulka.

2. Marka laga reebo xaaladaha lagu xusay faqrada hore, go'aamada halkan lagu sheegay iyaguna waxay leeyihiin awooda wax la xukumay *"res judicata"* dacwadaha madaniga, maamulka ama anshax-marinta dhexdooda, marka muranku uu la xidhiidho xaq aqoonsigiisu uu ku xidhnaa xaqiijinta dhacdo ahayd mawduuca muranka dacwad ciqaaba.

## BUUGGA SHANAAD
Xidhiidhada garsoor ee maamulada shisheeye qodobbo kama danbaysta ah

## CINWAANKA 1AAD
Xidhiidhada garsoorka ee maamulada shisheeye

### Cutubka 1aad
Qodobbo guud

#### Qod. 275
#### Xeerar Guud

1. Dib isugu celinta ee/sanayaasha waxaa keliya oo la samayn karaa marka uu jiray axdi Caalami ah oo ka horeeyay, si waafaqsan Axdigaa iyo marka aan Axdigaas la samayn si waafaqsan tilmaamaha qaybtan.

2. Qoraalada caalamiga ah ee marag isu dhegaysiga, aqoonsiga xukumada shisheeye iyo xidhiidhada kale ee garsoorka shisheeye ee ku saabsan arrimaha ciqaabta waxaa lagu maamulayaa Axdiyada Caalamiga ah iyo caadooyinka dawliga ah marka aanay jirin qodobo qaanuuneed oo loo dejiyay, si waafaqsan qodobada qaybtan.

### Cutubka 2aad
Warqadaha caalamiga ah ee marag isu dhegaysiga

#### Qod. 276
#### Qoraallada hay'adaha garsoor shisheeye ee maragyo isu dhegaysiga

1. Qoraalada ka yimaada hay'adaha Garsoor shisheeye ee in cadaymo loo qaado dal shisheeye ah, waxaa la isagu gudbinayaa dariiq diblomaasiyadeed.

2. Xaaladaha deg-dega ah, Maxkamaduhu waxay ku gudbin karaan codsiyada si toos ah safaaradaha ama qunsuliyadaha Jamhuuriyada ee dalalka shisheeye, iyagoo wargelinaya Wasaarada Cadaalada iyo Diinta.

3. Yeedhmooyinka maragyada degan dalalka shisheeye, waxaa lagu gudbinayaa isla dariiqaas.

#### Qod. 277
#### Qoraalada ka yimaada hay'adaha garsoorka shisheeye ee marag isu dhegaysiga

1. Qoraalada ka socda garsoorka shisheeye ee ku saabsan cadaymo loo qaadayo garsoorka dalka waxay awood fulin ku yeelanayaan amarka gudoomiyaha Maxkamada racfaanka oo dhegaystay Xeer-ilaaliyaha guud, iyadoo ay tahay in aan qaadista cadaymahaasi ka hor imanayn maba'diida guud ee shuruucda dalka.

Gudoomiyaha Maxkamadu isagaa qaadaya cadaymahaa ama wuxuu u dirayaa Maxkamadaha Gobolada iyo Degmooyinka ee ikhtisaaska u leh in ay arrimahaa talaabada ku haboon ka qaataan.

2. Yeedhmooyinka maragyada dalka degan ee ay soo codsadaan hay'adaha garsoorka shisheeye, waxaa si toos ah loogu dirayaa xeer-ilaaliyaha guud.

3. Cadaymaha la qaadayo iyo yeedhmooyinka maragyada waxaa loo adeegsanayaa si waafaqsan tilmaamaha guud ee xeerkan.

**Cutubka 3aad**

Isu celinta eedeysanayaasha

**Qod. 278**

**Awoodda xoghayaha dawladda ee caddaaladda iyo diinta ee la xidhiidha isu celinta eedeysanayaasha.**

1. Xoghayaha Dawlada ee (Wasiirka) Cadaalada iyo Diintu wuxuu awood u leeyahay in uu qabto ama bixiyo celinta ee/sane ama xukumane dal shisheeye, xaaladaha aan celintaas lagu mamnuucin qodobka 11 XCG, wuxuuna nidaaminayaa kala horaysiinta marka ay celinta soo dalbadaan wax ka badan hal dal oo shisheeye.

2. Qabashada ama bixinta isu celinta ee/sanayaasha waxaa had iyo jeer lagu salaynayaa shuruudaha ah in qofkaa la mastaafurinayo aan lagu qaadin denbi ka duwan ama ciqaab ka duwan denbigaa masaafurka ee/sanaha loo qabtay ama loo bixiyay, xoghayaha Garsoorka iyo diintu wuxuu kaloo ku salayn karaa bixinta ama qabashada celinta ee/sanaha shuruud kasta oo kale oo uu u arko in ay ku haboon tahay.

**Qod. 279**

**Dammaanad Garsoor**

1. Masaafurka dalka shisheeye ee ee/sanaha ama xukumanaha waxaa go'aan u dan ah siinaya Gudoomiyaha maxkamada Racfaanka ee ikhtisaaska u leh goobta uu qofkaasi joogo, ka dib marka uu dhegaysto Xeer-ilaaliyaha guud iyo qofka la mastaafurinayo. Xoghayaha Dawlada ee Cadaalada iyo Diintu wuxuu codsiga mastaafurka u samaynayaa Gudoomiyaha Maxkamada Racfaanka; amarka mastaafurka waxay uga racfaan qaadan karaan Xeer-Ilaaliyaha ama qofka la mastaafurinayaa Maxkamada Sare.

2. Xaaladaha ay tahay qofka la mastaafurinayaa in la xidho, Gudoomiyaha Maxkamada Racfaanka ayaa soo saaraya amarka xadhiga si waafaqsan hab raaca caadaiga ah.

3. Amarkaa qabashada iskeed ayaa looga noqonayaa, qofka xidhana waa la siidaynayaa haddii:
   a) Ay ka soo wareegto 60 casho maalinta xadhiga marka masaafurka ay soo dalbatay Dawlad Afrikaan ahi ama;

b) Ay ka soo wareegto 90 casho maalinta xadhiga marka masaafurka ay soo dalbatay Dawlad afrika ka baxsan
Xoghayaha Dawlada ee (wasiirka) Cadaalada iyo Diintu aanu ka helin Dawlada masaafurka soo dalbatay dhukumentigii taageerayay codsiga mastaafurka. Waqtigaa waxaa loo kordhinayaa dalka masaafurka soo dalbaday hal mar oo aan ka badnayn hal bil, mordhintaana waxaa bixin karta Maxkamada Sare markuu codsado Xoghayaha Dawlada ee Cadaalada iyo Diintu.

**Qod. 280**
**Habraaca isu celinta eedeysanayaasha**

1. Haddii Gudoomiyaha Maxkamada Racfaanku go'aansado in aanu ogolaan mastaafurka, wuxuu amraayaa in qofka xidhan ama xukuman, haddii uu xidhan yahay isla markaba la siidaayo.

2. Haddii kale marka Gudoomiyaha Maxkamada Racfaanku ku ogolaado mastaafurka, marka qofka xidhan lagu soo saaro amarka xadhiga, haddii ay lama huraan tahay, waxaa la cayimayaa goobta qofkaa looga qaadayo maamulka soo dalbaday masaafurka.

3. Masaafurka waa la laalayaa marka qofka la mastaafurinayaa ay tahay in dacwad loogu dhegaysto ama uu xukunka ku qaato Jamhuuriyada dhexdeeda, haddii aan Gudoomiyha Maxkamada Racfaanku si kale u go'aamin.

**Qod. 281**
**Ka soo masaafurinta eedeysanaha dal shisheeye**

1. Marka ay lama huraan tahay in codsi soo mastaafurin ee/sane ama xukumane loo sameeyo, Gudoomiyaha Maxkamada Racfaanka ee ikhtisaaska u leh goobta denbigu ka dhacay ama qofka lagu xukumay, wuxuu codsi u gudbinayaa Xoghayaha Dawlada ee Cadaalada iyo Diinta oo ay la socoto dhukumentiga lama huraanka u ah, isagoo ogaysiinaya Xeer-Ilaaliyaha guud.

2. Codsiga soo mastaafurinta waxaa iskii u samayn kara Xoghayaha Cadaalada, isagoo ogaysiinaya Maxkamada Racfaanka ee awooda u leh iyo Xeer-Ilaaliyaha guud

**Cutubka 4aad**
Aqoonsiga xukunnada ciqaabeed ee shisheey

**Qod. 282**
**Aqoonsiga xukunnadda ciqaabeed ee shisheeye ee uu dalbanayo Xeerilaaliyaha guud**

1. Xoghyaha Dawlada ee Cadaalada iyo Diintu markuu helo xukun ciqaab ah oo dal shisheeye ugu dhawaaqay muwaadin Soomaali ah ama ajinebi ama dhul-laawe dalka degan, wuxuu daahid la'aan ugu gudbinayaa Xeer-Ilaaliyaha Guud, xukunkaas iyo dhukumentiga dacwada iyo wవిwararka xaaladaas la xidhiidha.

2. Xeer-ilaaliyaha guud isagoo adeegsanaya masuuliyadiisa waydiisashada aqoonsiga xukumada shisheeye ee ku xusan Qod. 10 XCG, wuxuu markiiba u gudbinayaa Gudoomiyaha Maxkamada Racfaanka ee ikhtisaaska u leh ama wuxuu waydiisanayaa maamulkii shisheeye wararka arrinka looga baahan yahay, isagoo sii marinaya Xoghayaha Dawlada ee Cadaalada iyo Diinta.

**Qod. 283**
**Aqoonsiga xukunnadda ciqaabta ee shisheeye ee uu waydiisanayo qof rayid ah**

Qofka danaynaya dacwad ciqaabeed oo la xidhiidha aqoonsi xukun shisheeye oo ku saabsan soo celin ama magdhaw khasaare ama arrimo kale, oo madani oo ah kuwa ku xusan xarafka (b) ee qodobka 10 XCG, wuxuu aqoonsiga xukunkaa waydiisan karaa Gudoomiyaha Maxkamada Racfaanka ee ikhtisaaska u leh aagaas (260, 284).

**Qod. 284**
**Qaabka codsiga**

Codsiga lagu sheegay Qod. 282, 283, waa in uu koobayaa:

a) Xusitaanka Maxkamadii soo saartay xukunka la aqoonsanayo;
b) Taariikhda iyo goobta lagaga dhawaaqay xukunka
c) Bayaaminta asbaabta aqoonsiga loo waydiisanayo

Waa in codsigaa lagu soo xidhaa nuqul rasmiyaysan oo xukunka la aqoonsanayo ah.

**Qod. 285**
**Dacwadda aqoonsiga**

1. Gudoomiyaha Maxkamada Racfaanku aqoonsi ma siinayo xukun shisheeye, haddii:
   a) Aan xukumanaha dacwada loogu yeedhin ka qayb-galkeeda ama aanu kaalmayn qareen difaac xaaladaha qareenka difaacu khasab ka yahay qaanuunka Somaaliya.
   b) Aanu xukunku kama danbays ka noqon qaanuunka Dawlada xukunka ku dhawaaqday.
   c) Xukunka ay ku jiraan qodobo ka hor imanaya ama aan la socon Karin qodobo ka mid ah Dastuurka Soomaaliya ama wax ka mid ah mabaa'diida guud ee qaanuunka dalka.

2. Gudoomiyaha Maxkamada racfaanku wuxuu go'aankiisa ansixinta ama ansixin la'aanta xukunka wuxuu u raacayaa hab raaca waxyaabaha fulinta ka soo baxa. Dhinaca ay khusayso iyo Xeer-Ilaaliyaha guud waxay go'aanka uga racfaan qaadan karaan Maxkamada Sare.

3. Ka dib aqoonsiga xukunka, kaaliyaha Maxkamada Racfaanku waa in uu u diro faahfaahin kooban oo go'aanka Maxkamada ah, xafiiska kaydka denbiyada.

4. Haddii go'aanka aqoonsiga ogolaanaya aan lagu xusin wax ka saabsan waxyaabaha laga yaabo in loo sameeyay natiijada xukunka dartii iyo haddii aan lagu xusid wax talaabo ammaan ah oo laga yaabo in la dabaqay, Gudoomiyaha Maxkamada

Racfaanku dib ayuu ka amri karaa tilmaamahaa markuu xeer-ilaaliyuhu dalbado, isagoo raacaya hab-raaca arrimaha fulinta ka soo baxa.

**Qod. 286**
**Aqoonsiga qodobbo madani oo ku jira xukun ciqaabeed oo dal shisheeye**

1. Qodobo madani oo ku dhex jira xukun dacwad ciqaabeed oo uu soo saaray Dal shisheeye, oo lagu jideeyay cawil celin, magdhaw khasaare madani waa lagu aqoonsan karaa, waana laga fulin karaa dhulka Jamhuuriyada.

2. Aqoonsiga iyo fulinta waxaa loo bixin karaa danta qofka danaynaya isla waqtiga la soo saaro go'aanka ansixinta ee lagu sheegay qodobka hore.

3. Xaaladaha kale, waxaa qofka danaynayaa codsiga u samayn kara Gudoomiyaha Maxakamada Racfaanka ee ikhtisaaska dhuleed u leh fulinta qodobada madani ee ku dhex jira xukunka ciqaabeed ee dalka shisheeye.

4. Ilaa inta la dabiqi karo faqradaha 1, 2, & 3 aad ee qodobka hore, ayaa la dabaqayaa.

**CINWAANKA 2AAD**
Qodobbo kama danbays ah

**Qod. 287**
**Awoodda soo saarista wareegtooyin**

Xoghayaha Garsoorka iyo Diintu (Wasiirka) wuxuu soo saari karaa wareegtooyinka lama huraanka ah ee Xeerkan lagu dhaqan-gelinayo.

**Qod. 288**
**Tirtirid**

Kuwan soo socda waa la baabi'iyay ku dhaqankooda:

a) Xeerka habka Ciqaabta Talyaaniga (Italian Criminal Procedure Code);
b) Xeerka Habka Ciqaabta (Criminal Procedure Ordinance);
c) Qodobada ku saabsan habka ciqaabta ee ku jira "Xeerka Nidaamka Garsoorka" ee lagu ansixiyay Xeer. Lr. 5, 1956 iyo Xeerka Cadaymaha Hindiya 1872;
d) Xeer nidaamiyaha ku saabsan Xafiiska Kaydka Denbiyada ee lagu ansixiyay Degreeto Lr.32, 1956;
e) Qodobkasta oo kale oo ka hor imanaya ama aan la socon Karin Xeerkan.